WARBIXIN CILMI BAARIS

SOMALI
PUBLIC AGENDA

# U DAADEJINTA CASHUUR URUURINTA IYO ADEEGYADA BULSHADA DOWLADAHA HOOSE

## EE PUNTLAND, GALMUDUG, IYO BANAADIR

SOMALI PUBLIC AGENDA WARBIXIN CILMI BAARIS NO. 09

Farxaan Isxaaq Yuusuf

Abriil 2023



# U DAADEJINTA CASHUUR URUURINTA IYO ADEEGYADA BULSHADA DOWLADAHA HOOSE

E PUNTLAND, GALMUDUG, IYO BANAADIR

Somali Public Agenda warbixin cilmi baaris No. 09

**Farxaan Isxaaq Yuusuf**

**Abriil 2023**

Somali Public Agenda
Mogadishu
Somalia
Tel: +252(0)85 8358
Email: info@somalipublicagenda.org
Website: <https://www.somalipublicagenda.org>

© Somali Public Agenda 2023

Somali Public Agenda (SPA) waa hay'ad aan macaash doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan.

Marka laga reebo sawirada dhinac saddexaad uu qaaday, nuqulkan elektorooniga ah ee daabacaadan waxaa lagu heli karaa shatiga Creative Commons Attribution-NonCommercial-ShareAlike 3.0 (CC BY-NC-SA 3.0). Waxaad xor u tahay inaad nuqul ka daabacato, qeybiso oo gudbiso daabacaadda waase haddii aanay ganacsi ahayn, oo aad si habboon u sheegto daabacaadda, sidoo kalena aad ku faafiso shati lamid ah. Macluumaad intaas ka badan haddii aad rabtid, booqo shabakada Creative Commons: <http://creativecommons.org/licenses/by-nc-sa/3.0/>.

Somali Public Agenda
Mogadishu
Somalia
Tel: +252(0)85 8358
Email: info@somalipublicagenda.org
Website: <https://www.somalipublicagenda.org>

Design and layout: Somali Public Agenda
Copyeditor: Peter Chonka

## Mahadnaq

Cilmibaaristan waxaa lagu sameeyay taageero ka timid National Endowment for Democracy (NED). Warbixinta waxaa tafatiray Peter Chonka, oo bare ka ah King's College London sidoo kalena Fellow ka ah Somali Public Agenda.

## Ku saabsan Qoraaga

**Farxaan Isxaaq Yusuf** waa ku xigeenka agaasimaha fulinta iyo sidoo kale agaasimaha Xarunta Waxbarashada iyo Horumarinta ee Somali Public Agenda. Sidoo kale waa bare sare ee Kuliyadda Culuumta Siyaasadda iyo Maamulka Guud ee Jaamacadda Muqdisho. Farxaan waxa uu BA iyo MSc ee cilmiga siyaasadda ka qaatay Jaamacadda Muqdisho iyo Jaamacadda Omdurman ee Suudaan. Farxaan waxa uu khibrad 8 sano ka badan u leeyahay cilmibaarista iyo macallinimada. Mowduucyada ugu waaweyn ee cilmibaarista ee uu xiiseeyo waxaa kamid ah dhisidda dowladnimada colaadaha kadib, maamul wanaagga iyo qaran-dhisidda.

## Table of Contents

**1.0 Nuxurka warbixinta** .......... **1**

**1.0 Taariikh kooban oo ku saabsan maamul dadejinta** .......... **4**

1.1 Maamul-daadejinta xilligii dowladdii rayidka (1960-1969) .......... 4

1.2 Doorka dowladaha hoose ee dowladdii militariga .......... 6

1.3 Federaaleyn burburkii dowladda kadib .......... 7

**2.0 Habka cilmibaarista loo sameeyay** .......... **13**

**3.0 Xaaladda maamul daadejinta ee Soomaaliya** .......... **15**

3.1 Dulmar .......... 15

3.1.1 Puntland .......... 16

3.1.2 Galmudug .......... 17

3.1.3 Gobolka Banaadir .......... 19

3.2 Qaab-dhismeedka sharci .......... 19

3.2.1 Puntland .......... 20

3.2.2 Galmudug .......... 20

3.2.3 Gobolka Banaadir .......... 21

3.3 Qaab-dhismeedka dowladaha hoose .......... 21

3.4 Wacyiga dadweynaha iyo fahamka daadejinta .......... 23

3.5 Mudnaanta dowladaha hoose .......... 25

3.6 Adeeg-bixinta dowladaha hoose .......... 27

3.7 Heerka daadejinta maaliyadda ee dowladaha hoose .......... 32

3.7.1 Dakhli uruurinta dowladaha hoose: Noocyada iyo ilaha .......... 32

3.7.2 Miisaaniyadda dowladaha hoose .......... 34

3.7.3 Wareejinta maaliyadeed .......... 36

3.7.4. Isla xisaabtanka dowladaha hoose .......... 38

**4.0 Caqabadaha hortaagan daadejinta maaliyadda & adeeg-bixinta ee dowladaha hoose** **40**

**5.0 Gunaanad** .......... **45**

**6.0 Talooyin tixgelin mudan** .......... **47**

**7.0 Tixraac** .......... **50**

## 1.0 Nuxurka warbixinta

Soomaaliya waxay nidaamka federaalka ah si rasmi ah u qaadatay sanadkii 2012 kadib sanado badan oo ay jireen dagaallo sokeeye oo burbur sababay iyo maamullo kumeelgaar ah. Nidaamkan weli ma dhamaystirna. Sikastaba ha ahaatee, hirgelintiisa waxay jawaab u ahayd tijaabooyinkii lagu guul-darreystay ee lagu uruuriyey awoodihii oo dhan dowladda dhexe xilligii dowladdii milateriga (1969-1991) oo dhammaan awoodaha ku uruurisay caasimadda Muqdisho. Taasi waxay keentay in Soomaalidu ay boqollaal kiiloomitir u safraan caasimadda si ay u helaan adeegyo ay ahayd in ay ka helaan dowladaha hoose. Haddaba, nuxurka nidaamka federaalku waxa uu ahaa in awoodda loo daadejiyo maamullada heer deegaan si adeegyada loogu dhaweeyo halkaasoo ay dadka intiisa badan ku nool yihiin, loogana gudbo dhibaatooyinka saameynta leh ee uu lahaa xukunkii dhexe. Federaaleynta dalka waxa ay inta badan ku koobnaatay dhisidda iyo xoojinta hay'adaha heer dowlad-goboleed halkii ay ahaan lahayd xoojinta dowladaha hoose. Dowlad-goboleedyada la dhisay ayaa awoodaha oo dhan isugu geeyay caasimadaha dowlad goboleedyada. Golihii deegaan ee ugu horreeyay ee Dowlad-goboleed laga sameeyo waxaa laga dhisay Puntland sanadkii 2009. Dowlad-goboleedyada kale sida Galmudug waxay billaabeen dhismaha goleyaasha deegaanka sanadkii 2020.

Daraasaddan waxay qiimeyn ku sameyneysaa daadejinta maaliyadda iyo bixinta adeegyada ee Puntland, Galmudug, iyo Maamulka Gobolka Banaadir. Daraasadda waxaa laga sameeyey sagaal degmo oo katirsan ee saddexdan maamul si xog iyo macluumaad loogu biiriyo doodaha ku saabsan muhiimadda ay leedahay in maaliyadda iyo adeeg bixinta loo daadejiyo dowladaha hoose si loo hirgeliyo dadaallada federaaleynta Soomaaliya. Si taas loo gaaro, daraasaddu waxay wareysatay 84 qof oo ku sugan magaalooyinka daraasadda laga sameeyay. Waxaa cilmibaarista kasoo baxay natiijooyinkan muhiimka ah ee soo socda ee muujinaya heerka maamul-u-daadejinta dowladda hoose:

- Dowlad-goboleedka Puntland waxay leedahay kaabayaal sharci oo aasaasi ah; qodobo dastuur, sharciga dowladaha hoose (Lr. 7), iyo siyaasadda maamul daadejinta (oo la sameeyay 2018 islamarkaana dhacday 2022) laakiin maamulladii is xigxigey weli ma aysan u hirgelin maamul-daadejinta sida ku qeexan shuruucda.
- Galmudug, shuruucda iyo xeerarka lagu maamulayo maamul-daadejinta heer degmo ma dhameystirna balse dowlad-goboleedku wuxuu leeyahay sharciga dowladaha hoose (Lr. 4).
- Dowlad-goboleedyada Puntland iyo Galmudug waxay haystaan awoodaha maaliyadeed iyo adeeg bixin ee dowladaha hoose iyagoo ku marmarsiyooda in dowladaha hoose aysan lahayn karti iyo awood ay ku qabtaan hawlahaas. Dhinaca kale, masuuliyiin ka tirsan dowladaha hoose ayaa diiday sheegashadaas, waxa ay ku doodeen in masuuliyiinta dowlad-goboleedyadu ay ka cabsi qabaan in ay waayaan dhaqaale ay ka helaan mashaariicda adeeg bixinta ee laga fuliyo dowladaha hoose.

- Dowlad-goboleedyada waxay uruuriyaan inta ugu badan canshuuraha dowladaha hoose, balse qeyb kamid ah dakhliga lagasoo uruuriyey uma qoondeeyaan dowladaha hoose si ay u noqoto qaab wareejin maaliyadeed. Saameynta arrintan ayaa si weyn looga dareemay Gobolka Banaadir oo qaar kamid ah maamullada degmooyinka aysan awoodin bixinta kharashka billaha ah iyadoo lacago ay ku leeyihiin shirkado gaar loo leeyahay.
- Keliya Garoowe, Galkacyo, iyo Qardho oo kamid ah goobaha daraasadda laga sameeyey ayaa leh nidaam maaliyadeed oo loogu talagalay canshuuraha yaryar ee loo oggol yahay inay uruuriyaan dowladaha hoose oo ay ku bixiyaan kharashaadka dowladaha hoose.
- Si lamid ah, keliya Garoowe, Galkacyo, iyo Qardho ayaa leh habab isla xisaabtan aasaasi ah, tusaale; Nidaamka Maareynta Macluumaadka Maaliyadeed, miisaaniyad sanadeedka, xiritaanka xisaabaadka maaliyadeed ee sanadlaha ah, iyo hanti-dhowrka gudaha, halka dhiggooda Galmudug iyo Banaadir aysan lahayn hannaan isla xisaabtan.
- Goleyaasha deegaanka ee Puntland (marka laga reebo Qardho, Eyl, iyo Ufeyn) iyo Galmudug waxaa lagu magacaabay nidaam aan toos ahayn. Sidaas darteed, wasaaradaha dowlad-goboleedyadu waxay heleen marmarsiiyo ay kaga fogaanayaan awood siinta dowladaha hoose iyagoo ku andacooda in goleyaasha deegaanku aanay lahayn sharciyad ballaaran. Eeddan waxaa sidoo kale loo jeedin karaa baarlamaannada dhammaan dowlad-goboleedyada maadaama ay odayaasha beelaha soo xulaan.
- Puntland ayaa bishii Oktoobar 2021-kii qabatay doorashooyinkii goleyaasha deegaanka ee qof iyo cod oo ka dhacday Qardho, Ufeyn iyo Eyl. Sikastaba ha ahaatee, goleyaashan deegaanka ayaa weli awood lahayn. Galmudug waxay adeegsatay doorashooyin dadban si ay u dhisto goleyaasha deegaanka ee degmooyinka. Oday dhaqameedyada ayaa waxay soo xuleen ergo ka kooban shan xubnood si ay ugu yaraan labo murashax ugu doortaan kursiga golaha deegaanka. Haddii si kale loo dhigo: federaaleynta iyo maamul-daadejinta ayaa weli ah mid aan dhammeystirnayn. Waxay u jiraan magac ahaan oo keliya.
- Dowladaha hoose waxay la kulmaan caqabado aad u adag oo ay kamid yihiin: ka go'naan la'aanta siyaasadeed ee maamul daadejinta, jiritaan la'aanta wakiillo lasoo doortay oo dowladaha hoose ah, awoodda farsamo oo xadidan, ka-tagista shaqada ee shaqaalaha oo badan, iyo la'aanta ama xaddidnaanta dakhli uruurinta.

Si arrimaha wax looga qabto, daraasaddu waxay ku talinaysaa qodobbada soo socda:

- Waa in dowlad-goboleedyada, oo gacan ka helaya dowladda federaalka iyo hay'adaha deeq-bixiyayaasha, ay dhisaan oo ay hagaajiyaan kartida iyo karaanka dowladaha hoose si ay uga caawiyaan in ay la wareegaan mas'uuliyadahooda iyo bixinta adeegyada.
- Waa in dowlad-goboleedyada, gaar ahaan kuwa ay maamul-daadejintu warqad keliya ugu qorneyd muddo dheer, ay dejiyaan waqtiyo iyo qorshe-howleedyo qeexaya baahinta adeegyada iyo maaliyadda.

- Waa in dowlad-goboleedyada ay wareejin maaliyadeed oo cayiman siiyaan dowladaha hoose. Lacagtaasna waa in laga bixiyaa dakhliga gudaha kasoo xarooda iyo lacagaha ay ka helaan dowladda dhexe. Waqtigan, dowladaha hoose ma helaan qoondo joogto ah ama qeyb rasmi ah oo kamid ah lacagahaas.
- Waa in dowlad-goboleedyada, madaxda dowladaha hoose, ururrada bulshada rayidka ah, iyo hay'adaha taageera maamul daadejinta ay isku biiriyaan dadaalladooda si ay u sameeyaan olole wacyigelineed oo degdeg ah si dadka deegaanka loo baro sida ay tahay in dowladaha hoose u shaqeeyaan, loona yareeyo faham-xumida jirta.

# 1.0 Taariikh kooban oo ku saabsan maamul dadejinta

Si loo fahmo heerka ay maanta marayso federaalaynta/baahinta xukunka Soomaaliya waa in dib loogu eego waaya-aragnimada taariikheed ee dowladaha hoose ee dhinaca adeeg bixinta iyo qaab-dhismeedka sharci ee Soomaaliya gumaysiga kadib. Qeybtani waxay dib-u-eegis ku samayneysaa waaya-aragnimada maamul daadejinta Soomaaliya waxayna u qeybineysaa afar qeybood. Labada qeybood ee hore waxay eegayaan qaab-dhismeedka sharci ee xoojiyey maamul-daadejinta, gaar ahaan qodobbada dastuuriga ah iyo xeerarka iyo shuruucda dowladaha hoose. Waxa kale oo ay eegaysaa adeegyadii ay dowladaha hoose bixin jireen iyo dakhliga loo oggolaa inay uruuriyaan si waafaqsan shuruucdii lagu aasaasay. Qeybta saddexaad waxay dib u eegaysaa dadaalladii lagu doonayay in lagula tacaalo raadkii laga dhaxlay taliskii milateriga iyo in la beddelo ku uruursanaanta awoodda ee dowladda dhexe. Dadaalladaas waxaa ay markii ugu horreysay soo shaac bexeen shirkii nabadda ee Carta ka dhacay 2000, kaasoo lagu ansixiyay axdi qarameed lagu dhisay nidaam dowladeed oo baahsan (oo horseeday dhismihii dowladii kumeelgaarka ahayd). Kadib, shirkii Mbathati ee sanadkii 2004 waxa ay Soomaaliya qaadatay nidaam federaal ah, kaasoo uu ka dhashay dastuurka kumeelgaarka ahaa ee la ansixiyay 2012. Qeybta afraad waxay diiradda saareysaa horumarka maamul-daadejinta Soomaaliland, oo la aasaasay 1991, islamarkaana ku dhawaaqday inay ka go'day Soomaaliya. Inkastoo Puntland (oo la dhisay sanadkii 1998) ay soo billowday maamul daadejinta kahor inta aan la dhisin dowladda federaalka, haddana waxaa si faahfaahsan loogu falanqeeyay qeybaha dambe ee warbixintan.

## 1.1 Maamul-daadejinta xilligii dowladdii rayidka (1960-1969)

Kadib markii ay Soomaaliya xornimada heshay bishii Luulyo 1960-kii , waxay qaadatay nidaam dowlad dhexe oo mideysan, kaasoo ahaa nooc ay door bideen dalal badan oo Afrikaan ah gumeysigii kadib. Dalku waxa uu isticmaalayay nidaam dowlad dhexe ilaa 1991 oo uu burburay qarankii Soomaaliyeed (ConstitutionNet, 2018). Sikastaba ha ahaatee, dabeecadda nidaamka dhexe ee mideysan; qaabkii dowladda ay u shaqeyneysay; qodobbo dastuuri ah/sharci oo oggolaanaya/dhisaya maamullada degmooyinka; heerka madax-bannaanida ee degmooyinka; iyo heerka adeeg bixinta ayaa kala duwanaa dowladdii rayidka (1960-1969) iyo taliskii militeriga (1969-1991).

Dowladdii rayidka ahayd ee Soomaaliya xornimada kadib, oo ahayd midowga labadii gobol ee Talyaaniga iyo Ingiriisku xukumayeen, waxay lahayd dastuur dimuqraadi ah oo qeexaya in dowladda cusub tahay Jamhuuriyad loo dhan yahay, dimuqraadi ah iyo sidoo kale jamhuuriyad mideysan (Dastuurka Jamhuuriyadda Soomaaliya, 1960). Sida ku cad nidaamkan mideysan, dastuurku waxa uu dhigayay daadejinta, gaar ahaan maamul-daadejinta. Qodobka 86-aad waxa uu dhigayaa in mar kasta oo ay suuragal tahay, howlaha maamulka la daadejiyo oo ay fuliyaan laamaha hoose ee dalka" (Dastuurka Jamhuuriyadda Soomaaliya, 1960).

Qodobka 86-aad ee dastuurkii 1960-kii ayaa weli ah qodobka keliya ee Jamhuuriyaddii Soomaaliya si buuxda u sheegaaya daadejinta. Laakin qodobku waxa uu madmadow kaga tagay dabeecadda maamul daadejinta iyo doorka iyo awoodaha dowladaha hoose. Tani waxay dalool weyn ku ahayd xaqiijinta mabda'a ugu muhiimsan ee dimoqraadiyadda, kaasoo ah in dadka loo oggolaado inay deegaannadooda u doortaan wakiillo maxalli ah oo baahidooda ka jawaaba ayna la xisaabtamaan. Sidoo kale, dadkii qoray dastuurka waxa ay masiirka daadejintan oo aan la cayimin ku xireen go'aanka xukuumadda talada haysa iyo rabitaankeeda ku aaddan in lagu dhaqmo iyo in kale. Ma ahayn waajib dastuuri ah oo ay ahayd in la ilaaliyo (Ismail, 2010). Ismail Ali Ismail (2010) oo ka hadlayay sababta ay arrintani u dhacday, waxa uu ku fasiray in dastuur-qorreyaashu aysan "wakhti iyo juhdi gelinin in ay fahmaan nooca daadejinta ay Soomalida u baahan yihiin". Waxa kale ee uu ku doodayaa in qorayaasha dastuurku aysan sawiranin dhisidda dowlad hoose ama ay u maleeyeen in xubnaha deegaanka ee ku xusan qodobka 86-aad ay hoos imaanayaan nidaamka maamul daadejinta (Ismaaciil, 2010). Mugdiga muuqda ee arrinku wuxuu la xiriiri karaa kakanaanta aragtida daadejinta lafteeda (Smoke, 2003).

Waxaa intaa dheer, jahwareerka iyo madmadowga qodobka 86-aad waxa uu sidoo kale ka jiray waxa dastuur-sameeyayaasha ay ula jeedeen hay'adaha maxaliga ah iyo hay'adaha dowliga ah ee la doonayo in lagu baahiyo howlaha dowladda dhexe. Xubnaha maxalliga ahi ma waxa ay la macno yihiin dowladaha hoose mise waa xafiisyada wasaaradaha/wakaaladaha? Haddii ay midda hore tahay, daadejinta noocan ahi waxay noqonaysaa awood-daadejin. Haddii ay ahayd tan dambe, nidaamka maamul ee u dhigma waxaa uu noqonayaa maamul-daadejin.

Inkastoo ay jireen jahawareeradan ka dhashay qodobka daadejinta, daadejintii Jamhuuriyaddii ugu horreysay ee Soomaaliya waxaa ka dhex muuqatay masuuliyad-baahinta (baahinta maamulka) iyo awood-baahinta (daadejinta siyaasadda) (World Bank Group, 2015). Arrintan waxaa ka dhalanaya su'aalo badan oo xasaasi ah oo ay kamid yihiin sababta ay dowladdu u dooratay labo nidaam oo ah labada dhinac ah ee maamul-daadejinta. Intee in le'eg ayay siyaasad-dejiyeyaasha dhab ka ahayd u-daadejinta howlaha dowladaha hoose ee lasoo doortay si ay awood ugu yeeshaan bixinta adeeg loo siman yahay? Siyaasad-dejiyayaashu miyay tuhun ka qabeen awoodda dowladaha hoose u leeyihiin fulinta daadejinta awoodaha siyaasadeed? Miyay ka warhayeen sida qaadashada mas'uuliyad baahinta oo lagu daray awood-baahinta ay wax u dhimeyso waxtarka laga filayo kan dambe?

Labada jiho/xal ee hay'adeed, oo ay Soomaaliya raacday, waxay isku dareen kan ugu daciifsan (baahinta shaqooyinka) iyo kan ugu xooggan (baahinta awoodaha) ee daadejinta. Baahinta shaqooyinka waxay ka kooban tahay sameynta xafiisyo ama xarumo shaqo oo shaqeeya halkii ay ka ahaan lahayd heerar cusub oo dowladeed halka awood-baahinta ay ku lug leedahay dhisidda heerar hoose oo dowladeed oo ay dadka deegaanka si toos ah ula xisaabtamaan. Xaaladdan dambe, heerarka hoose ee dowladdu waxay ku heystaan madax-bannaani iyo mas'uuliyadda fulinta, laakiin dowladda dhexe waxay dowladahan heerka-hoose siineysaa awaamiir siyaasadeed iyadoo aan faragelineynin howlahooda caadiga ah (Max Planck Foundation for International Peace and Rule of Law, 2016) .

Dowladdii rayidka ahayd (1960 ilaa 1969), dalku wuxuu lahaa lix gobol oo Talyaanigu maamuli jiray – Banaadir, Jubbada Hoose, Jubbada Sare, Hiiraan, Mudug, iyo Majeerteeniya – iyo labo gobol oo ka tirsanaa maxmiyaddii hore ee British Somaliland – waqooyi-bari iyo waqooyi galbeed. Siddeeda gobol waxay lahaayeen siddeed iyo afartan (48) degmo, kuwaasoo toddobo kamid ahi ay ku yaaleen woqooyiga. Maamulka gobolladaas iyo degmooyinkaas waxaa hayey guddoomiyeyaasha gobollada iyo degmooyinka ee uu u magacaabayay Wasiirka Arrimaha Gudaha (Ismaaciil, 2010). Waxay ahaayeen magacaabis kor ka imaaneysay.

Sanadihii ugu horreeyey ee xornimada, maamulladii gobollada la isku daray waxaa kasoo muuqday kala duwanaansho ay sabab u tahay dhaxalkii uu gumaystaha uga tagay gobolladdii uu Talyaaniga ka talin jiray ee Koonfurta Soomaaliya iyo kuwii Ingiriiska ee Waqooyiga Soomaaliya. Tani waxay adkeysay sameynta hal siyaasad qaran. Kala duwanaashaha ugu weyn ee u dhexeeyay Soomaalidii kusoo dhaqantay maamulladii Talyaaniga iyo Ingiriiska waxa uu ahaa mid aad u muuqda marka loo eego qaab-dhismeedka maamulka, qaab-dhismeedka canshuuraha, iyo qaabka loo fuliyo howlaha fulinta. Farqiga muuqda ayaa ahaa sida ay xildhibaanada ku imaanayeen xafiiska. Koonfurta, dhammaan xildhibaanada ayaa loo codeeyay halka xildhibaanada waqooyiga ay isugu jiraan kuwo la doortay iyo kuwo la magacaabay. Goleyaasha waqooyiga waxay u uruurinayeen canshuuraha guryaha, kirada dhulka, iyo khidmadaha si ka duwan koonfurta halkaasoo ay dowladda dhexe maamullada hoose u qoondeysay qeyb kamid ah cashuuraha gaarka ah sida canshuuraha badeecada dibadda ka timaada iyo canshuurta dakhliga. Sikastaba ha ahaatee, goleyaasha dowladaha hoose ee koonfurta iyo waqooyiga waxay ku uruurinayeen khidmadaha suuqa, oo ahayd isha ugu weyn ee dakhliga (Ismaaciil, 2010). Kala duwanaanshuhu halkan kuma ekeyn ee waxa uu sidoo kale ka muuqday degaannada ay maamulaan gobollada waqooyi iyo kuwa koonfureed. Goleyaasha waqooyi waxay maamuli jireen magaalooyinka iyo miyiga labadaba marka la barbar dhigo goleyaasha koonfurta oo keliya ku koobnaa magaalooyinka (Ismaaciil, 2010).

Si loo hagaajiyo xiriirka loona xakameeyo khilaafaadka maamul ee aan soo sheegnay, dowladdii cusubeyd ee rayidka waxay dejisay Sharciga Doorashooyinka Goleyaasha Deegaanka iyo Maamulka Dowladaha Hoose deegaanka (Xeer Lr. 19 ee 14 Agoosto 1963). Waxay ujeedadu ahayd in la mideeyo hab-dhaqanka kala duwan ee maamullada deegaanka ee koonfurta iyo waqooyiga taasoo qeyb ka ahayd dadaallada lagu mideynayo nidaamyada kala duwan ee ka jiray jamhuuriyadda cusub si looga gudbo dhibaatooyinka dowladda soo food saartay.

Sharciga cusub ee Lr. 19, gaar ahaan qodobka 3-aad, faqradiisa 1-aad, wuxuu maamulka deegaanka u kala saaray afar qeybood: qeybta A waxaa loo qoondeeyay oo keliya maamulka dowladda hoose ee Muqdisho; qeybta B waxaa ku jiray maamulka dowladaha hoose ee caasimadaha gobollada; qeybta C waxa uu ka koobnaa maamulka dowladaha hoose ee heer degmo halka xaafadaha lagu magacaabay 'mamulka deegaannada kale' la isugu geeyay qeybta D (Sharciga Doorashada Maamulka Deegaanka & Golayaasha Deegaanka, 1963). Farqada 2-aad ee qodobka 3-aad waxa uu wasiirka arrimaha gudaha siiyay awoodda uu ku dallacsiin karo darajooyinka C & D isagoo tixgelinaya dadka, bedka, muhiimadda dhaqaale iyo maaliyadeed.

## 1.2 Doorka dowladaha hoose ee dowladdii militariga

Inkastoo ay jireen dhaliillo badan oo loo jeediyey nooca daadejinta ee dowladdii rayidka (Elmi, 2015), ma aanu waarin kadib markii dowladdii lagu riday afgambi aan dhiig ku daadan oo ay sameeyeen militariga bishii Oktoobar 1969. Tani waxay ku dhacday iyadoo marmarsiiyo laga dhigayo musuqmaasuq baahsan ee dowladdii rayidka ahayd (Laitin, 1976). Taliskii militariga ee cusbaa waxa uu burburiyay hay'adihii iyo hababkii dimuqraadiga ahaa waxa uuna qaatay nidaam dowladeed oo awoodda lagu uruuriyay dowladda dhexe. Sidaas darteed, waxa uu joojiyey doorashooyinkii 'dowladaha hoose' oo ay qaban jirtay dowladdii rayidka ee la riday. Sikastaba ha ahaatee, waxa ay joogteeyay qeyb kamid ah daadejinta oo ahayd baahinta shaqooyinka (World Bank Group, 2015).

Awaamiirteedii ugu horreysay, dowladdii militariga waxa ay soo saartay wareegto (Xeer Lr. 1 ee Oktoobar 1969) lagu dhisay Goleyaasha Kacaanka ee Gobollada iyo Goleyaasha Kacaanka Degmooyinka. Niman ka tirsanaa militariga iyo booliska ayaa laga dhigay guddoomiyeyaasha gobollada iyo degmooyinka iyadoo guddoomiyayaashii hore ee rayidka ahaa laga dhigay xubno ka tirsan goleyaashaas (Ismaaciil, 2010).

Bishii Juun 1972-kii, taliskii militariga ayaa soo saaray Xeerka Dib-u-habeynta Dowladaha Hoose (Xeer Lr. 58 ee 8 Juun 1972). Waxa uu ka koobnaa xeerka shan cutub, 35 qodob, iyo hal jadwal oo ku lifaaqan. Sida ku cad qodobka 2(1), xeerku waxa uu ku dhawaaqay in habka maamul hoosaadka ee 'Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya' uu yahay mid ku dhisan Dimuqriidiyeynta Hantiwadaagga ku dhisan. Waxaa xusid mudan in hantiwadaagga iyo qaab-dhismeedka maamulka militarigu aysan waafaqsanayn fikradda dowladaha hoose ee madaxa-bannaan. Ma jiro dal hantiwadaag ah ee uu maamulo hal xisbi oo si dhab ah u daadejiyey awoodaha ama qaatay nidaam 'federaal'. Sikastaba ha ahaatee, sharcigu wuxuu maamulka maxalliga ah u oggolaaday in ay kor u qaadaan dakhliga kasoo xarooda qaar kamid ah khidmadaha yaryar iyo canshuuraha iyo iibka qaar kamid ah adeegyada magaalada si ay qeyb ahaan u maalgeliyaan qaar kamid ah adeegyada aasaasiga ah ee dowladda hoose. Sikastaba ha ahaatee, dhammaan canshuuraha iyo kharashaadka kale waxaa maamulayay dowladda dhexe (World Bank Group, 2015).

Talisku waxa uu dib-u-habeyn ku sameeyay sideeddii gobol ee dowladdii rayidka waxa uuna ka dhigay lix iyo toban gobol iyadoo siddeed iyo afartankii degmo aan wax lagu kordhinin. Dowladaha hoose waxaa gacanta ku hayay goleyaasha gobollada iyo degmooyinka. Xubnaha goleyaashan waxaa magacaabayay dowladda dhexe (Metz, 1992). Inkastoo ay jireen ka hadalka maamul-daadejinta iyo muujinta rabitaanka haykal dowlad-daadejin, siyaasadda iyo dhaqan-gelintu waxaa gacanta ku hayay guddoomiyaha golaha sare – Maxamed Siyaad Barre (Samatar, 1989). Muddadaas waxaa maamullada gobollada iyo degmooyinka madax ka ahaa ciidan. Hogaamiyeyaashani faham kama haysan dowlad hoose, iyadoo howlaha ay fulinayeen xirfadlayaal rayid ah (Ismaaciil, 2010).

### 1.3 Federaaleyn burburkii dowladda kadib

Nidaamkii dowladdii hoose ayaa burburay markii taliskii Siyaad Barre uu ku burburay cadaadiskii militari ee kooxihii hubeysnaa kuwaasoo isku baheystay inay xukunka ka tuuraan. Sikastaba ha ahaatee, burburkii dowladnimo ee Soomaaliya gashay ayaa sababay faragelinta beesha caalamka si loo joojiyo daadinta dhiigga iyo in gargaar bini'aadantinimo la gaarsiiyo dadka. Qaramada Midoobay ayaa billowday Howlgalka Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNOSOM) kadib qaraarkii 814 ee Maarso 1993 si loo 'caawiyo dadka Soomaaliyeed, si loo horumariyo korna loogu qaado dib-u-heshiisiinta siyaasadeed, iyadoo dhammaan qeybaha bulshada Soomaaliyeed ay ka wada qeyb qaadanayaan iyo sidoo kale dib-u-yagleelidda hay'adaha qaranka iyo kuwa gobollada'. Iyadoo laga duulayo waajibaadkaas, waxaa la sameeyay dastuurkii degmooyinka. Waxa uu dastuurku farayay in degmooyinku yeelan doonaan 21 xubnood, oo lagasoo kala xuli doono oday dhaqameedyada, hoggaamiyeyaasha cusub, iyo haweenka (Bradbury, 1994)

Qorshaha waxa uu ahaa in gobol walba uu yeesho shan degmo iyo in UNOSOM ay koonfurta Soomaaliya ka sameyso 39 gole deegaan, iyadoo qaddiyadda Soomaaliland qaab kale loo maareynayo. UNOSOM waxa ay sheegtay in ay dhistay 21 gole deegaan lagasoo bilaabo Agoosto 1993. Hase yeeshee, howshaas waxaa dhaleecayn badan u jeediyey UN-ta dhexdeeda iyo hay'adaha aan dowliga ahayn oo maxaliga ah. Howshan ayaa sababtay in dagaalo hubeysan ay ka dhacaan deegaannada sida Qoryooley, Baraawe iyo Jowhar oo ah goobihii goleyaasha deegaanka laga dhisay. Qorshihii ayaa fashilmay iyadoo lagu guuldarreysatay in la gaaro yoolkii. Intaa waxa dheer, qorshaha dhismaha goeyaasha deegaanka ayaa iskacaabin ka dhaliyey qabaa'ilka iyo beelaha wada dega deegaannada la doonayay in laga dhiso goleyaasha deegaanka (Bradbury, 1994).

Isku daygaas waxaa barbar socday dadaal ay indheegaradka sameeyeen oo lagasoo abaabulay caasimadaha dalalka reer galbeedka, gaar ahaan Midowga Yurub, oo lagu raadinayay doorashooyin qaab-dhismeed siyaasadeed ee baahsan. Waxaa la rabey in lagu beddelo nidaamkii kali-taliska ahaa ee soo jiray muddo ku dhow 20 sano, oo kusoo gabogaboobay burburkii ku yimid qarannimadii Soomaaliya. Daraasad la sameeyay ee uu ciwaankeedu ahaa "*Qaab-dhismeedka Siyaasadda Baahsan ee Soomaaliya: Xulashooyin Dhowr Ah*", ayuu maalgeliyey Midowga Yurub, waxaana sanadkii 1995-kii sameeyay Ioan M. Lewis iyo James Mayall oo ka tirsanaa Kulliyadda Dhaqaalaha ee London. Daraasaddan qaab-dhismeedka siyaasadeed ee xukunka baahsan waxay soo bandhigtay xulashooyin faafaahinaya doodaha lagu doonayay in lagu dhiso qarankii Soomaaliyeed ee burburay. Waxaa xulashooyinka lasoo jeediyey kamid ahaa isbaheysi/konfederaal, federaal, dowlad dhexe oo baahsan oo leh damaanad madax-bannaanida gobollada, iyo ugu dambeyntii nidaam awood qeybsi qabiil ku saleysan (Lewis & Mayall, 1995).

Kala qeybsanaantii dalka waxa uu ku dhammaaday in ay soo ifbaxaan hoggaamiye beeleedyo, ugu yaraan qeybo kamid ah dalka maamulayay, halka qeybo kalena ay hareeyeen rabshado (Bradbury, et al., 2011). Sidaas darteed, codadka dalbanaya qaab dowladeed oo ay awooddu baahsan tahay ayaa si xoog ah u maamulayay doodihii xigay ee shirarkii nabadda.

U doodayaasha nidaamkan ayaa nidaam baahsan u rabay si aanu kalitalis usoo laabanin, loo xaqiijiyo madax-bannaanida dadka si ay u go'aansadaan aayahooda iyo inay helaan adeegyo dadweyne.

Inkastoo fikradda lagusoo qaaday shirarkii nabadda ee badnaa ee aan mira-dhalka noqonin, shirkii Carta (Jabuuti) ee 2000 ee loo qabtay Soomaaliya ayaa lagu heshiiyay axdi iyo nidaam dowladeed oo dammaanad qaadaya madaxbannaanida gobollada (ConstitutionNet, 2018). Sikastaba ha ahaatee, dowladdii kumeelgaarka ahayd ee loo igmaday in ay fuliso Axdiga waxa ay noqotay mid ku kooban Xarunta kumeelgaarka ah ee Madaxtooyada ee Degmada Hodon ee Gobolka Banaadir. Waxaa xigay caqabad culus ee awoodda iyo sharciyadda dowladda kumeelgaarka oo ka timid hoggaamiye-kooxeedyadii xoogga badnaa ee Muqdisho xilligaasi ka talinayay.

Kadib markii ay ku fashilantay dowladdii qaran ee kumeelgaarka in maamulkeeda uu dalka oo dhan ka shaqeeyo, ayaa shirar nabadeed oo isdaba joog ahaa kadib, dadaalkii ugu dambeeyay ee shirar kala duwan ayaa la abaabulay, ee uu garwadeen ka ahaa urur goboleedka IGAD waxaana lagu qabtay Kenya 2002-4. Natiijadu waxay noqotay ansixinta axdi dhigaya qaadashada nidaam federaal, oo ah qaab xoog badan oo maamul daadejin ah oo beddelaya nidaamkii Dowladdii Qaran ee Kumeelgaarka. Axdiga cusub ee Federaalka ayaa qeexayay dhismaha Guddiga Madaxa-bannaan ee Dastuurka Federaalka si ay u diyaariyaan dastuur waafaqsan mabaadi'da ku qeexan axdiga federaalka (ConstitutionNet, 2018). Dowladdii kumeelgaarka ahayd ee kasoo baxday shirkii Nairobi sanadkii 2004 waxay ahayd dowlad dibad joog ah. Waxaa lagusoo dhisay dalka Kenya, kadibna waxa ay u guurtay Baydhabo, kadibna Muqdisho. Markaa nidaamka federaalka waxa asal ahaan go'aamiyay siyaasiyiin iyadoo ay beesha caalamku si weyn ugu lug lahayd. Tani waxay qeyb ahaan sharraxaysaa sababta aanay hirgelintiisa u guuleysan.

Guddiga Madaxa-bannaan ee Dastuurka Federaalka oo lagu dhisay Baydhaba 2006, ayaa soo diyaariyay dastuur kumeelgaar ah, inkastoo labo sano iyo bar uu dib-u-dhac ku yimid magacaabistooda. Guddiga khubarada ayaa la sameeyay 2011 si ay u taageeraan oo ay uga caawiyaan Guddiga Madaxa-bannaan ee Dastuurka Federaalka in uu dib-u-habeyn ku sameeyo dastuurka. Kadib wakhti badan oo la qorayay dastuurka, waxaa si kumeelgaar ah u ansixiyay Agoosto 2012 Golaha Ansixinta Dastuurka Qaranka oo ka koobnaa 825 xubnood oo metelayay qeybaha kala duwan ee bulshada Soomaaliyeed (ConstitutionNet, 2018).

Dastuurka federaalka kumeelgaarka ah qodobka 48-aad waxa uu dhigayaa labo heer oo dowladeed oo kala ah dowladda federaalka iyo dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka, kuwaasoo ay hoos tagayaan dowladaha hoose. Sidaas darteed, dowladdii ugu horreysay ee Federaalka Soomaaliya ee uu hoggaaminayay Xasan Sheekh Maxamuud (2012-2016) ayaa loo igmaday inay dhisto dowlad-goboleedyada, waxayna ahayd tallaabadii ugu horreysay ee loo qaaday hirgelinta tijaabadii federaaleynta Soomaaliya. Dhisidda dowlad-goboleedyada waxay u dhacday qaab tartiib ah ah: Jubaland (2013), Koonfur Galbeed (2014), Galmudug (2015), iyo Hirshabelle (2016). Dowlad-goboleedka Puntland ayaa la dhisay kahor qaadashada nidaamka federaalka halka Soomaaliland ay weli ka baxsan tahay nidaamka, iyadoo la sugayo natiijada kasoo baxda wada-hadallada mustaqbalka ee dowladda federaalka iyo Soomaaliland.

Soomaaliland waxay leedahay waayo-aragnimo dowladnimo baahsan marka loo eego Soomaaliya inteeda kale.

Inkastoo dowladda federaalka loo igmaday inay dhisto dowlad-goboleedyada, haddana dastuurka kumeelgaarka ah kuma qasbayo dowladda federaalka ah inay dhisto dowlado heer degmo ah. Waxay ka dhigan tahay in 'federalism-ka' Soomaaliya uusan ahayn mid xoojinaya dhisidda dowlado hoose oo shaqeeya. Waxa uu ahaa mid ku saleysan awood qeybsi siyaasiyiin oo ka jawaabaya su'aalaha ah sidee lagu heli karaa nabad, sidee dalka la isugu heyn karaa, iyo side looga badbaadi karaa fashil dowladnimo. Mas'uuliyadda sameynta iyo awood-siinta dowladaha hoose waxaa leh dowlad-goboleedyada. Maadaama inta badan dowlad-goboleedyada ay yihiin kuwo cusub, dhismaha haykalka dowladeed ee heerka saddexaad ee dowladda weli si buuxda looma howlgelin, sidaas awgeed awoodaha weli lama daadejin. Sikastaba ha ahaatee, farqi muuqda ayaa ka dhex jira dowlad-goboleedyada marka la eego daadejinta awoodaha.

Soomaaliland iyo Puntland ayaa hormuud u ah maamul u daadejinta dowladaha hoose. Labadan maamul waxay leeyihiin qaar kamid ah aasaaska dowladaha hoose sida qodobbo dastuuri ah oo qeexaya dhisidda dowladaha hoose, xoojinta maamul-daadejinta, iyo awoodaha dowladaha hoose; sharciyada dowladaha hoose; siyaasadaha iyo istaraatiijiyado maamul daadejin; iyo siyaasadaha daadejinta maamulka maaliyadda. Qodobadan sharciyeed iyo kaabayaashan waxay ku jiraan marxalado bilow ah marka la eego dowlad-goboleedyada kale (UN-Habitat, 2016).

Iyadoo la raacayo habraaca federaalka ee Soomaaliya ay qaadatay, dowladda federaalka waxay ka shaqeysay soona bandhigtay habraacyo hagaya islamarkaana fududeynaya taabba-gelinta haykalka dowladnimo ee heer degmo. Qaab-dhismeedyadaas waxaa kamid ah Hannaanka Wadajir, Sharciga Dowladaha Hoose ee Qaranka (Xeer Lr. 116 ee 1-da Agoosto 2013), Qorshaha Horumarinta Qaranka Soomaaliya (NDP), iyo Istaraatiijiyada Xasilinta Qaranka.

### 1.4 Daadejinta ka jirta Soomaaliland iyo Puntland

Inkastoo Soomaaliland aysan xubin ka ahayn federaalka, haddana waxa ay horumar la taaban karo ka samaysay maamul-daadejinta. Lagasoo bilaabo 1993 ilaa 2002, maamulka Soomaaliland waxa uu magacabayay guddoomiyeyaal degmo. December 12, 2002, waxa uu maamulka qabtay doorashadii ugu horreysay oo heer degmo ah (Bradbury, 2011). Waxa ay doorashadaasi noqotay fursadii ugu horreysay ee lagu muujiyo maamul daadejin dowladnimo oo macno leh tan iyo xornimadii 1960-kii. Dastuurka 2001-da ee Soomaaliland ayaa dhigayaa qaab-dhismeedka maamul daadejinta oo ay kamid yihiin dowladaha hoose. Isagoo garawsan muhiimadda ay leedahay, dastuurku wuxuu qodobbada 109-112 ku qeexay dowladaha hoose. Dastuurku waxa uu dhigayaa in gobollada iyo degmooyinka ay masuul ka yihiin adeegyada sida caafimaadka, waxbarashada (ilaa dugsiyada dhexe), xanaanada xoolaha, amniga gudaha, biyaha, korontada, iyo isgaarsiinta (Haas, 2017).

Inkastoo dastuurka Soomaaliland dhididbbada u taagay maamul-daadejinta, ma ahan dukumeentiga sharci ee kaliye ee arrintan xoojinaya. Waxa jira Xeerka Gobollada iyo

Degmooyinka (Xeer Lr. 23 ee 2002), kaasoo si weyn wax looga beddelay sanadkii 2007. Qodobka 45(2) ee xeerka wax-ka-beddelka lagu sameeyay ee Xeer Lr 23 ayaa tilmaamaya canshuurta gaarka ah ee ay degmooyinku qaadayaan. Waxa kamid ah canshuurta shatiyada ganacsiga, canshuurta iibka xoolaha, canshuurta saxiixa, canshuurta madadaallada, canshuurta beeraha, canshuurta dhismayaasha, canshuurta dhulka, canshuurta ganacsiyada wadooyinka, canshuurta kala wareejinta, canshuurta kawaannada, canshuurta kaydadka biyaha, canshuurta diiwaangelinta, canshuurta diiwaangelinta dadka, canshuurta badeecadaha iyo qaadka (10%), canshuurta wax-soo-saarka, iyo canshuurta isticmaalka korontada.

Hannaanka maamul daadejinta Soomaaliland waxa uu wajahay caqabado adag oo ay kamid yihiin ku dhaqanka hooseeya ee maamul daadejinta; qaab-dhismeedka sharci oo aan ku filneyn; rabitaan la'aan siyaasadeed; iyo yaraanta baahsan ee shaqaale xirfad leh (Academy for Peace and Development and Interpeace, 2006).

Iyadoo ay jiraan caqabadaha wejiyada badan leh ee geedi-socodka maamul daadejinta, waxa la daah-furay mashruucyo kala duwan oo gacan ka geysanaya sameynta qaab-dhismeedka lagama maarmaanka u ah maamulka degmooyinka, iyadoo la siinayo awoodaha ka maqan, sidoo kalena la hormarinaayo qaab-dhismeedka sharci ee loo baahan yahay si maamulka deegaanka uu u yeesho waxqabad hufnaan iyo wax-ku-ool leh. Hindisaha ugu weyn ee arrintan la xiriira waa Barnaamijka Qaramada Midoobay ee Dowladaha Hoose iyo Adeeg Daadejinta ee Soomaaliya. Barnaamijkan oo ka koobnaa saddex weji ayaa waxaa si wadajir ah u fuliyqa shan hay'adood oo Qaramada Midoobay ah –ILO, UN-Habitat, UNCDF, UNDP iyo UNICEF.

Wejigii kowaad waxaa uu socday intii u dhexeysay 2008 ilaa 2012 halka wejigii labaad lasoo gabogabeeyey intii u dhexeysay 2012 iyo 2017. Barnaamijkan ayaa ujeedadiisu ahayd in bulshadu ay si siman u helaan adeegyo aasaasi ah oo hufan iyadoo loo marayo hay'adaha dowladaha hoose iyo in la horumariyo isla xisaabtanka iyo hufnaanta dowladaha hoose. Waxa uu mashruuca rajeynayaa in uu hormariyo qaab-dhismeedka sharci iyo hab-maamuleed ee daadejinta adeegyada degmooyinka Soomaalida, in la maalgeliyo adeeg bixinta iyadoo loo marayo goleyaasha degmooyinka iyo in la dhiso awoodda maamulidda shacabka ee heer degmo (UN-Habitat, 2016). Mid kasta oo kamid ah afarta hay'adood ee Qaramada Midoobay ee fulinayay barnaamijkan waxa ay ciyaarayaan doorar kala duwan oo is dhameystiraya. Iyadoo taageero ay bixineyso UN-Habitat, barnaamijka JPLG waxa uu gacan ka geysatey sameynta aasaaska hoose sida siyaasadaha, qaab-dhismeedyada sharci, iyo istaraatiijiyadaha, kuwaasoo maamul daadejinta lagu dhisi karo laguna sii wadi karo Soomaaliland iyo Puntland, ee uu barnaamijka markii hore diiradda saareyey kahor inta aan laga billaabin dowlad-goboleedyada cusub.

Iyadoo taageeradaas ka faa'ideysaneysa, Soomaaliland – si lamid ah Puntland oo lagu falanqeyn doono qeybaha soo socda ee daraasadda – waxay sanadkii 2003 qaadatay siyaasado maamul daadejineed oo cusub. Kadib, waxaa la sameeyay siyaasadaha maaliyadda dowladaha hoose (UN-Habitat, 2016). Qaadashada labadan aasaas ee daadejineed ayaa fursad u siisay in la sameeyo habab sahlaya dakhli uruurinta dowladaha hoose oo la'aantood aan si dhab ah loo xaqiijin karin maamul daadejinta. Nidaamyadan waxaa kamid ah xogta nidaamka macluumaadka juqraafiyeed (GIS), kaasoo ka kooban macluumaadka goobta iyo tayada

hantida, iyo sidoo kale isticmaalka dhulka, kaabayaasha, lahaanshaha, iyo tirada dadka deggan, si loo qeexo heerka canshuurta ee hanti kasta iyo ogeysiinta deganayaasha waajibaadka canshuureed ee ka saaran degmada (UN-Habitat, 2016).

Sidoo kale, Soomaaliland iyo Puntland ayaa hirgeliyey Nidaamka Maareynta Macluumaadka Xisaabaadka iyo Nidaamka Maareynta Macluumaadka Lacag-bixinta ee dowladaha hoose si loo horumariyo hufnaanta, isla xisaabtanka, iyo waxtarka howlaha (UN-Habitat, 2016). Marka loo eego warbixintii 2016 ee UN-Habitat ee ku saabsanayd Dhismaha Dowladaha Hoose ee Soomaaliya, nidaamyada ayaa keenay dakhli badan oo kasoo xarooda canshuuraha guryaha. Wax ka qabashada caqabadaha ka jira dowladaha hoose kuma ekeen horumarinta nidaamyada iyo siyaasadaha balse waxa sidoo kale kamid ahaa sameynta qaabab sharci oo muhiim u ah howlaha dowladaha hoose.

Maamul daadejinta kuma koobnayn Soomaaliland oo keliya balse waxaa daneynayey Puntland oo ah maamul la dhisay 1998 xilli ay socdeen dagaallo sokeeye oo u dhexeeya maleeshiyooyin hubeysan oo ku sugnaa Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya oo markii hore isku baheystay sidii ay meesha uga saari lahaayeen xukunkii militeriga. Dastuurkii Puntland ee 1998 waxaa ku jiray qodobbo ku saabsan maamul-daadejinta, tusaale ahaan, wuxuu farayay dhisidda goleyaasha deegaanka. Si loo hormariyo maamul-daadejinta, Puntland waxa ay soo saartay sharciga golaha deegaanka (Xeer Lr. 7 ee 2003-dii), oo ah qaab-dhismeedka sharci ee ugu horreeya oo lagama maarmaan u ahaa dhismaha maamulka deegaanka (PDRC & Interpeace, 2015).

Dhanka kale, maamul-daadejinta Dowlad-goboleedyada cusub ee Jubaland, Koonfur-galbeed, Galmudug, iyo Hirshabelle ayaa marxalado billow ah ku jira marka la eego dhismaha golaha deegaanka iyo horumarinta siyaasadda iyo qaab-dhismeedka sharci ee dowladaha hoose. Dadaalladaas waxaa curyaamiyey khilaaf, siyaasad xumo, miisaaniyad la'aan iyo waxyaabo kale. Ilaa hadda maamulka Galmudug ayaa dhisay 6 gole deegaan tan iyo sanadkii 2020, waxaana lagu wadaa in la sii wado sameynta goleyaasha deegaanka ee degmooyinka harsan. Maamulka Koonfur Galbeed waxa uu dhisay shan gole deegaan. Dhinaca kale maamul goboleedyada Jubaland iyo Hirshabeelle ayaa ah maamul goboleedyada ugu yar ee dhisidda goleyaasha deegaanka. Labaduba waxa ay leeyahay min hal gole deegaan.

Daraasadani waxay baaris iyo gorfeyn ku sameynaysaa baahinta maaliyadda iyo adeegyada dowladda hoose, iyadoo si gaar ah diiradda u saareysa sagaal degmo oo ka kala tirsan gobolka Banaadir, Puntland iyo Galmudug. Natiijooyinka kasoo baxday cilmibaaristan ayaa la filayaa in ay dhaliyaan doodo iyo dadaallo lagu doonayo in lagu daadejiyo maaliyadda iyo adeegyada dowladaha hoose ee dowlad goboleedyada curdanka ah ee xubnaha ka ah dowladda federaalka Soomaaliya si loo hirgeliyo mabaadii'da federaalka iyo horumarinta nolosha dadka deegaanka iyadoo loo marayo dowladaha hoose. Daraasaddu waxay sidoo kale ujeedadeedu tahay in ay macluumaad siiso muwaadiniinta, dowladda federaalka, dowladaha xubnaha ka ah federaalka, dowladaha hoose, iyo bulshada horumarinta ka shaqeysa iyadoo la sameynayo falanqeyn xog ku dhisan iyo talooyin tixgelin mudan.

## 2.0 Habka cilmibaarista loo sameeyay

Daraasadani waxaa loo maray wareysiyo dad xog-ogaal ah si loosoo saaro xog ku saabsan daadejinta maaliyadda iyo adeegyada dowladaha hoose ee Puntland, Galmudug, iyo Banaadir.

Daraasaddu waxay ku bilaabatay dib-u-eegis lagu sameeyay qoraallada horey looga qoray mawduuca daraasadda. Qoraallada la heli karo ee ay daraasadani isticmaashay waxa kamid ah buugaag, qoraallo dowladeed, sharciyo iyo xeerar la dajiyay xilligii dowladdii rayidka (1960-169), taliskii militariga (1969-1991), dowladda federaalka Soomaaliya , iyo Dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka, warbixino ay soo saareen hay'adaha cilmibaarista iyo hay'adaha taageera daadejinta xukunka Soomaaliya, iyo warbaahinta.

Kadib, Somali Public Agenda ayaa bishii Maajo 2022 Muqdisho ku qabatay wareysiyo kooxeed ka-qeybgalayaasha lagasoo kala xulay ururrada taageera maamul-u-daadejinta dowladaha hoose ee Soomaaliya; aqoonyahanno aqoon u leh oo daneeya maamul-daadejinta; iyo howlwadeeno ka shaqeeya arrimahan. Wareysiyo kooxeedyadani waxa loogu talagalay in lagu hormariyo fahamka arrimaha muhiimka ah ee maamul-daadejinta heer deegaan ee Soomaaliya iyo in sidoo kale lagu qaabeeyo su'aalaha wareysiyada. Intaa kadib, cilmibaarayaasha Somali Public Agenda ayaa diyaariyey su'aalo hagaya wareysiyada oo loo adeegsaday xog uruurinta. Su'aalaha hagaya wareysiyada ayaa la isticmaalay si loo gaaro ujeedooyinka daraasadda. Su'aalaha ayaa la xiriiray mowduucyo ay kamid yihiin nidaamyada dhisidda dowladaha hoose ee goobaha daraasadda laga sameeyay; qaab-dhismeedka sharci ee lagu maamulo dowladaha hoose; qaab-dhismeedka dowladda hoose; canshuuraha ay dowladaha hoose qaadaan (haddii ay jiraan); adeegyada ay dowladaha hoose bixiyaan; jiritaanka wareejin maaliyadeed ee heer-gobol iyo dowladaha hoose; nidaamyada maamulka maaliyadda ee ay dowladaha hoose isticmaalaan (haddii ay jiraan); caqabadaha ay la kulmaan dowladaha hoose.

Xogta daraasadan waxaa lagasoo uruuriyay Dowlad Goboleedka Puntland, Dowlad Goboleedka Galmudug, iyo Maamulka Gobolka Banaadir. Cilmibaarayaasha waxay maamul weliba ka doorteen saddex degmo, oo wadar ahaan sagaal degmo ah, oo kala ah Galkacyo (waqooyi), Garoowe, iyo Qardho oo ka tirsan Puntland; Cadaado, Dhuusamareeb, iyo Caabudwaaq oo Galmudug ka tirsan; iyo Degmooyinka Waaberi, Hodon iyo Wadajir oo hoos taga Maamulka Gobolka Banaadir. Degmooyinka daraasadda laga sameeyey ee saddexda gobol ka kala tirsan ayaa si gaar ah loo doortay si ay faham iyo isbarbardhig uga bixiyaan xaaladda maamul-daadejinta heer deegaan. Sababaha loo xulay degmooyinkan ayaa ahaa:

- Saddexda degmo ee ka tirsan Puntland ayaa kamid ah afarta degmo ee ugu waaweyn Puntland oo ay dowladda hoose ee Boosaaso kamid tahay, waxayna dowlad hoose lahaayeen tan iyo sanadkii 2005;

- Dhanka Galmudug, degmada Cadaado ayaa yeelatay gole deegaan xilliga cilmibaaristan billaabaneysay, halka Dhuuso-mareeb ay tahay caasimadda dowlad-goboleedka, Caabudwaaqna ay kamid tahay degmooyinka ugu dadka badan maamulkaas;
- Gobolka Banaadir, saddexda degmo ee la doortay (Hodon, Weberi, iyo Wadajir) waxay ka mid yihiin degmooyinka ugu dadka badan gobolka Banaadir, waxaana ku yaalla ganacsiyada Muqdisho badankood, xarumaha adeegyada dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay sida iskuullada, isbitaallada, iyo madadaallada.

Sagaalkan degmo, daraasaddu waxay ay wareysatay dad gaaraaya 90 qof – 10 qof ayaa laga wareystay degmo kasta. Dadka xog-ogaalka ah ee la wareystay waxa kamid ahaa masuuliyiin sarsare oo ka kala socday wasaaradda arrimaha gudaha ee Dowlad-Goboleedyada, madaxda sare ee Maamulka Gobolka Banaadir, masuuliyiin ka tirsan dowladaha hoose ee ay khuseyso sida gudoomiyaha, gudoomiye ku xigeenka, waaxyaha dakhliga dowladaha hoose, gudoomiyaasha degmooyinka, haweenka, dhalinyarada, ganacsatada, odayaasha, iyo ururrada taageera maamul daadejinta.

Xog uruurinta goobaha daraasadda ayaa lasoo gabagabeeyey intii u dhexeysay Agoosto iyo horraantii Noofembar 2022. Muddadaas, SPA waxay ku guulaysatay inay sameyso 84 wareeysi xog-ogaaleed oo kamid ah 90-kii aan qorsheynay ee guud ahaan goobaha daraasadda. Somali Public Agenda waxa ay degmo kasta ka howlgelisay caawiye la shaqeeya cilmibaarayaasha kaasoo sumcad iyo xiriiro leh si uu gacan uga geysto diyaarinta dadka la wareysanayo. Markaas kadib, wareysiyada ayaa la qaaday.

Sikastaba ha ahaatee, dib-u-dhaca ku yimid doorashadii daba dheeraatay ee Soomaaliya ayaa keenay in dib-u-dhac uu ku yimaado bilowga xog uruurinta, taasoo keentay in cilmibaarayaashu sugaan inta ay xaaladdu ka dageyso. Kooxdii cilmibaarista uma suuragelin in ay wareystaan madaxdii sare ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee dowladda federaalka, maadaama ay ku mashquulsanaayeen isbeddelka cusub ee ka dhacay Wasaaradda kaasoo ka dhashay magacaabista wasiir cusub. Xaalad lamid ah ayaa ka jirtay wareysiyadii la qorsheeyay in lala yeesho madaxda sare ee Maamulka Gobolka Banaadir. Madax ka tirsan Maamulka Gobolka Banaadir oo aan la xiriirnay si aan wareysi ula yeelanno ayaa markii hore wareysiga aqbalay, iyagoo noo sameeyay ballamo. Sikastaba ha ahaatee, markii kooxda ay la xiriirtay si ay u xaqiijiyaan ballamaha wareysiga, kama aysan jawaabin xiriirradii.

# 3.0 Xaaladda maamul daadejinta ee Soomaaliya

Tan iyo sanadkii 2012 iyo qaadashadii nidaamka federaalka, maamul daadejinta ayaa ahayd arrin siyaasadeed. Sikastaba ha ahaatee, ma aysan ahayn culeyska ugu weyn, marka la barbardhigo dhibaatooyinka kale ee hareeyay goleyaasha siyaasadda ee fulinta iyo sharci-dejinta ee dowladda federaalka iyo Dowlad-goboleedyada. Mid kamid ah rajooyinka laga qabay nidaamka federaalka ayaa ahayd in awoodda loo daadejiyo heerka dowladaha hoose si dadka deegaanka ay awood ugu yeeshaan ka qeyb qaadashada go'aan-ka-gaarista arrimaha khuseeyo, oo ay kamid yihiin qorsheynta siyaasado heer degmo ah oo ka jawaabaya baahiyahooda degdegga ah, sida bixinta adeegyada muhiimka ah.

Iyadoo ay jirto rajada weyn ee laga qabo in nidaamka federaalku uu muwaadiniinta usoo dhaweeyo adeegyada, waa sidee heerka maamul daadejinta Soomaaliya? Dowladaha hoose ma awoodaan inay door wax-ku-ool ah ka ciyaaraan nolosha guud iyo howlaha maamulka? Maxay tahay caqabadaha ugu waaweyn ee ay la kulmaan? Ma jiraa farqi weyn oo u dhexeeya maamul-daadejinta Dowlad-goboleedyada maxaase sharraxay kala duwanaanshahan? sidee buu u eg yahay dhaqaalaha siyaasadeed ee maamul daadejinta? Waa sidee siyaasadaha dowladaha hoose? Intee in le'eg ayay maamullada deegaanku xasilloon yihiin? Waa maxay xiriirka ka dhexeeya dowladaha hoose, siyaasiyiinta Dowlad-goboleedyada, iyo siyaasadaha?

Su'aalahan iyo kuwa kaleba waxaa looga jawaabay qeybaha soo socoda oo gorfeynaya doodaha iyo fikradaha lagu ogaaday cilmibaarista. Waxaa loo qeybiyay qeyb-hoosaadyo oo mid walba diiradda lagu saaraayo mawduuc gaar ah oo maamul-daadejinta ku saabsan.

## 3.1 Dulmar

Inkastoo ay Soomaaliya nidaam federaal ah qaadatay toban sano kahor, haddana waxaa jira dhinacyo badan oo aasaasi ah oo ay ku muransan yihiin labada heer ee dowladda – Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Dowladaha xubnaha ka ah dawladda Faderaalka – oo ku saabsan qeybsiga awoodaha oo ay ku jiraan masuuliyadaha iyo lacagaha.[1] Arrintan waxaa qeyb weyn ku leh madmadowga ku jira dastuurka federaalka kumeelgaarka ah ee arrimahan xasaasiga ah ama in aanu kaba hadleynin. Dowladaha hoose waa mid kamid ah unugyada ugu muhiimsan ee dowladnimada ee uu dastuurka federaalka kumeelgaarka ah uusan muhiimad siin. Dastuurku waxa uu dowladaha hoose xusayaa halmar, isagaoo u daayey dowlad-goboleedyada in ay sharciyo u dejiyaan, iyo sidoo kale sameynta heerkan saddexaad ee muhiimka ah.

1 Eeg warbixinta Somali Public Agenda FISCAL FEDERALISM IN SOMALIA: CONSTITUTIONAL AMBIGUITY, POLITICAL ECONOMY AND OPTIONS FOR A WORKABLE ARRANGEMENT, JULY 2021 oo aad ka heli kartid https://somalipublicagenda.org/wp-content/uploads/2022/03/Fiscal-Federalism-in-Somalia.pdf

Sidaas darteed, Dowlad-goboleedyadii la sameeyay sanadihii xigay (intii u dhexeysay 2013-2016) iyo Puntland, oo hore u jirtay, ayaa awoodaha ku uruuriyey caasimadaha maamulladooda, iyagoo abuuray xarun kale oo awoodu ku uruursan tahay halkii ay u daadejin lahaayeen heerarka hoose. Sidoo kale, Dowlad-goboleedyadu keliya ma aysan uruursan awoodda ee waxa ay dayaceen in ay dhisaan dowladaha hoose oo ah heerka saddexaad ee nidaamka federaalka. Sikastaba ha ahaatee, Dowlad-goboleedyadka ugu da'da weyn ee Puntland waa ka duwan tahay marka loo eego sameynta dowladaha hoose. Sidaas si lamid ah, Soomaaliland waa ka reebban tahay, inkastoo aanay daraasaddani xog uruurin ka sameynin Soomaaliland. Puntland waxa ay goleyaasha deegaanka dhistay horaantii 2005 markaas oo la dhisay goleyaasha deegaanka ee Qardho, Garoowe, Boosaaso, iyo Galkacyo, balse waxay Dowlad-goboleedyada kale la wadaagtaa caqabadaha la xiriira daadejinta awoodo kooban ama u daadejin la'aanta awoodaha maaliyadeed iyo adeeg bixinta ee dowladaha hoose.

### 3.1.1 Puntland

Puntland waxa ay leedahay 51 degmo, 21 kamid ah waa degmooyinkii jiray kahor 1991. Inta soo hartay waa degmooyin cusub, oo ay Puntland sameysay. 27 degmo oo kamid ah 51-ka degmo, ayaa leh goleyaal deegaan.[2] Goleyaashan deegaan waxaa soo xulay odayaasha dhaqanka marka laga reebo Qardho, Eyl, iyo Ufeyn, oo xubnaha golaha deegaanka lagusoo doortay doorasho qof iyo cod ah sanadkii 2021. Degmooyinka waaweyn sida Gaalkacyo, Boosaaso, Garoowe, iyo Qardho ayaa leh 33 xubnood oo golaha deegaanka ah, sida uu dhigayo xeerka wax-ka-beddelka lagu sameeyay ee dowladaha hoose ee no.7. Xubnaha degmo kasta waxay ka turjumayaan beelaha deggan degmada. Sikastaba ha ahaatee, madaxweynaha Puntland ayaa goleyaasha deegaanka ee Galkacyo, Boosaaso, iyo Garoowe kala diray bishii Janaayo 2021, Maarso 2021 iyo Sebteembar 2022 siday u kala horreeyaan, isaga oo daliishanaya qodobbo ku jira dastuurka Puntland iyo xeer No.7 ee maamulka gobollada iyo degmooyinka. Madaxweynaha ayaa goleyaashan deegaanka kala direy kahor inta uusan muddo xileedkoodu dhammaan. Dadka lagu wareystay daraasaddan ayaa jawaabo kala duwan ka bixiyey mar aan wax ka weydiinay sababaha keenay arrintan. Qaar ayaa ku micneeyey in go'aankan uu yimid kadib markii ay soo noqnoqdeen khilaafyo u dhexeeya xubnaha goleyaasha deegaanka oo curyaamiyey waxqabadkii dowladaha hoose. Halka kuwo kalena ay sheegeen in ay salka ku heyso iskudaygii madaxweynaha ee u guuridda goleyaal deegaan lasoo doortay. Hadda, saddexdan degmo (Gaalkacyo (waqooyi), Boosaaso, iyo Garoowe, oo kamid ah afarta degmo ee ugu waaweyn marka Qardho lagu daro, waxaa maamula guddoomiyeyaal iyo kuxigeenno uu soo magacaabay madaxweynaha.

Inkastoo saddexdii gole deegaan ee magaalooyinka waaweyn la kala diray, Puntland ayaa 25-kii Oktoobar 2021 goleyaasha deegaanka ee Qardho, Eyl, iyo Ufeyn u qabatay doorasho qof iyo cod ah markii ugu horeysay. In uu noqdo maamulka ugu horreeya ee doorasho toos ah qabtay in ka badan nus qarni kadib ayaa taariikhi u ah (Interpeace, 2021). Iyadoo ay jiraan tillaabooyinkan fiican ee loo qaaday dhinaca dimuqraadiyeynta, haddana goleyaasha deegaanka ee lasoo doortay – si lamid ah goleyaasha deegaanka ay oday dhaqameedyadu soo xuleen – ayaa weli

2 Wareysi lala yeeshay sarkaal ka tirsan waaxda qorsheynta iyo miisaaniyadda dowladda hoose ee Garoowe, Garoowe, Oktoobar 19, 2022.

haysan awoodaha dowladaha hoose sida dakhli-uruurinta iyo waajibaadyada adeeg bixinta ee ku cad xeerka dowladaha hoose ee Puntland, Xeer Lr. 7. Awoodahaas ayaa weli yaalla heer dowlad-goboleed.[3]

Sikastaba ha ahaatee, waxaa jira heshiis ay kasoo wada shaqeeyeen dowladaha hoose ee afarta degmo ee waaweyn ee Puntland oo kala ah Boosaaso, Garoowe, Gaalkacyo (oo loo magacaabay gudoomiyayaasha degmooyinka), iyo Qardho (oo leh dowlad hoose oo lasoo doortay) oo dhinac ah iyo dowlad-goboleedka, oo dhinaca kale ah, si ay dowladaha hoose ugu daadejiso daryeelka caafimaadka aasaasiga ah iyo waxbarashada, iyadoo arrintan la filayo inay dhaqan gasho horraanta 2023.[4]

Inkastoo ay jirto awood la'aantan muuqata ee dowladaha hoose, Puntland waxay diyaar u tahay inay qabato doorashooyin kale oo goleyaasha deegaanka ah. Balse, waxa jira khilaaf u dhexeeya dhinacyada ay khuseyso ee wakhtiyeynta doorashooyinkan.

### 3.1.2 Galmudug

Dowlad-goboleedka Galmudug, maamul-daadejinta waxay ku jirtaa xaalad bilow ah. Maamulku waxa uu jiraa ilaa 7 sano; waxaa la dhisay July 2015. Waa isku darka gobollada Mudug (Koonfurta) iyo Galgaduud wuxuuna leeyahay 10 degmo oo jiray kahor 1991, oo ay 7 kamid ah ay ka tirsan yihiin gobolka Galgaduud halka 3-da kale ay ka tirsan yihiin gobolka Mudug. Muddadii ugu badneyd ee uu maamulka Galmudug jiray waxaa saameyn ku yeeshay khilaafaadkii u dhexeeyay Ahlu-Sunna Wal Jameeca iyo maamulka dowlad-goboleedka oo ay si kumeelgaar ah caasimad ugu ahayd degmada Cadaado. Kala qeybsanaanta baahsan ee arrinkan waxaa la yareeyay kadib markii Axmed Ducaale Geelle "Xaaf" (Madaxweynaha Galmudug intii u dhexeysay 3 May 2017 ilaa 2 February 2020) uu sanadkii 2018 Ahlu Sunna Wal Jamaaca la gaaray heshiis ay garwadeen ka aheyd IGAD (Wasuge & Yusuf, 2021).

Bishii Febraayo 2020, Axmed Cabdi Kaariye "Qoorqoor" ayaa la wareegay xilka madaxtinimo ee dowlad-goboleedka Galmudug. Wixii markaas ka dambeeyay, dowlad-goboleedka wuxuu helay xasillooni inkastoo ay soo dhexgashay rabshado ka dhashay soo laabashadii lama filaanka ahayd ee Alhu Sunna Wal Jamaaca dabayaaqadii 2021.

Intii lagu jiray xaaladdan adag, maamul-daadejinta ma ahayn mid uu dowlad-goboleedka mudnaan siiyay maadaama uu ahaa maamul kala qeybsan oo kala daadsan. Sikastaba ha ahaatee, hal dowlad hoose ayaa jiray wakhtigan – waana Cadaado. Dowladda Hoose ee Cadaado ayaa ahayd middii ugu horreysay ee la dhiso kahor Dowlad-goboleedka Galmudug sanadkii 2011 iyadoo uu maamuli jiray maamulkii Ximan & Xeeb oo ka talin jiray magaalada iyo nawaaxigeeda. Waqtigaas, Cadaado keliya ma ahayn dowladda hoose ee ka jirta gobollada ku yaalla bartamaha Soomaaliya, balse waxa ay ahayd dowladda hoose kaliya ee ka dhisan koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya.[5] Waxaa sii waday maamulka Galmudug kadib curashadiisii 2015, walina golaha deegaanka Cadaado wuu shaqeeyaa. Wixii xilligaasi ka

3 Wareysi lala yeeshay duqa dowladda hoose ee Qardho, Qardho, Oktoobar 22, 2022.

4 Ibid.

5 Wareysi aan la yeelanay xubin hore oo ka tirsanaa golaha deegaanka Cadaado, August 18, 2022

dambeeyay dowladda hoose ee Cadaado waxa ay yeelatay saddex gole deegaan, kii ugu dambeeyay waxaa soo doortay ergo beeleed August 2022. Labadii gole ee hore waxaa soo xulay odayaal dhaqameedyo.[6]

Hogaamiyeyaashii soo maray muddo-xileedyadii u horreeyay ee maamulka Galmudug (Cabdikariim Xuseen Guuleed oo xilka hayay intii u dhexeysay Luulyo 2015-Febraayo 2017, iyo Axmed Ducaale Geelle "Xaaf" oo hayay May 2017-Febraayo 2020) ayaan wax ka qaban arrimaha maamul-daadejinta, sababtoo ah waxa ay la kulmeen arrimo kale ee culus iyo caqabado taagnaa. Sikastaba ha ahaatee, hoggaanka hadda talada dowlad-goboleedka haya, oo muddooyinkii dambe laga dareemayay xasillooni ayaa muhiimad siiyay maamul u sameynta degmooyinka gobolka.

Balse, kahor dardargelinta dhismaha goleyaahsa deegaanka ee dowladaha hoose, baarlamaanka dowlad-goboleedka ayaa wax ka beddelay sharciga dowladaha hoose ee Lr. 4 sanadkii 2020, kaasoo uu maamulkii hore ansixiyay sanadkii 2017. Dowlad-goboleedka waxa uu sanadkii 2020 sameeyay golaha deegaanka ee Galkacyo. Hannaanka doorashada 23-ka xubnood ee golaha deegaanka ayaa qaadatay muddo lix bilood ah, waxaana sababay arrimaha siyaasadda ee lagu muransanaa oo la xiriiray hannaanka doorashada. La wareyste kamid ah golaha deegaanka ee Dhuusamareeb ayaa cilmibaareyaasha u sheegay in madaxweynuhu uu qorsheynayey in uu xilka duqa magaalada kusoo boxo saaxiibkiisa u dhow balse rabitaanka dadka deegaanka ayaa guuleystay.[7]

Markii lasoo gaba-gabeeyay dhismihii dowladda hoose ee Gaalkacyo, wasaaradda arrimaha gudaha ee maamulkaasi ayaa billowday hannaankii doorashada goleyaasha deegaanka ee Cadaado. Nidaamkani wuu ka dhib yaraa kii Gaalkacyo sababtoo ah beelaha dega Cadaado waxay sii garanayeen saamiga ay ku leeyihiin golaha deegaanka. Sababtan awgeed, hawshu waxay qaadatay 45 maalmood oo keliya.[8]

Xawaaraha uu ku socday dhismaha goleyaasha deegaanka ee degmooyinka Galmudug sanadkii 2022 ayaa ahaa mid xowli badan. Wasaaradda Arrimaha Gudaha ayaa sidoo kale soo gebagabeysay maamul u sameynta degmooyinka Dhuusamareeb (Nofeembar 6, 2022), Caabudwaaq (Diseembar 3, 2022), Guriceel (December 6, 2022), iyo Balanbal (Oktoobar 9, 2022). Waxayna ku guuleysatay in ay goleyaal deegaan u dhisto degmooyinkan balse muranno ka dhashay saami qeybsiga xubanaha golaha deegaanka ee beelaha ayaa ahaa waxyaalihii ugu badnaa ee keenayey dib-u-dhaca. Khilaafyadan ayaa sababay in la kordhiyo tirada golaha deegaanka ee Dhuusamareeb oo markii hore ahaa 27 oo laga dhigay 33 xubnood si loo xalliyo tabashooyinka la xiriira metelaadda beelaha iyo jufooyinka qaar.

Sikastaba ha ahaatee, Dowladaha hoose ee Galmudug oo lamid ah dhiggooda dowlad-gobaleedka dariska la ah Puntland ayaa weli heysan awooddii lagama maarmaanka u ahayd in ay dakhli kasoo uruuriyaan deegaannada ay maamulaan, si ay dakhligaas ugu beddelaan adeegyo sida uu dhigayo Sharciga Dowladda Hoose. Iyadoo dowladahaan hoose ay yihiin kuwo

6 Ibid.

7 Interview with a bureaucrat from Galmudug state government, Dhusamareb, August 25, 2022

8 Wareysi aan la yeelanay xubin katirsan golaha deegaanka degmada Cadaado, August 18, 2022.

aan shaqeyn, wasaaradaha dowlad-goboleedka ayaa maamula adeegyada iyo waajibaadyada dowladaha hoose.

### 3.1.3 Gobolka Banaadir

Banaadir waxay leedahay 17 degmo waxa uuna kamid yahay 18-kii gobol ee jiray kahor 1991. Waa gobolka keliya ee aan lahayn maqaam Dowlad-goboleed kana duwan gobollada kale (marka laga reebo Soomaaliland oo ka baxsan siyaasadda Soomaaliya oo ku dhawaaqay madaxbannaani). Taasi waxay ka dhigan tahay in gobolka Banaadir laga reebay faa'iidooyin maamul daadejineed oo ay gobollada kale ka heleen nidaamka federaalka, oo ay kamid yihiin bixinta adeegyada. Arrinta gaarka ah ee gobolka Banaadir ayaa la xiriirta goobta uu ku yaallo iyo in uu yahay xarunta dowladda federaalka. Haddaba, dastuurka federaalka kumeelgaarka ah wuxuu qeexayaa hab ka duwan kii hore oo lagu ga'aaminayo maqaamka caasimadda Muqdisho.

Dastuurka ayaa qodobkiisa 9-aad ku qeexayaa in maqaamka caasimadda in la go'aamin doono inta lagu jiro hannaanka dib-u-eegista dastuurka, sidoo kalena labada aqal ee baarlamaanka federaalka Soomaaliya ay sharci gaar ah kasoo saari doonaan maqaamka Muqdisho. Sikastaba ha ahaatee, tani ma aysan dhicin, sababtoo ah muranno badan iyo arrimo xasaasi ah oo ku xeeran arrintan. Haddaba, labadii dowladood ee federaalka ee isku xigey tan iyo sanadkii 2012 waxay ka gaabsadeen inay wax ka qabtaan arrintan, waxa ayna arrinta maqaamka ahayd qodax ku taagan labadii dowladood ee u dambeeyey. Sikastaba ha ahaatee, maqaamka Muqdisho ee laga sugayo baarlamaanka ayaa keenay in dowladda federaalka ay awood u yeelato maamulidda iyo go'aan ka gaarista dhammaan arrimaha gobolka Banaadir, lagasoo bilaabo magacaabista hoggaanka gobolka ilaa iyo bixinta adeegyada. Gobolka Banaadir waa gobolka keliya ee ay dowladda federaalka dakhli kasoo xareyso, islamarkaana ay leedahay go'aannada muhiimka ah ee sida tooska ah u taabanaya dadka ku nool (Yusuf, 2022).

## 3.2 Qaab-dhismeedka sharci

Nidaamyada sharciyaga maamul daadejinta ee jira ee Puntland ama Galmudug waxay ay keliya ku qoran yihiin warqad mana loo adeegsan qaab-dhismeedyada dowladaha hoose ee shaqeeya kuwaasoo adeegyada aasaasiga gaarsiiya dadka deegaanka. Sikastaba ha ahaatee, sababaha kala duwan ee ay dowladaha hoose u shaqeyn la' yihiin ayaa si faahfaahsan looga hadli doonaa qeybta caqabadaha ee warbixinta.

Sikastaba ha ahaatee, daraasaddan ayaa lagu ogaaday in maamul-goboleedyada Puntland iyo Galmudug, ay isku mid ka yihiin qaab-dhismeedka sharci ee maamul-daadejinta, inkastoo Galmudug ay ka dambeyso Puntland sharciyada qaar. Farqigani waxa uu qeyb ahaan la xiriiraa da'da labada dowlad-goboleed. Dhanka kale, isku ekaanshaha kaabeyaasha maamul daadejinta sharciga kuma koobna oo keliya labadan dowlad-goboleed balse waxaa la wadaaga dowlad-goboleedyada kale. Saraakiil ka kala socotay wasaaradaha arrimaha gudaha ee dowlad-goboleedyada Puntland iyo Galmudug ayaa caddeeyay jiritaanka isku ekaanshaha qaab-dhismeedka sharciyeed ee asaasiga ah ee dhammaan dowlad-goboleedyada.

### 3.2.1 Puntland

Puntland, maamul-daadejinta waxaa asaas u ah dastuurka dowlad-goboleedka. Dastuurku waxa uu shan qodob [123,124,125,126 iyo 127] ku qeexay maamul daadejinta. Qodobka 123-aad ee dastuurku waxa uu farayaa aasaaska goleyaasha deegaanka; Qodobka 124-aad wuxuu qeexayaa hab-raaca goleyaasha deegaanka; Qodobka 125-aad, waxa uu ku qeexayaa awoodaha iyo masuuliyadaha goleyaasha deegaanka; Qodobka 126-aad wuxuu qeexayaa shuruudaha doorashada goleyaasha deegaanka, halka qodobka 127-aad uu kala cadeynayo awoodaha iyo masuuliyadaha duqa degmada.

Dokumentiga labaad ee sharciga ah ee xoojinaya maamul-daadejinta Puntland ayaa ah sharciga dowladaha hoose ee Lr. 7. Sharcigan waxa uu soo baxay sanadii 2003 balse sanadkii 2020 ayay wax-ka-beddel ku sameysay dowladda hadda ee uu hoggaamiyo Madaxweynaha Puntland Siciid Cabdullaahi Deni. Xeerkan waxa uu ka kooban yahay 83 qodob, kuwaasoo ka hadlaya arrimo badan oo khuseeya dowladaha hoose sida qaab-dhismeedka dowladaha hoose, xubnaha golaha deegaanka, doorashooyinka goleyaasha deegaanka, shuruudaha doorashada golaha deegaanka, awoodaha, xilalka, iyo hawlaha shaqo ee goleyaasha deegaanka..

Marka lagasoo tago qaab-dhismeedkan sharci ee gundhigga u ah, Puntland waxa ay leedahay siyaasad maamul daadejineed oo shan sano ah, taasoo la sameeyay sanadkii 2018 balse hadda waqtigeedu dhacay. Dowlad-gobleedka ayaa wadda geeddi-socod uu ku sameynayo siyaasad cusub oo shan sano oo maamul-daadejineed ah si ay jihadaas ugu hagto dowlad-goboleedka. Puntland waxaa ay sidoo kale leedahay istaraatiijiyado hoos yimaada siyaasaddan sida siyaasadda maamul daadejinta maaliyadda iyo qorshe howleedka, iyo istaraatiijiyadda maamul daadejinta qeybaha waxbarashada, caafimaadka iyo waddooyinka. Sikastaba ha ahaatee, istaraatiijiyadahan waxay dhacayaan marka ay dhamaato muddada qorshaha maamul-daadejinta kuwo cusub ayaana loo baahan yahay in la diyaariyo.[9] Sidoo kale, dowladaha hoose ee Puntland waxay leeyihiin siyaasadda daadejinta dowladda hoose, habraaca soo iibinta, qaab-dhismeedka horumarinta degmooyinka, sanduuqa horumarinta degmooyinka, habraaca baaritaanka xisaabeed, habraaca shaqaalaha, iyo habraaca tababarka.[10]

### 3.2.2 Galmudug

Si ka duwan Puntland, dastuurka Galmudug wuxuu si kooban uga hadlayaa maamul daadejinta, waxaana kamid ah qodobka 27(1) oo khuseeya awoodaha fulinta gaar ahaan dowlad-goboleedka Galmudug. Waxa uu sheegayaa in dowlad-goboleedku awoodda u daadejiso gobollada iyo degmooyinka iyo in degmooyinku yeelan doonaan goleyaal deegaan oo leh gudoomiye lasoo doortay. Haddaba, qoreyaasha dastuurka Galmudug tixgelintii loo baahnaa ma aysan siinin, dastuurkana diiradda kuma aysan saarin maamul-daadejinta si ay aasaas iyo hagid ugu noqdaan xeerka dowladaha hoose, oo ay tahay in lagu saleynayo dastuurka.

9 Wareysi lala yeeshay khabiir katirsan barnaamijka UN-GPLG, Garoowe, 19 Oktoobar 2022.

10 Wareysi lala yeeshay la taliye katirsan dowladda hoose ee Galkacyo, Galkacyo, 16 Oktoobar 2022.

Iyadoo uusan jirin aasaas dastuuri ah ee maamul daadejinta, dowlad goboleedka Galmudug, muddadii madaxweyne Xaaf, ayaa sanadkii 2017 soo saaray sharciga dowladaha hoose ee Lr.4 balse waxaa wax laga beddelay sanadkii 2020. Xeer Lr.4 waxa uu ka kooban yahay 59 qodob oo dhamaantood ka hadlaya dowladaha hoose.

Ka sokow arrinkan, dowlad-goboleedka wuxuu leeyahay siyaasado lagasoo qaatay sharciga No.4 sida siyaasadda shaqaalaha dowladaha hoose, xeerarka shaqada ee dowladaha hoose, xeer-hoosaadka maareynta qashinka, siyaasadda maamulka maaliyadda ee dowladaha hoose, siyaasadda diiwaangelinta ganacsiga, habraaca wax soo iibsiga ee dowladaha hoose, qorshaha horumarinta metelaadda haweenka ee dowladaha hoose, iyo siyaasadda maamul-daadejinta oo qabyo qoraal ah. Siyaasaddan maamul daadejinta waxaa iska kaashanaya xafiiska madaxweyne ku xigeenka Galmudug iyo wasaaradda arrimaha gudaha oo arrimahaas hormuud ka ah.[11]

### 3.2.3 Gobolka Banaadir

Gobolka Banaadir ma lahan sharci maamul daadejineed ee laga hadlo. Gobolka waxaa weli maamula dowladda federaalka, wax kasta oo awood baahin ahna waxa ay ku xiran tahay in golaha sharci dejinta labada aqal (Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare) ee baarlamaanka federaalka ay mustaqbalka soo saaraan sharci qeexaya maqaamka Muqdisho.

## 3.3 Qaab-dhismeedka dowladaha hoose

Qeybtan waxaa aan ku eegeynaa qaab-dhismeedka dowladaha hoose ee saddexda dowlad-goboleed ee daraasadda laga sameeyay, waxaana lagu gorfeynayaa meelaha ay isaga eg yihiin iyo meelaha ay ku kala duwan yihiin, iyo sidoo kale sababaha keenay isku ekaanshaha iyo kala duwanaanshaha.

Qaab-dhismeedyada dowladaha hoose ee Puntland iyo Galmudug waa isku mid waxaana ku dhaqankooda haga dastuurka (gaar ahaan Puntland) iyo sharciyada dowladaha hoose ee labada dowlad-goboleed. Qaab-dhismeedkan ma ahan mid u gaar ah labadan dowlad-goboleed ee waxaa kale oo leh dowlad-goboleedyada kale ee deegaannadooda ka sameeyay dowladaha hoose. Qaab-dhismeedka muhiimka ah ee dowladda hoose waxa kamid ah goleyaasha deegaanka; gudoomiyaha iyo gudoomiye ku xigeenka; guddiga fulinta; xoghayaha; guddiga joogtada ah, iyo baaritaannada xisaabeed ee gudaha.

Goleyaasha deegaanka waxay ahayd in ay shacabka doortaan. Puntland, oday dhaqameedyada ayaa soo xulay xubnaha goleyaasha deegaanka laakiin si looga gudbo dhaqankan, dowladdu waxay tijaabisay doorashooyin qof iyo cod ah oo heer degmo ah oo ka dhacay saddex degmo; Qardho, Eyl, iyo Ufeyn dabayaaqadii sanadkii 2021. Doorashooyinkaas, dadka deegaanku waxa ay markii ugu horreysay ay doorteen wakiiladooda deegaanka muddo saddex iyo konton sano ah kadib tan iyo sanadkii 1969.

---

11 Wareysi lala yeeshay sarkaal ka tirsan wasaaradda arrimaha gudaha, dowladda hoose, iyo dib-u-heshiisiinta Galmudug, Dhuusamareeb, 22 Agoosto 2022.

Galmudug ayaa sanadkii 2020 bilowday in ay dhisto dowladaha hoose, waxaana ay adeegsatay doorashooyin dadban oo ay odayaasha beelaha soo xuleen ergo ka kooban shan xubnood si ay xubin gole deegaan ugu doortaan ugu yaraan labo musharax beeleed. Degmooyinka way ku kala duwan yihiin tirada goleyaasha deegaanka waxa ayna ku xiran tahay baaxadda degmada. Degmooyinka qaar ayaa leh 21 xubnood oo golaha deegaanka ah halka qaar kalena ay leeyihiin 27 xubnood oo golaha deegaanka ah. Sida uu sheegay qof xog-ogaal ah oo ka tirsan wasaaradda arrimaha gudaha Galmudug, sababta loo kordhiyay xubnaha degmooyinka qaar ayaa la xiriirtay in la waafajiyo tabashooyinka metelaadda la xiriira ee ay qabeen qaar kamid ah beelaha iyo jufooyinka ee hannaanka dhismaha golaha deegaanka ee degmooyinkaas.

Xubnaha dowladaha hoose, iyadoo aan loo eegun in lagu dhisay hannaan toos ah ama mid dadban, waxa ay iska dhex doortaan gudoomiyeyaal iyo ku-xigeeno. Gudoomiyaha iyo gudoomiye-ku-xigeenka ee uu wehliyo xoghayaha dowladda hoose (xoghayaha waxaa soo magacaabo Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee Dowlad-goboleedka) ayaa soo dhisa guddida fulinta, kuwaasoo u xilsaaran fulinta howl-maalmeedka dowladda hoose.

Guddiga fulinta ka sokow, dowladaha hoose waxay leeyihiin guddiyo joogta ah. Guddiyadan waxa lagasoo xulaa golaha deegaanka. Saddex meelood meel (1/3) xubnaha golaha deegaanka ayaa ka mid noqon kara guddigan, sida ku cad xeerka dowladaha hoose ee Puntland ee Xeer Lr.7. Sida uu sheegay xubin ka tirsan guddiga joogtada ah ee golaha deegaanka Qardho, xikmadda ka dambeysa in la helo guddi joogta ah ayaa ah maadaama goleyaasha deegaanku ay isugu yimaadaan labo kalfadhi oo kaliya sanadka (Janaayo iyo Luulyo), waxaa mar walba soo baxa arrimo deg deg ah oo u baahan in mudnaan la siiyo oo wax laga qabto. Arrimaha soo ifbaxa waxaa kamid ah meelmarinta miisaaniyadda dowladda hoose oo inta badan ku beegan bisha Oktoobar ee sanad kasta iyadoo uu golaha deegaanka fasax ku jiro. Haddaba, guddiga joogtada ahi waxay si kumeelgaar ah u ansixiyaan miisaaniyadda, taasoo ugu dambeyntii ay xubnaha golaha ku ansixiyaan kal-fadhigooda ugu horreeya ee bisha Janaayo.[12] Taas bedelkeeda, Xeer Lr.4 ee Galmudug, qodobkiisa 32(3) waxa uu dhigayaa in goleyaasha deegaanka ay saddexdii bil hal mar kulmaan, taasoo macnaheedu yahay in ay kulmaan 4 jeer sanadkii marka la barbardhigo sanadkii labo jeer ee kulanka goleyaasha deegaanka ee Puntland.

Guddiyada fulinta ayaa sidoo kale kormeera howlaha waaxyaha dowladaha hoose. Ujeedadaas awgeed, xubin kasta oo kamid ah guddiga waxaa loo xilsaaraa waax gaar ah, iyadoo la tixgelinayo sida heerka aqoontiisa ay ula xiriirto mas'uuliyadda waaxdaas.[13] "Tusaale ahaan, haddii xubin ka tirsan guddiga fulinta uu yahay injineer, waxaa loo xilsaaraa inuu kormeero waaxda howlaha guud ee dowladda hoose" ayuu yiri xubin ka tirsan golaha deegaanka Qardho oo sidoo kale xubin ka ah guddiga joogtada ah.

12 Wareysi aan la yeelanay xubin katirsan golaha deegaanka Qardho ahna xubin guddiga joogtada ah, Qardho, 22 October 2022.

13 Ibid.

Sida kor lagu xusay, dowladaha hoose waxay leeyihiin waaxyo u xilsaaran adeegyada ay bixiso dowladda hoose, xitaa haddii ay yihiin kuwo xaddidan. Dowladaha hoose ee Puntland sida Galkacyo (waqooyi), Garoowe, iyo Qardho, oo ay SPA ka sameysay daraasaddan, waxa ay leeyihiin shan waaxood oo kala ah maaliyadda, dakhliga, arrimaha bulshada, howlaha guud iyo qorsheynta, dabagalka iyo qiimeynta. Tirada waaxyaha waxay waafaqsan tahay sharciga dowladaha hoose ee Puntland ee No.7, kaasoo qeexaya inta waaxood oo ay dowladaha hoose yeelan karaan.

Sikastaba ha ahaatee, tani ma aha mid go'an, oo mararka qaarkood way kordhi kartaa wayna yaraan kartaa iyadoo ku xiran baaxadda howlaha dowladda hoose. Dastuurka Puntland ayaa odorosaya xaaladdan, waxa uuna u fasaxayaa in dowladda hoose ee rabta waaxyo badan in ay codsi u gudbiso wasaaradda ay khuseyso. Dhinaca kale, inkastoo xeerka dowladaha hoose ee Galmudug xeer Lr.4 aan lagu xusin tirada waaxyaha dowladdaha hoose, haddana wareysiyo aan la yeelanay masuuliyiinta dowladda hoose ee Cadaado ayaa noo xaqiijiyey in ay lamid yihiin waaxyaha ay leeyihiin dowladaha hoose ee Puntland.[14]

Ma aha oo keliya goleyaasha deegaanka ee Puntland iyo qaar kamid ah Galmudug dowladaha hoose ee leh qaab-dhismeed maamul, balse maamullada kale ee degmooyinka Galmudug (sida Dhuusamareeb, Caabudwaaq, iyo Balanbal) – oo la magacaabay kahor inta aan la sameyn goleyaasha deegaanka ee saddexdan degmo dabayaaqadii 2022 — ayaa lahaa qaab-dhismeed aad iskugu eg.

Sheekadu waa ay ka duwan tahay hannaanka magacaabista Maamulka Gobolka Banaadir ee gudoomiyeyaasha degmooyinka. Degmooyinka Gobolka Banaadir waxay leeyihiin guddoomiyeyaal iyo ku-xigeenno; guddiyo arrimaha siyaasadda iyo amniga, arrimaha bulshada; xoghayeyaal, xafiisyada dhalinyarada, haweenka, ciyaaraha, iyo dib-u-heshiisiinta, iyo madaxda xaafadaha. Gudoomiye degmo ayaa qaab-dhismeedkan ku tilmaamay mid faaruq ah oo aan "awood lahayn" sababtoo ah ma heystaan haba yaraatee awood dhab ah.[15]

## 3.4 Wacyiga dadweynaha iyo fahamka daadejinta

Maadaama maamul daadejinta ee guud ahaan dalka uu gaabis ahaa, dadkii lagu wareystay goobihii daraasadda laga sameeyay ayaa isku raacay in fahamka iyo wacyiga dadka deegaanka ee maamul u daadejinta dowladaha hoose uu aad u hooseeyo. Sikastaba ha ahaatee, kala duwanaansho ayaa ka dhex jira degmooyinka daraasadda laga sameeyay. Kala duwanaanshahan ayaa la xiriira baaxadda shaqada iyo habka loosoo xulo xubnaha goleyaasha.

14 Wareysi aan la yeelanay xubin katirsan golaha deegaanka Cadaado, Cadaado, 18 Agoosto 2022.

15 Wareysi aan la yeelanay guddoomiye degmo katirsan gobolka Banaadr, Muqdisho, Agoosto, 10, 2022.

Guud ahaan, muwaadiniintu waxa ay faham kooban ka heystaan waxa ay yihiin dowladaha hoose, iyo shaqooyinka ay masuulka ka yihiin. Isagoo sharaxaya sida fahamka dadka deegaanku uu u hooseeyo, gudoomiye hore oo ka tirsanaa golaha deegaanka Garoowe ee la kala diray ayaa sheegay in dadka deegaanku ay aaminsan yihiin in dowladaha hoose ay masuul ka yihiin oo kaliya nadaafadda magaalada, dhismaha, iyo/ama dayactirka waddooyinka degmada iyo ololaha wacyigelinta bulshada. wuxuu yiri "ma oga in dowladaha hoose ay kaalin weyn ku leeyihiin bixinta adeegyada bulshada".[16]

Fahamka kooban ee laga qabo shaqada dowladaha hoose kuma koobna dadweynaha oo keliya, balse waxa kale oo ay ka muuqataa, sida la sheegay, dowladaha hoose laftooda, iyo saraakiisha gobollada iyo kuwa amniga. Dadka la wareystay ayaa qiray in mas'uuliyiinta dowlad-goboleedyada ay faham ka haystaan micnaha dowladaha hoose balse lagu eedeeyo in ay ka caga jiidaan in awoodda u daadejiyaan.[17] Farsamoyaqaan ka tirsan Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee Puntland ayaa sheegay ka sokow fahamka hooseeya ee la xiriira maamul daadejinta, haddana wasaaradaha dowlad-goboleedyada waxa ay sii wadaan adeegsiga awoodaha dowladda hoose iyo bixinta adeegyada ay dowladda hoose mas'uul ka tahay bixintooda.[18]

Heerka ogaalka iyo fahamka maamul-daadejinta ee hadda jira waxa ay la xiriirtaa arrimo ay ka mid yihiin xiriirka liita ee ka dhexeeya dowladda iyo bulshada, adeeg bixin la'aanta dowladaha hoose iyo maamullada degmooyinka la magacaabay ay siiyaan bulshada, iyo yaraanta ama jiritaan la'aanta waxbarashada madaniga ah. Sikastaba ha ahaatee, sababaha ugu muhiimsan waxa ay la xiriiraan hoggaanka dowlad-goboleedyada iyo wasaaradaha awoodaha ka heysta dowladaha hoose ee jira.

Sida uu sheegay xubin hore oo ka tirsanaa golahii deegaanka Garoowe ee la kala diray, wacyiga iyo fahamka maamul daadejinta oo aad u hooseeya awgeed, madaxda dowladda hoose ayaa qiray in arrintani ay caqabad weyn ku tahay dowladaha hoose. Xaaladdan ayay sheegeen in ay horseedday in dadka deegaanku ka cagajiidaan in ay bixiyaan canshuuraha dowladaha hoose (marka loo eego degmooyinka yar oo loo oggol yahay in ay dakhli uruuriyaan). Arrintan waxaa lagu sii faahfaahiyay qeybta dakhliga ee hoose. Sikastaba ha ahaatee, qaar kamid ah dadka la wareystay ayaa arrintan la xiriiriyay hufnaan la'aanta iyo hannaan isla xisaabtan la'aan oo ka imaanaysa dhinaca dowladaha hoose. Mid kamid ah dadka ku sugan Gaalkacyo ayaa sheegay in dadka deegaanka ay shaki ka qabaan hufnaanta madaxda dowladda hoose maadaama aysan si dhab ah u ogeyn halka iyo sida ay mas'uuliyiinta deegaanku ku bixiyaan lacagaha canshuurta ah.

Sida uu sheegay xubin ka tirsan golaha deegaanka Cadaado, waxaa jira fikrad khaldan oo ay dadka deegaanka ka qabaan bixinta canshuuraha dowladaha hoose. Waxay eegaan jufada uu kasoo jeedo gudoomiyaha. Haddii uu kasoo jeedo jufo kale oo aan ahayn jufada cashuur bixiyeyaasha, waa ay diidaan in ay bixiyaan iyagoo ku dooda in aysan dooneyn inay "quudiyaan" jufo kale. Fahamka kooban ee noocan oo kale ah waxa uu ka turjumayaa guud ahaan fahamka

16 Wareysi lala yeeshay xubin hore ee dowladda hoose ee Garoowe, Garoowe, Oktoobar 2022.

17 Ibid.

18 Wareysi lala yeeshay sarkaal ka tirsan wasaaradda arrimaha gudaha Puntland, Garoowe, 10ka Oktoobar 2022.

dadka deegaanka ah ay ka qabaan maamul-daadejinta.[19] Waxaa ka sii daran, dadka qaar ayaa aaminsan in casnhuur siinta dowladda ay tahay "*Xaraan*" (Islaamku aanu oggoleyn), tanina waa natiijada ka dhalatay fasiraadda diineed ee la qallooociyey ee ku saabsan canshuuraha.[20]

Intaa waxaa dheer, waxaa jira faham baahsan oo ay dadka deegaanka ka qabaan xubinnimada golaha deegaanka. Marka la eego xogta la uruuriyay iyo qiimeynta goobaha cilmibaarista aan ku sameynay, waxa aan ogaannay in dadka deegaanka ay u haystaan in xubinnimada golaha deegaanka ay ku helayaan dhaqaale iyo sumcad. Fikirkani waxa uu gaarsiisan yahay in xubnaha golaha ay helayaan mudnaanta ay leeyihiin xildhibaannada heer dowlad-goboleed. Aragtidan ayaa ka jirta Puntland oo ay goleyaasheeda deegaanka muddo shaqeynayeen iyo sidoo kale Galmudug, oo degmooyinka qaar dhawaan laga sameeyay maamullo hoose iyadoo degmooyin kale ay weli ka socoto howsha dhismaha dowladaha hoose. Dhab ahaan, xubnaha golaha deegaanka ma helaan mushaar joogta ah si lamid ah xildhibaannada heer dowlad-goboleed ama faa'iidooyin kale oo ay sharci-dejiyeyaashu helaan.

Fikirka khaldan ee laga qabo goleyaasha deegaanka waxa ay keentay in dad aan u qalmin ay kusoo baxaan ama u tartamaan goleyaasha deegaanka, kuwaasoo intooda badan aan si cad u fahamsaneyn shaqada ay dowladda hoose qabato. Qaar kamid ah dadka aan wareysannay oo ku sugnaa degmooyinka leh goleyaal deegaan ayaa ka cabanayay in golaha ay ka buuxaan dad aan wax faham ah ka haysan dowlad hoose, halka dadka ku wanaagsan sida ganacsatada iyo xirfadlayaasha deegaanka laga reebay kamid noqoshada goleyaasha deegaanka. Sikastaba ha ahaatee, xubin ka tirsan golaha deegaanka Qardho, oo doorashada xubnaha golaha deegaanka lagu doortay qof iyo cod dhamaadkii 2021 ayaa sheegay in degmadaas ay xaaladeedu soo roonaaneyso. Sida uu sheegay, arrintan waxaa sababay ololihii doorashada ee lagu qabtay magaalada xiligii u diyar garowga doorashadii tijaabada ahayd ee golaha deegaanka.[21]

### 3.5 Mudnaanta dowladaha hoose

Waxaa daruuri ah in dhammaan hay'adaha maamulka ay sameystaan arrimo mudnaan u ah si ay u go'aansadaan howsha ugu muhiimsan oo lagama maarmaan ah in wax laga qabto oo kadibna la hirgeliyo. Daraasadani waxa ay ogaatay in saddex dowlad hoose (waqooyiga Gaalkacyo, Garoowe, iyo Qardho) ee katirsan Puntland iyo labo dowlad hoose ee ku yaalla Galmudug (Cadaado iyo koonfurta Galkacyo) ay diyaariyeen liis ay ku qoran yihiin mudnaantooda. Degmooyinka kale ee aan ka lahayn dowlado hoose oo ka tirsan Galmudug ama Banaadir ayaan lahayn liiska howlaha mudnaanta u ah.

Dowladaha hoose ee sameystay mudnaanta, hannaanka ay mareen waa isku mid. Dowladahan hoose oo ay weheliyaan wasaaradda arrimaha gudaha ee dowlad-goboleedka, waxay dejiyeen qorshe shan sano ah oo loo yaqaan qaab-dhismeedka horumarinta degmooyinka kaasoo saldhig u ah adeegyada ay dowladda hoose qorsheyneyso in muddadaas ay ka qabato degmada. Qorshaha waxa uu ka kooban yahay afar qeybood. Qeybta koowaad waa xogta

19 Wareysi aan la yeelannay xubin katirsan golaha deegaanka Cadaado, Cadaado, 18 Agoosto 2022.

20 Ibid.

21 Wareysi aan la yeelannay xubin katirsan golaha deegaanka Qardho, Qardho, Oktoobar 20, 2022.

degmada oo ka kooban xogta Juquraafiga iyo xuduudaha degmada, masaafada ay degmadu u jirto degmooyinka deriska la ah, dadka ku nool, xarumaha maamulka degmada, dhaqaalaha gudaha, waxbarashada iyo deegaanka. Qeybta labaad waa wada-tashiga bulshada. Tani waa in bulshada deggan meelaha fog fog sida tuulooyinka laga qeybgeliyo si ay u sheegaan baahiyaha ay rabaan in la xaliyo. La tashiyada bulshada ayaa diiradda lagu saaraa adeegyada bulshada sida waxbarashada iyo caafimaadka. Qeybta saddexaad waa horumarinta dhaqaalaha deegaanka. Qeybtani waxa ay diiradda saaraysaa qaabeynta nooca dhaqdhaqaaqa dhaqaale ee dowladda hoose khuseeyo oo ay ku taageeri karto howlaheeda. Qeybta ugu dambaysa waa qorshaha shaqada iyo miisaaniyadda.[22]

Diyaarinta qorshaha horumarinta waxa uu maraa hannaan isku mid ah ee dowladaha hoose ee sameysta. Ugu horreyn, shaqaalaha wasaaradda arrimaha gudaha ee Puntland waxay tagaan tuulooyinka hoos yimaada dhamaan dowladaha hoose, iyagoo la kulma dadka tuulada, kuna tababara sidii ay u kala hormarin lahaayeen baahiyaha kala duwan ee ay doonayaan in la daboolo. Tababarku waxa uu qaataa ugu badnaan hal saac iyo bar. Marka ay dadka tuuladu qaataan tababarkan gaaban, waxa ay taxayaan ilaa saddex arrimood oo mudnaan u leh oo ay dareemayaan in ay muhiim tahay in wax laga qabto. Marka arrimaha mudnaanta u leh laga uruuriyo dhammaan tuulooyinka hoos yimaada degmo kasta, mudnaanta ayaa sidoo kale la isugu uruuriyaa heer xaafadeed ee degmooyinkaas.[23]

Marka lasoo gebagebeeyo uruurinta mudnaanta ee tuulooyinka iyo xaafadaha degmooyinka, tallaabada xigta waa in shir la iskugu keeno guddiyada tuulooyinka iyo xaafadaha degmada, kaasoo ay soo qabanqaabiso dowladda hoose si ay ugusoo bandhigto sida ay isku waafajiyeen mudnaanta kala duwan.[24] Shirkan, ka qeybgalayaashu waxa ay aragtidooda ku biirin karaan qabyo-qoraalka qorshaha horumarinta degmada oo ay soo diyaarisay dowladda hoose ee ku salaysan mudnaanta kala duwan ee ay soo jeediyeen dadka degan tuulooyinka iyo xaafadaha.[25] Marka ay ka qeybgalayaasha goluhu isku raacaan qabyo qoraalka cusub ee qorshaha horumarinta degmada, dukumeentiga waxaa loo gudbinayaa golaha deegaanka si ay u ansixiyaan kadibna loogu gudbiyo Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee dowlad-goboleedka. Dhanka kale, Wasaaradda Arrimaha Gudaha waxa ay dukumentiga u gudbisaa wasaaradda qorsheynta ee dowlad-goboleedka, taasoo mudnaantan ku darta qorshaha horumarinta ee shanta sano ee heer dowlad-goboleed.[26]

Qorshe sanadle ah ayaa lagasoo saaraa qorshahan, waxa uuna aasaas u noqdaa mashaariicda la fulinayo. Xaaladaha qaarkood, waxaa soo baxa baahiyo aan lagu darin qorshaha horumarinta degmada. Baahiyahan cusub ee soo baxa waxaa lagu muujiyaa qorshaha horumarinta ee sanadlaha ah.[27]

22 Wareysi lala yeeshay sarkaal ka tirsan wasaaradda arrimaha gudaha Galmudug, Dhuusamareeb, Agoosto 20, 2022.

23 Wareysi lala yeeshay duqa dowladda hoose ee Qardho, Qardho, Oktoobar 23, 2022.

24 Ibid.

25 Ibid.

26 Ibid.

27 Ibid.

Wasaaradda arrimaha gudaha ee dowlad-goboleedka Puntland ayaa u xilsaaran hannaanka diyaarinta qorshaha horumarinta degmada iyadoo kaashaneysa dowladaha hoose, waxaana lagu daraa qorshaha shanta sano ee dowlad goboleedka oo ay soo diyaariso wasaaradda qorsheynta. Galmudug, waxaa ka jira labo dowlad hoose (Gaalkacyo iyo Cadaado) oo iyagu mas'uul ka ah diyaarinta qorshaha horumarinta degmada oo aan lagu darin qorshaha 5-ta sano ee dowlad-goboleedka. Sababtuna waxa ay tahay in dhammaan degmooyinka dowlad-goboleedka aysan lahayn dowlado hoose, waxaana socotay muddadii xog-uruurinta daraasaddan howsha dhisidda goleyaasha deegaanka.

Diyaarinta qorshaha horumarinta degmada ee dowladaha hoose waa shardi ay u ku xeraan hay'adaha caawiya maamul daadejinta heer degmo, gaar ahaan UN-JPLG. Waa halbeeg go'aamiya sida barnaamijyada JPLG u caawin karo dowladaha hoose. Masuuliyiin ka tirsan dowladaha hoose oo la wareystay ayaa sheegay in hay'adaha u qorsheysan inay mashaariic ka fuliyaan degmooyinka ay howlahooda ku saleeyaan qorshaha horumarinta degmada kaasoo ka turjumaya baahida dadka deegaanka.

### 3.6 Adeeg-bixinta dowladaha hoose

Maamul-daadejinta waxaa loogu talagalay in lagusoo dhaweeyo adeegyada ay dadka deegaanka u baahan yihiin, sidoo kale sare loogu qaado hab-nololeedkooda taasoo ka duwan nidaamka dowladda dhexe ee adeegyada laga helayay keliya caasimadda dalka ama magaalo-madaxda dowlad goboleedyada. Sikastaba ha ahaatee, arrintan ayaa u muuqata riyo fog oo qariib ah marka loo eego xaaladda Soomaaliya. Maamul-daadejinta ayaan weli dalka oo dhan laga hirgelin, sidoo kale qeybaha kamid ah dalka ee uu muddada ka jirayna kama muuqato ifafaalo muujinaya guulo laga gaaray. Dowlad-goboleedyada Soomaaliya waxa ay dhiseen ama ay ku guda jiraan in ay degmooyinka u dhisaan goleyaal deegaan, iyo u qoondeynta adeegyo kala duwan si loogu daadejiyo dowladaha hoose iyadoo la eegayo sharciyada jira ee dowladaha hoose. Sikastaba ha ahaatee, dhab ahaantii, dowladaha hoose waa qaab-dhismeed magac-u-yaal ah oo aan awoodin in ay gutaan waajibaadkooda ku xusan sharciyada dowladaha hoose.

Dowladaha hoose waxaa dhismahooda la billaabay sanadkii 2005, balse weli ma bixiyaan adeegyadii loo igmaday sida uu qabo sharciga No.7. Hase yeeshe, guud ahaan Puntland, wasaaradaha dowlad-goboleedyadu waxa ay sii hayaan oo ay bixiyaan adeegyada dowladaha hoose. "Tani waxa ay keentay in dhaleecayn loo jeediyo qaabkan waxaana la dalbanayaa in bixinta adeegyada lagu wareejiyo dowladaha hoose" xog-ogaal ka tirsan bulshada rayidka ah ee Puntland ayaa yiri.

Xilliga qoraalka warbixintan, dowladaha hoose ee Puntland iyo Galmudug mas'uul kama ahan adeegyada muhiimka ah sida waxbarashada aasaasiga ah iyo caafimaadka deegaannadooda, sidaas darteedna ay bixiyaan adeegyo aan macno badan lahayn.

Maaddaama dowladaha hoose, caadi ahaan, inta badan awoodahooda maaliyadeed ay weli ka maqan yihiin, ma bixiyaan dhammaan adeegyadan. Tusaale ahaan, dowladaha hoose ee Puntland, sida ay sheegeen gudoomiyeyaal la wareystay, maareynta qashinka waxaa degmo kasta la siiyaa shirkado gaar ah. Shirkadahan ayaa qashinka ka qaada guryaha magaalada

iyo meelaha dadka ay isugu yimaadaan, waxaana loo ogol yahay inay guryaha ka qaadaan khidmadaha adeegga ee ay ku heshiiyeen shirkadda iyo maamulka dowladda hoose. Tani waxa ay sidoo kale khuseysaa Muqdisho oo ay shirkadaha gaarka loo leeyahay qashinka ka uruuriyaan guryaha iyo goobaha dadweynaha. Sikastaba ha ahaatee, qaar kamid ah dowladaha hoose ayaa shirkadaha siiya lacag si ay qashinka uga uruuriyaan waddooyinka. Magaalada Garoowe, dowladda hoose ayaa lacag dhan USD 10,000 bil kasta siisa shirkadda Daryeel Deegaan – oo ah shirkad gaar loo leeyahay oo qashinka qaadda – si ay qashinka uga qaaddo waddooyinka iyo xarumaha dowladda.[28]

Inkastoo booliska dowladaha hoose uu hoos yimaado taliska dowlad-goboleedka, dowladaha hoose ayaa ka qeyb qaata bixinta kharashka ku baxa ilaalinta amniga. Tusaale ahaan, dowladda hoose ee Garoowe ayaa bixisa kharashka shidaalka, korontada iyo biyaha ee saldhigyada Garoowe.[29] Si lamid ah, gudoomiyaha degmada Qardho ayaa sheegay in dowladda hoose ee Qardho ay bixiso 80% kharashka ku baxa amniga.[30]

Dowladaha hoose waxa ay ka shaqeeyaan dhisidda kaabayaasha dhaqaalaha iyo/ama dayactirka waddooyinka degmooyinka. Waddooyinka waxaa inta badan maalgeliya hay'adda UN Joint Programme on Local Governance (JPLG) iyo Somalia Urban Resilience Project II (SURP II) ee Bangiga Adduunka. Sikastaba ha ahaatee, dowladaha hoose ee ay khusayso ayaa boqolleey dakhliga canshuurta ah u qoondeeya waddooyinka, inkastoo kaalinta dowladaha hoose ee mashaariicdan ay kala duwan tahay.[31] Taas waxaa barbar socda in dowlad-goboleedka Puntland ay lacago u qoondeyso mashaariicda kaabayaasha dhaqaalaha ee laga fuliyo dowladaha hoose. Qoondada ka timaada dowlad-goboleedka iyo dowladaha hoose waxaa shardi ka dhiga hay'adaha horumarineed si ay dadka deegaanka u dareemaan lahaansho.[32]

Ma ahan in dowlad-goboleedka iyo hay'adaha horumarinta oo keliya ay dhismaha mashaariicda kaabayaasha ka caawiyaan dowladaha hoose. Waxaa sidoo kale soo baxay dadaallo maxalli ah oo maalgeliya mashaariicda kaabayaasha ah ee loo baahan yahay iyadoo la yareynaayo ku-tiirsanaanta deeq-bixiyeyaasha. Sanduuqa Horumarinta Garoowe waa hal-abuur ay curisay dowladda hoose ee Garoowe. Markii hore waxaa sameeyay koox sumcad ku leh magaalada Garoowe, waxaana lagu rasmiyeeyay wareegto 2019-kii kasoo baxday gudoomiyihii hore ee degmada Garoowe.[33]

Sanduuqa waxa maamula guddi horumarineed oo ka kooban 7 xubnood oo ka socda bulshada deegaanka. Waxa ay isugu jiraan wakiilo ka socda bulshada oo ay ku jiraan dhaqaatiir caafimaad oo caan ah iyo culumaa'udiinka Garowe. Guddigan ayaa go'aamiya halka lagu maalgelinayo lacagta sanduuqa ku jirta.[34]

---

28 Wareysi lala yeeshay xubin hore ee katirsanaa dowladda hoose ee Garoowe, Garoowe, Oktoobar 20, 2022.

29 Wareysi lala yeeshay guddoomiye ku xigeenka dowladda hoose ee Garoowe, Garoowe, Oktoobar 20, 2022.

30 Wareysi lala yeeshay duqa dowladda hoose ee Qardho, Qardho, Oktoobar 23, 2022.

31 Wareysi lala yeeshay xubin hore ee dowladda hoose ee Garoowe, Garoowe, Oktoobar 20, 2022.

32 Wareysi lala yeeshay xubin hore ee dowladda hoose ee Garoowe, Garoowe, Oktoobar 20, 2022.

33 Wareysi lala yeeshay xubin hore ee dowladda hoose ee Garoowe, Garoowe, Oktoobar 20, 2022.

34 Ibid.

Fikirka Sanduuqa Horumarinta Garoowe waxa uu kasoo bilowday in qoys walba ay shirkadaha korontada iyo biyaha bil kasta ka qaadaan hal dollar si loo dhiirigeliyo in bulshada deegaanka ay iskood u maalgashadaan mashaariicdooda lana xaddido ku tiirsanaanta kaalmada shisheeye.[35] Shirkadaha korontada iyo biyaha waxa ay qaaraanka ka uruuriyaan qoys kasta marka ay qaadayaan biilka isticmaalka kadibna waxa ay tabarucaadda billaha ah ku shubaan xisaabta bangiga ee sanduuqa.[36] Wajigiisii koowaad, ku dhawaad USD 250,000 ayay dadka deegaanka ku shubeen sanduuqa. Waxaa lacagtan loo adeegsaday dhismaha laamiga dheer ee dhex mara degmada Garoowe iyo buundooyinka magaalada; Sanduuqa ayaa weli kasii shaqeeya magaalada Garoowe inkastoo ay madaxda Puntland beddeshay gudoomiyihii billaabay sanduuqa.[37]

Horumarinta noocan ah ee degmada iyo kaabayaashii xigay ee lagu dhisay hindisayaashan ayaa fududeeyay isusocodka dadka iyo gaadiidka korna u qaaday bilicda iyo nadaafadda magaalada Garoowe. Waxay ku tusinaysaa in marka dadka deegaanku ay is abaabulaan oo ay helaan hoggaan iyo jiheyn ay u istaagi karaan danta guud. Haddaba, fikraddaani waxay mudan tahay in laga hirgeliyo dowladaha hoose ee kale si loo yareeyo gaabiska u dhexeeya maalgelinta kaabayaasha dowladaha hoose iyo qeybaha kale ee muhiimka u ah.

Si ka duwan dowladda hoose ee Puntland, dowladda hoose ee Qardho ayaa gacan ka geysata adeegyada biyaha iyo korontada ee magaalada. Adeegyada biyaha iyo korontada ee magaalada Qardho waxaa lagu maareeyaa hab iskaashi ee dowladda iyo ganacsatada tan iyo burburkii Soomaaliya 1991. Arrinkan ayay dowladda hoose ee Qardho shuraaako kula tahay labadan adeeg labada shirkadood ee keliya ee bixiya biyaha iyo korontada iyagoo shirkadahan siiya shidaalka.[38] Haddii adeeg bixiyayaashu ay damcaan inay kordhiyaan qiimaha adeegyada, iskood uma sameyn karaan iyagoo aan ogeysiin oo aan oggolaansho ka helin dowladda hoose ee Qardho.[39]

Kadib sare u kacii ku yimid qiimaha shidaalka Soomaaliya sanadkii 2022, shirkadaha biyaha iyo korontada ee magaalada Qardho ayaa isku dayay in ay kordhiyaan qiimaha ay qaadaan. Shirkaduhu waxa ay soo jeediyeen in sicirkii hore lagu kordhiyo USD 0.5. Sikastaba ha ahaatee maamulka dowladda hoose oo la fadhiistay shirkadaha ayaa u sheegay in aysan awood u lahayn in ay kaligood kordhiyaan qiimaha adeegyada, waxa ayna ku amreen in aanay beddelin qiimihii hore. Labada dhinac ayaa ugu dambeyntii ku heshiiyay in lagu kordhiyo USD 0.3, taasoo ka dhigan in qiimihii hore USD 0.2 laga dhimay, iyadoo loo arkay qiimo la jaanqaadi kara xaqiiqada dhabta ah ee lagu shaqeynayay.[40]

35 Wareysi lala yeeshay xubin hore ee dowladda hoose ee Garoowe, Garoowe, Oktoobar 20, 2022.

36 Wareysi lala yeeshay xubin hore ee dowladda hoose ee Garoowe, Garoowe, Oktoobar 20, 2022.

37 Ibid.

38 Ibid.

39 Ibid.

40 Ibid.

Sidoo kale, qaar kamid ah dowladaha hoose ee Puntland ayaa iyaguna sheegay in ay ka qeyb-qaataan waxbarashada aasaasiga ah iyo xarumaha caafimaadka ee degmadooda, iyagoo ka qeyb-qaadanaya dayactir iyo dhisidda qolal iyo darbiyo cusub oo laga dhisayo xarumaha qaarkood.

Sida kor ku cad, 13-ka dowlad hoose ee Puntland ee ka faa'iidaystay welina ka faa'iidaysanaya mashaariicda JPLG ee maamul u daadejinta dowladaha hoose tan iyo sanadkii 2008 ma bixiyaan adeegyada muhiimka ah. Wasaaradaha dowlad-goboleedka ayaa sii haya mas'uuliyadahaas iyagoo sabab uga dhiga in dowladaha hoose ay ka maqan tahay awoodihii loo baahnaa in ay lahaadaan si ay u maamulaan bixinta adeegyada. Madaxda dowladaha hoose ayaa inta badan meesha ka saara sheegashadan iyagoo ku tilmaaama marmarsiyo ay dowlad-goboleedka ku sharciyeysaneyso qabashada shaqadooda.[41]

Madaxda dowladaha hoose ayaa sii haysashada wasaaradaha dowlad-goboleedka ee bixinta adeegyada ku fasiray in ay tahay haysashada ilaha dhaqaalaha iyo awoodaha ee wasaaradaha dowlad-goboleedka. Waxa ay ku andacoodeen in Wasaaradaha Dowlad Goboleedyada ay walwal ka qabaan hadii ay dowladaha hoose uga tanaasulaan adeeg bixinta ay u hayaan in ay ku waayi doonaan dhaqaalaha iyo awooda ay hadda heystaan. Sikastaba ha ahaatee, inkastoo madaxda dowladaha hoose aysan si cad u beeninin in dowladaha hoose qaarkood aysan weli ahayn kuwa kasoo bixi kara howsha loo igmaday, haddana waxay tilmaameen in magaalooyinka waaweyn sida Qardho, Garoowe, Boosaaso, iyo Gaalkacyo ay qaadi karaan mas'uuliyadahaas. Masuuliyiinta kale ee degmooyinka ayaa wasiirada dowlad-goboleedyada ku eedeeya in aysan ka go'neyn daadejinta adeegyada ay hadda bixiyaan.

Is eedeyntaan, oo ay weheliso dhaliisha ku wajahan dib-u-dhaca maamul daadejinta ee dowlad-goboleedka, waxaa jira dadaallo maamul-daadejin ah oo dhawaan bilowday. Dadaalladan ayaa ka dhashay cadaadis ka imaanayay dowladaha hoose ee degmooyinka waaweyn ee Puntland oo ay in muddo ah ku dalbanayeen in ay la wareegaan adeegyada ay tahay in ay bixiyaan dowladahooda hoose. Wadahadal labada heer ee dowladeed ah oo ay taageereysay kooxda ka shaqaysa maamul-daadejinta ee xafiiska madaxweyne ku xigeenka ayaa lagasoo saaray is-afgarad bishii November 2022. Is-afgaradkaas ayaa tilmaamayey in wasaaradaha ay khuseyso ku wareejin doonaan 7 dugsi hoose dhexe iyo shan xarumo caafimaad oo ku yaala Qardho, Boosaaso, Garoowe iyo Gaalkacyo dowladaha hoose muddo labo sano ah oo tijaabo ah.[42] Labadan sano kadib, qiimeyn ayaa la sameyn doonaa si loo hubiyo in ay si fiican u maamuleen adeegyada. Hadii afartan degmo ay ku guuleystaan maareynta adeegyadan, adeegyada kale ayaa loo daadejin doonaa oo degmooyinka kalena way ku dayan doonaan.[43]

41 Wareysi lala yeeshay sarkaal ka tirsan waaxda qorsheynta iyo miisaaniyadda dowladda hoose ee Garoowe, Garoowe, Oktoobar 20, 2022.

42 Wareysi lala yeeshay duqa dowladda hoose ee Galkacyo, Galkacyo, Oktoobar 17, 2022.

43 lala yeeshay duqa dowladda hoose ee Qardho, Oktoobar 22, 2022.

Shanta xarumood ee caafimaadka ah ee lagu wareejinayo dowladaha hoose ayaa isugu jira labo MCH iyo saddex xarumo caafimaad oo ku yaalla dowlad hoose kasta, halka 7-da dugsi hoose dhexe ay yihiin fasalka 1-aad ilaa fasalka 8-aad.[44] Xarumahan ayaa ku yaalla deegaannada iyo tuulooyinka ku teedsan degmooyinka. Hirgelinta howsha maamul daadejinta ayaa billaabanaysa bilaha ugu horreeya ee sanadka 2023.[45] Sikastaba ha ahaatee, gudoomiyeyaasha degmooyinka ayaa ka cabanaya in wasaaraduhu ay go'aansadeen in la daadejiyo maamulka xarumaha caafimaadka ee ku yaalla deegaanada fogfog, islamarkaana aanay haysan wax maalgelin ah. Waxa ay wasaaradaha ay khusayso ku eedeeyeen in ay sii haysanayaan xarumaha caafimaad ee haysta maalgelin.[46]

Dhanka kale, dowladaha hoose iyo degmooyinka dowlad-goboleedka Galmudug ma bixiyaan adeegyada bulshada ee muhiimka ah ee ku qoran sharciga dowladaha hoose ee dowlad-goboleedka ee Lr.4 oo la ansixiyey sanadkii 2017 (waxna laga beddelay sanadkii 2020). Sikastaba ha ahaatee, wasaaradaha dowlad-goboleedka (sida Puntland) ayaa maamula adeegyada ay bixin lahaayeen dowladaha hoose ee dowlad-goboleedka. Ka sokow arrinkan, madaxda dowladda hoose ee Cadaado ayaa sheegay in ay yaraadeen adeegyadii ay bixin jireen, maadaama aysan soo uruurin dakhi ku filan. Waxay dowladda hoose duminaysaa dhismayaal si sharci darro ah looga dhisay waddooyinka si loogu dhiso waddo jaay ama laami ah, balse intaa kadib waxa ay degmada qaaraan ka uruurisaa dadka deegaanka ah si ay ugu bixiso kharashaadkaas. Intaa waxaa dheer, waxa ay shirkadaha korontada siin jirtay lacagta korontada ee nalalka waddooyinka kahor inta aysan NIS Foundation waddooyinka u sameyn nalalka ku shaqeeya cadceedda.[47] Sidoo kale, dowladda hoose waxa ay bixisaa aqoonsiyada, baasaboorrada, iyo lahaanshaha dhulka. Intaa waxaa dheer, waxa ay ka shaqeysaa qorshaha guud ee magaalada. waxa ay dhistay kawaanka oo ay u sameysay meel qashinka lagu shubo.[48] Maamulka dowladda hoose ayaa bixiya kharashaadka adeegyadan iyo adeegyo kale oo ay kamid yihiin dhismayaal loogu talagalay xarumaha dowladda hoose (sida booliska iyo maxkamadaha) iyagoo dadka deegaanka ka uruuriya qaaraan ay qaab samafal ah u bixiyeen.

Guud ahaan Galmudug, dowladda hoose ee Cadaado ayaa ah degmada keliya ee ka faa'ideysa mashaariicda JPLG.[49] Maamullada degmooyinka kale sida Dhuusamareeb iyo Caabudwaaq ayaan ka faa'iidaysan mashruucan waxayna bixiyaan adeegyo aad u yar. Dadkii laga wareystay degmooyinkaas ayaa badankood isku raacay in amniga uu yahay adeegga ugu horeeya ee ay bixiyaan maamullada degmooyinkan, waxaa arrintaan sababay in degmooyinka aysan qaadin canshuuraha si ay adeeg u bixiyaan. Labo, mas'uuliyiinta degmada ayaa sheegay in ay bixiyaan shatiyada ganacsiyada yar yar, warqadda lahaanshaha dhulka, aqoonsiga, iyo baasaboorka iyo xallinta khilaafaadka dhulalka la xiriira ee degmooyinka.

44 Ibid.

45 Ibid.

46 lala yeeshay duqa dowladda hoose ee Galkacyo, Galkacyo, Oktoobar 17, 2022.

47 Wareysi lala yeeshay qof dhalinyarada u dhaqdhaqaaqa, Cadaado, 17 March, 2023.

48 Wareysi lala yeeshay xubin hore ee katirsanaa golaha deegaanka Cadaado, Cadaado, Agoosto 17, 2022.

49 Wareysi lala yeeshay maayar ku xigeenka dowladda hoose ee Cadaado, Agoosto 18, 2022.

Sikastaba ha ahaatee, sida ay sheegeen mas'uuliyiin ka tirsan wasaaradda arrimaha gudaha Galmudug, maamulka ayaa qorsheynaya in adeegyada loo daadejiyo maamullada degmooyinka. Si taas loo gaaro, dowlad-goboleedka ayaa sameeyay guddiyo isugu jira heer wasaarad iyo heer farsamo oo lagasoo kala xulay wasaaradaha bixiya adeegyada bulshada, guddiyadani oo hoos imaanaya xafiiska madaxweyne ku xigeenka dowlad-goboleedka. Qorshaha ayaa ah in waxbarashada aasaasiga ah loo daadejiyo dowladda hoose ee Cadaado iyo (Koonfurta) Gaalkacyo. Sikastaba ha ahaatee, qiimeyn ayay sameysay dowladda hoose ee Cadaado si loo hubiyo in ay maarayn karto mas'uuliyadda cusub.[50] Sidaas awgeed, hal dugsi hoose ayaa tijaabo ahaan loogu wareejin doonaa dowladda hoose. Maamulka degmada ayaa laga doonayey in uu bixiyo mushaaraadka shaqaalaha nadaafadda ee dugsiga hoose & dhexe balse waxa ay ka cawdeen in aysan awoodin lacagtaas maadaama aysan degmada kasoo xareyn dakhli ay ku daboolaan kharashaadkan. Si looga gudbo caqabadan, loona hormariyo maamul daadejinta, wasaaradda maaliyadda Galmudug ayaa ballan qaadday in dowladda hoose ee Cadaado ay u oggolaan doonto in ay canshuur ka uruuriso dolwadda hoose si ay u daboosho kharashaadka.[51] Sikastaba ha ahaatee, hirgelinta qorshahan waxaa dib-u-dhac ku keenay u diyaar garowga doorashada goleyaasha deegaanka ee Cadaado oo lasoo gaba-gabeeyay Ogosto 2022.[52]

Degmooyinka gobolka Banaadir wax adeeg ah ma siiyaan dadka deegaanka. Sababta ayaa ah in degmooyinka gobolka Banaadir haba yaraatee ay wax canshuur ah qaadin. Maamulka Gobolka Banaadir ayaa xarumo ku leh degmooyinkaas, waxa uuna bixiyaa adeegyo ay kamid yihiin bixinta shatiyada ganacsiga, xallinta khilaafaadka dhulalka iyadoo loo marayo maxkamadda degmada, iyo diiwaangelinta kireystayaasha ku cusub degmooyinka.

Inkastoo dowladaha hoose iyo xafiisyada degmooyinka aysan bixineynin adeegyadii iyo waajibaadkii ay lahaayeen, cilmibaaristu waxa ay wareysiyo iyo kormeer ku ogaatay in dowladaha hoose iyo maamullada degmooyinka ay inta badan ku mashquulaan maareynta gargaarka bini'aadannimo. Gargaarkan waxaa lagu bixiyaa raashiin ahaan ama lacag caddaan ah oo loogu shubo sim-kaarka shirkadaha isgaarsiinta gudaha. Madaxda degmooyinka ayaa hay'adaha gargaarka bixiya ka caawiya diiwaangelinta ka-faa'ideystayaasha deggan xaafadaha degmada iyo tuulooyinka. Tani waxa ay mas'uulinyiinta deegaanka uga dhigan tahay il dhaqaale, waxa ayna beddel ugu noqotaa dakhliga canshuuraha ah oo lagasoo uruurin lahaa degmada. Dadka qaar ayaa mas'uuliyiinta degmooyinka ku eedeeya in ay leexsadaan oo ay lunsadaan gargaarkii loogu talagalay dadka tabaaleysan.

## 3.7 Heerka daadejinta maaliyadda ee dowladaha hoose

Sida qeybta sare lagu faahfaahiyay, dowladaha hoose ma bixiyaan adeegyada muhiimka ah ee ay ahayd in ay bixiyaan, sababtoo ah wasaaradaha dowlad-goboleedyada ayaa heysta masuuliyadaas, taasina waxa ay yaraysay macnaha dowladaha hoose. Dowlad-goboleedyadu

50 Wareysi aan la yeelannay sarkaal ka tirsan wasaaradda arrimaha gudaha Galmudug, Dhuusomareeb, Agoosto 25, 2022.

51 Ibid.

52 Ibid.

keliya ma haystaan bixinta adeegga ee waxa ay sidoo kale maamulaan awoodaha maaliyadeed ee heer dowlad hoose. Qeybtani waxa aan ku gorfeyneynaa dakhliga ay uruuriyaan dowladaha hoose; miisaaniyadda ay ku shaqeeyaan; nidaamyada maaliyadeed ee ay u isticmaalaan uruurinta iyo bixinta kharashaadka; iyo haddii ay jiraan wareejin maaliyadeed ah oo ay dowladaha hoose ka helaan dowlad-goboleedyada.

### 3.7.1 Dakhli uruurinta dowladaha hoose: Noocyada iyo ilaha

Inkastoo qodobka 72(1) ee xeerka dowladaha hoose ee Puntland xeer No.7 uu qeexayo 28 nooc oo canshuur ah oo dowladaha hoose laga doonayo in ay qaadaan, haddana dowladaha hoose waxa ay qaadaan tiro yar oo canshuurahaas ah. Wasaaradda maaliyadda Puntland ayaa qaadda canshuurahaas badankooda, taasoo soo koobtay canshuur uruurinta dowladda hoose.

Dowladaha hoose ee waaweyn ee Puntland sida Gaalkacayo, Garoowe, iyo Qardho ayaa nuucyo badan oo canshuuro isku mid ah ka qaada meelo yar oo ilo dakhli leh balse waxa ay ku kala duwan yihiin baaxadda canshuurta marka loo eego saraakiisha dakhliga ee degmooyinkaas. Tusaale ahaan, magaalada Galkacyo, oo ah xuddunta ganacsiga gobollada dhexe iyo deegaanno xuduud la leh Itoobiya; iyo Garoowe oo xarun u ah dowlad-goboleedka iyo hay'adaha aan dowliga ahayn, waxa ay leedahay canshuur qaadis ka weyn Qardho. Inkastoo aan Boosaaso xog kasoo uruurin, mas'uuliyiinta dowladaha hoose ee saddexda degmo ee kale ayaa isku raacay in dowladda hoose ee Boosaaso ay iyadana canshuuro lamid ah Galkacyo uruuriso, haddiiba aysan ka badneyn, sababtoo ah magaaladu waa xarunta ganacsiga ee dowlad-goboleedka.

Canshuuraha ay dowladaha hoose inta badan qaadaan waxa kamid ah canshuuraha guryaha, canshuuraha ganacsiga, canshuurta gaadiidka dadweynaha (tagaasida, Bajaajta, gawaarida xamuulka, basaska), canshuuraha badeeca bannaanka laga keeno, khidmadaha maalinlaha ah ee laga qaado waratada, canshuurta xoolaha, canshuurta kawaannada, kirada guryaha dadweynaha ee dowladaha hoose, qaadka, canshuuraha istaambada, khidmada bixinta aqoonsiga.

Dowladaha hoose oo dhan, canshuuraha laga qaado guryaha ayaa ah isha dakhli ee ugu weyn. Sidaas awgeed, dowladaha hoose ee Galkacyo, Garoowe, iyo Qardho ayaa calaamdiyey dhulka iyagoo isticmaalaya GPS. Waxa ay diiwaangeliyeen qaar kamid ah guryaha iyadoo diwaangelinta kuwa haray ay socotay intii lagu jiray cilmibaarista dabayaaqadii 2022. Ilaa hadda, Garowe, Qardho, iyo Galkacyo waxa ay sida ay u kala horreeyaan u diiwaangeliyeen 20,000, 12,500, iyo 5,452 oo guryo ah. Guryaha diiwaangashan ayaa isugu jira xarumo ganacsi iyo guryo deegaan ah. Guryahaasi waxay leeyihiin lambaro lagu xareeyay nidaamka maaliyadeed ee dowlada hoose.[53]

Dowladaha hoose waxa ay canshuurta guryaha uruuriyaan dhamaadka sanad kasta. Waaxyada dakhliga waxa ay adeegsadaan habab kala duwan si ay u ogeysiiyaan mulkiilayaasha guryaha xilliga lacag bixinta. Qaansheegyada canshuurta ayaa lagasoo saaraa nidaamka maaliyadeed waxaana loo diraa milkiilayaasha guryaha. Sidoo kale, waaxyada dakhliga ee dowladaha hoose

53 Wareysiyo lala yeeshay Galkacyo, Garoowe, iyo Qardho saraakiisha waaxda dakhliga ee dowladaha hoose, Oktoobar 16, 19, iyo 22, 2022.

ayaa daabaca qaansheegad, waxa ayna si shaqsi ah ugu geeyaan mulkiilayaasha guryaha.[54] Intaa waxa dheer, fariimo qoraal gaaban (SMS) ayaa loo diraa milkiilayaasha guryaha oo ogeysiinayo in ay bixiyaan lacagta. Milkiilayaasha guryaha ayaa lacagta ku bixiya qaab elektaroonig ah, beddelkeedana waxa ay warqad cadeyn ah kasoo qaataan xafiiska waaxda dakhliga ee dowladda hoose ama waxaa u keena shaqaalaha dowladda hoose.[55]

Si lamid ah sharciga dowladaha hoose ee Puntland, sharciga dowladaha hoose ee No.4 ee Galmudug ayaa qoraya ilaa 20 canshuurood iyo kharashaad ay dowladaha hoose qaadi karaan balse waa kuwo warqad oo kaliya ku qoran. Awoodda canshuur uruurinta waxaa heysta wasaaradda maaliyadda ee dowlad-goboleedka.

Inkastoo wasaaradda maaliyadda Galmudug ay qaaddo dakhliga ugu badan, haddana waxa ay degmooyinka leh goleyaasha deegaanka iyo maamullada loo magacaabay u oggolaatay inay qaadaan canshuuro aan macno badan lahayn. Degmada Dhuusomareeb waxa ay qaaddaa cashuuraha istaambada (nootaayada), khidmada shahaaddada dhalashada, cashuurta gaadiidka gudaha (Tagaasida iyo Bajaaj-ta), iyo cashuurta dakhliga ganacsiyada yaryar (cashuurahaan waa kuwo bille ah). Maamulka degmada Guriceel ayaa qaada canshuuraha suuqa, halka dowladda hoose ee Gaalkacyo (Koonfurta) ay uruuriso canshuurta laga qaado gaadiidka u kala goosha tuulooyinka iyo kuwa qudaarta keena magaalada. Degmooyinka Galmudug ayaa sidoo kale canshuur ka qaada mootooyinka bajaajta ($10-15) bishii.[56]

Taas caksigeeda, degmooyinka gobolka Banaadir wax dakhli ah kama soo xareeyaan degmooyinkooda. Maamulka Gobolka Banaadir ayaa taas beddelkeeda degmooyinkaas ka uruuriyo dakhliga, sida canshuuraha guryaha, oggolaanshaha dhismaha, iyo shatiyada.[57]

### 3.7.2 Miisaaniyadda dowladaha hoose

Daraasadda ayaa ogaatay in dowladaha hoose ee Puntland ay ku shaqeeyaan miisaaniyad sanadeed, halka dhigooda Galmudug iyo Banaadir aysan lahayn miisaaniyad rasmi ah. Tusaale ahaan, Garowe, Qardho, iyo Galkacyo (waqooyi) waxa ay sida ay u kala horreeyaan ugu shaqeeyaan miisaaniyad sanadeed gaareysa USD 11.5 milyan, USD 1.5 milyan, iyo USD 1.3 milyan sanad maaliyadeedka 2022.[58] Kala duwanaanshaha muuqda ee miisaaniyada dowladahaan hoose ayaa ugu horreyn ka yimid kala duwanaanshaha tirada mashaariicda horumarineed ee laga fuliyo deegaannadan.

Dowladda hoose ee Garoowe ayaa leh miisaaniyadda ugu badan ee sanadka 2022, waxaana taasi sabab u ah in magaaladu ay ka faa'iidaysato mashaariic aan ahayn keliya JPLG. Miisaaniyaddan dheeraadka ah waxa ay qeyb ahaan la xiriirtaa maadaama ay tahay magaalo madaxda

54 Wareysi lala yeeshay sarkaal katirsan waaxda dakhliga dowladda hoose ee Garoowe, Oktoobar 19, 2022.

55 Ibid.

56 Wareysi aan la yeelanay sarkaal ka tirsan wasaaradda maaliyadda Galmudug, Dhuusomareeb, Agoosto 25, 2022.

57 Wareysi lala yeeshay guddoomiye degmo, Muqdisho, Noofambar 3, 2022.

58 Wareysiyo lala yeeshay saraakiisha Gaalkacyo, Garoowe, iyo Qardho ee waaxaha dakhliga ee dowladda hoose Oktoobar 16, 19, iyo 22, 2022.

Puntland, halka dowladaha hoose ee kale aysan helin mashaariicdan dheeraadka ah.[59] Gaar ahaan, Garoowe waxay ka faa'iidaysataa mashruuca SURPII ee Bangiga Adduunka. Sida uu sheegay sarkaal ka tirsan dowladda hoose ee Garoowe, mashaariicda noocan oo kale ah waxay USD 8 milyan ka yihiin miisaaniyada 2022, halka mashruucyada ay helaan dowladaha hoose ee Galkacyo iyo Qardho ay mashaariicdan qeyb aad u yar ka yihiin miisaaniyadooda.[60] Ilaha dakhliga ee miisaaniyadooda ayaa inta badan isugu jira dakhliga gudaha iyo mashaariicda lagu maalgaliyo JPLG. Dakhliga gudaha ayaa ah isha ugu weyn ee miisaaniyadda Qardho iyo Galkacyo, halkaasoo keliya laga fuliyo barnaamijka JPLG. Taas beddelkeeda, dhaqaalaha ka yimaada mashaariicda ayaa ah 80% miisaaniyadda guud ee Garoowe.[61]

Waaxyada dakhliga dowladaha hoose ee Puntland ayaa u xilsaaran diyaarinta miisaaniyadda iyo u gudbinta xubnaha golaha deegaanka si ay dib-u-eegis ugu sameeyaan una ansixiyaan. Sikastaba ha ahaatee, habraacan ayaa kusoo beegmay bishii Oktoobar 2022 oo ay xubnaha golaha deegaanku fasax ku maqnaayeen, sidaas awgeed guddiyada joogtada ahi waxay dib-u-eegis ku sameeyeen, ansixiyeen miisaaniyadda iyagoo u gudbiyay wasaaradda arrimaha gudaha ee dowlad-goboleedka, oo kadib usii gudbisay wasaaradda maaliyadda ee dowlad-goboleedka. Wasaaradda maaliyadda ayaa isku geysa dhammaan miisaaniyadaha kala duwan ee dowladaha hoose, waxa ayna soo saartaa miisaaniyad guud. Waxa ayna markaas u gudbisaa baarlamaanka dowlad-goboleedka si uu u ansixiyo.[62] Haddii ay dhacdo in dowlad hoose aysan lahayn gole deegaan (sida Gaalkacyo, Garoowe iyo Boosaaso oo uu madaxweynaha maamulku si kumeelgaar ah u kala diray), guddiga fulinta ee dowladda hoose ayaa masuuliyadda qaadaya.[63]

Saraakiisha dakhliga ee dowladaha hoose ee Puntland ayaa ka warbixiyay in miisaaniyada ay ku shaqeeyaan ay sanadba sanadka ka dambeeya sii kordheysay. Hal tusaale oo xusid mudan ayaa ah miisaaniyadda dowladda hoose ee Garoowetaa ay ku dhawaad 3 milyan oo doolar ku siyaadday miisaaniyada 2022. Miisaaniyaddeeda 2021 waxay ahayd USD 8.5 milyan halka 2022 ay noqotay USD 11.5 milyan.

| # | Local government | Approximate Budget ( in USD Million) | Year |
|---|---|---|---|
| 1 | Garowe | 11.5 | 2022 |
| 2 | Qardho | 1.5 | 2022 |
| 3 | Galkacyo | 1.3 | 2022 |

*Jadwalka 1.1: Jadwalkan waxa uu muujinayaa miisaaniyad-sanadeedka 2022 ee goobaha daraasadda laga sameeyay ee dowlad-goboleedka Puntland.*

59 Wareysiyo lala yeeshay sarkaal ka tirsan waaxda dakhliga dowladda hoose ee Garoowe, Garoowe, Oktoobar 19, 2022.

60 Ibid.

61 Wareysi lala yeeshay sarkaal ka tirsan waaxda qorsheynta iyo miisaaniyada Garoowe, Garoowe, Oktoobar 19, 2022.

62 Wareysi aan la yeelanay xildhibaan katirsan golaha deegaanka ee degmada Qardho ahna xubin guddiga joogtada ah, Qardho, Oktoobar 22, 2022.

63 Wareysi lala yeeshay sarkaal ka tirsan waaxda qorsheynta iyo miisaaniyada Garoowe, Garoowe, Oktoobar 19, 2022.

Iyadoo la ilaalinayo hufnaanta maaliyadeed, daah-furnaanta, iyo isla-xisaabtanka, nidaamyada maaliyadeed ee loo isticmaalo soo-uruurinta dakhliga iyo kharash-bixinta ayaa Soomaaliya ka ah kuwo heer billow ah joogo. Nidaamyadan ayaa markii ugu horreysay laga hirgeliyey heer federaal markii dambana heer dowlad-goboleed iyadoo la isku dayayo in la hormariyo maamulka maaliyadda dowladda iyo u-qalmitaanka Soomaaliya ee kaalmada maaliyadeed. Sikastaba ha ahaatee, qaadashada iyo adeegsiga nidaamyada maaliyadeed ee heer degmo ayaa gaabis ku socotay, taasoo ay sababtay awoodaha dakhli-uruurinta ee dowladaha hoose oo ay gacanta ku hayaan hay'adaha dowlad-goboleedyada iyo goleyaasha deegaanka oo iyagana cusub.

Inkastoo ay xaddidan tahay awoodaha dakhli-uruurinta, dowladaha hoose ee Puntland ayaa ah keliya dowladaha hoose ee isticmaala Nidaamka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda (FMIS), iyadoo degmooyinka Galmudug iyo Gobolka Banaadir aysan adeegsan. Nidaamkan waxaa hadda adeegsada afarta dowlad hoose ee Puntland: Gaalkacyo, Garoowe, Qardho, iyo Boosaaso. Waxaa markii ugu horreysay laga isticmaalay dowladda hoose ee Garoowe sanadkii 2019, kadibna saddexda dowlad hoose ee kale oo iyaguna billaabay sanadkii 2021, maadaama uu yaraa ka go'naanshaha gudoomiyeyaasha degmooyinkan.[64] Dowladaha hoose ee Puntland ayaa nidaamkan uga faa'iidaysta uruurinta cashuuraha ay qaadaan iyo bixinta kharashaadka.[65]

Hirgelinta adeegsiga nidaamkan FMIS ma ahayn hawl fudud. Waxa ay caqabado kala kulantay dakhli-uruuriyeyaasha dowladaha hoose, sababtoo ah waxa ay dakhli uruurinta u isticmaali jireen rasiityo iyo buugaag daabacan, oo ka caawisay in "lacag badan ka xadaan" lacagaha cashuur bixiyayaasha laga qaado.[66]

Si loo dhaqangeliyo adeegsiga nidaamkan canshuur uruurinta, gudoomiyihii Garoowe ee xilligaas Axmed Barre, ayaa qaatay go'aan ah "FMIS la'aan, mushaar la'aan". Waxa uu cashuur-qaadayaasha ku yiri "hadii aadan nidaamkan ku qaadin canshuurta, ha sugina in aad mushaar heshaan". Tani waxa ay dhiirigelisay dhaqangelinta nidaamka dakhli uruurinta dowladda hoose ee Garoowe.[67] Isticmaalka FMIS ayaa yareysay in canshuur uruuriyeyaashu ay leexsadaan lacagaha cashuur bixiyayaasha maadaama aanay lacag caddaan ah loo dhiibeynin canshuur uruuriyeyaasha balse ay si toos ah ugu shubayaan xisaabaadka bangiga iyagoo lacagaha ka diraaya teleefanadooda.[68]

### 3.7.3 Wareejinta maaliyadeed

Nooca federaaleynta maaliyadda ee Soomaaliya weli lama qeexin, heerarka kala duwan ee dowladda, gaar ahaan dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada, ayaa dakhli kasoo xareeya dhulka ay maamulaan (Yusuf & Wasuge, 2021). Dowlad-goboleedyada ayaa haysta dakhligooda waxa ayna u isticmaalaan in ay ku daboolaan kharashaadkooda iyagoo aan qeyb

64 Wareysi lala yeeshay la taliye arrimahaFMIS ee dowladda hoose ee Garoowe, Garoowe, Oktoobar 19, 2022.

65 Ibid.

66 Ibid.

67 Ibid.

68 Wareysi lala yeeshay la taliye FMIS ee dowladda hoose ee Garoowe, Garoowe, Oktoobar 19, 2022.

kamid ah dakhligan la wadaagin dowladda federaalka. Sidaas awgeed, habkan hadda socda waxa uu nidaamka wareejinta maaliyadda ka dhigay mid hal dhinac ah: dawladda federaalka oo dowlada-goboleedyada u wareejisaa lacagaha deeq-bixiyayaasha iyo lacagaha lagu taageero mashruucyada. Ka sokow, waxa ay bixisaa lacag lagu qiyaasay USD 150,000 oo laga jaro dakhliga gudaha ee dowladda federaalka kasoo gala dekedda iyo garoonka diyaaradaha ee Muqdisho oo la siiyo dowlad-goboleedyada Galmudug, Hirshabeelle iyo Koonfur-galbeed, maadaama aanay dakad lahayn dowlad-goboleedyadan.

Dowlad-goboleedyadu kuma koobna oo keliya ka haysashada dowladda federaalka ee dakhliga kasoo xarooda gudaha, balse waxa ay sidoo kale sidaas ku sameeyaan dowladaha hoose, sida lagu ogaaday daraasaddan laga sameeyay Puntland, Galmudug, iyo gobolka Banaadir. Xeer Lr.7 ee dowladaha hoose ee Puntland qodobkiisa 75(1) ayaa dhigaya in dowladaha hoose ay helayaan saddex nooc oo taageero maaliyadeed ah: wareejin maaliyadeed shuruudaysan oo loogu talo galay in lagu maalgeliyo mashaariicda dowladaha hoose; wareejin loo qoondeeyay hirgelinta maamul daadejinta iyo bixinta adeegga; ugu dambeyntiina lacago si gaar ah loogu qoondeeyay degmooyinka aan horumarsaneyn si loola simo degmooyinka kale. Wareysiyo lala yeeshay saddex gudoomiye iyo ku xigeenno ka tirsan dowladaha hoose ee Puntland (Garoowe, Gaalkacyo iyo Qardho) ayaa dhamaantood isku raacay in aysan helin wax dhaqaale ah oo looga qoondeeyay dakhliga kasoo xarooda dhulkooda. Dhinaca kale waxa ay xuseen in maamul goboleedka (Puntland) uu kaalmo lacageed uga qeyb qaato mashaariicda laga fuliyo degmooyinka qaar.

Inkastoo dowlad-goboleedka Puntland aysan hadda bixin lacago gaar ah, haddana afar dowlad hoose oo waaweyn oo Puntland ah (Boosaaso, Galkacyo, Garoowe, iyo Qardho) ayay 5% ka siin jirtay miisaaniyadda dowlad-goboleedka. Sikastaba ha ahaatee, waxaa qoondeynta boqoleeyda laga dhigay 3% muddadii uu Cabdiraxmaan Faroole xilka hayay (8 Janaayo 2009-kii – 8 Janaayo 2014-kii). Cabdiweli Cali Gaas ayaa markii uu xafiiska yimid bishii Janaayo 2014 qoondadii sii yareeyay oo ka dhigay 2.5%, isagoo markii dambena gebi ahaanba joojiyey.[69] Dhanka kale, dowladda hoose ee Garoowe ayaa ka cabanaysa in aysan helin qoondo boqolleey ah oo miisaaniyadda dowlad-goboleedka looga qoondeeyay dowladda hoose ee Garoowe maadaama ay tahay caasimadda maamul-goboleedka.[70]

Inkastoo ay sidan tahay xaaladda u wareejinta maaliyadeed ee dowladaha hoose, waxaa magaalada Garoowe ka socda wada tashiyo lagu daah-furayo sanduuqa horumarinta dowladaha hoose ee Puntland. Ujeedka ayaa ah in meesha laga saaro mashruuca JPLG oo taageera mashaariicda kaabayaasha dhaqaalaha qaar kamid ah dowladaha hoose ee Puntland, si taas loo xaqiijiyana, dhaqaalaha loogu talagalay horumarinta dowladaha hoose ayaa lagu uruurin doonaa sanduuqan, sidoo kale dowlad-goboleedka ayaa lacagaha uu u wareejinayo dowladaha hoose ku shubi doonaa sanduuqa. Balse, faahfaahinnada la xiriira tirada lacagta dowladaha hoose looga qoondeyn doono sanduuqa ayaan weli laga doodin maadaama fikraddu ay marayso heer bilow ah.[71]

69 Wareysi lala yeeshay duqa degmada Qardho, Qardho, Oktoobar 22, 2022.

70 Wareysi lala yeeshay xildhibaan hore ee dowladda hoose ee Garoowe, Garoowe, Oktoobar 19, 2022.

71 Wareysi lala yeeshay duqa degmada Qardho, Qardho, Oktoobar 22, 2022.

Si lamid ah Puntland, Galmudug ayaanan dowladaheeda hoose ku wareejin wax lacag maaliyadeed ah. Sikastaba ha ahaatee, sharciga dowladaha hoose ee Lr.4 xitaa ma uusan xusin wareejinta maaliyadda iskaba daa in uu qeexo noocyada wareejinta ee ay filanayaan dowladaha hoose.

Maamulka Gobolka Benaadir, degmooyinka wax wareejin maailyadeed ah kama helaan maamulka gobolka. Maamullada degmooyinka ayaa ku sugan xaalad ka liidata midda dowlad-goboleedyada, sababtoo ah wax canshuur ah haba yaraatee kama soo uruuriyaan degmooyinkooda. Keliya wakiillada maamulka gobolka ayaa ku sugan degmooyinka oo qabta shaqooyinkaas. Markaa, ma awoodaan in ay bixiyaan biilasha biyaha iyo korontada xafiisyadooda. Guddoomiye degmo ayaa wax laga xumaado ku tilmaamay in bixinta lacagta korontada ay daahdo bilooyin iyo mararka qaar sanado taasoo keenta in shirkadaha korontada ay degmada ka jaraan adeegyadii koronto ay ka heli jirtay iyadoo lagu guda jiro howl maalmeedka.[72] Sikastaba ha ahaatee, waxa uu xusay in intii Thabit Cabdi Maxamed, Guddoomiyihii hore iyo Duqii hore ee maamulka gobolka Banaadir (15 April 2017 – 21 January 2018) uu xafiiska joogay uu maamul degmo kasta u qoondeeyay lacag dhan 4,000 USD, si uu ugu daboolo kharashka ku baxaya shaqada balse taasi waxaa meesha ka saaray Gudoomiyihii xigay.[73]

### 3.7.4. Isla xisaabtanka dowladaha hoose

Soomaaliya ayaa kaalinta ugu hooseysa ka gasha halbeegyada dowladnimada caalamka loo adeegsado in lagu cabbiro isla xisaabtanka, daah-furnaanta, iyo hufnaanta (The Global Economy, 2021). Si loo hagaajiyo xaaladda cakiran ee waxqabadka dowladnimo ee dalka, hay'adaha deeq bixiyayaasha iyo hay'adaha maaliyadda adduunka sida Bangiga Adduunka iyo Hay'adda Lacagta Adduunka ayaa hormuud ka ah dadaallada lagu dhisayo hannaan isla xisaabtan ee hay'adaha dalka oo u badan heer federaal iyo heer dowlad goboleed. Sikastaba ha ahaatee, dadaalladani waxay ku jiraan heer bilow ah.

Halbeegyada kale ee dowladnimada, isla xisaabtanka ayaa ku jira liiska ugu hooseeya ee waxyaalaha ay dowladaha hoose/maamulada degmooyinka mudnaanta siiyaan, iyadoo ay dowlad-goboleedyadu maamulaan dakhli-uruurinta iyo bixinta adeegyada kamidka ah awoodaha iyo waajibaadka dowladaha hoose. Saraakiisha dowladaha hoose ayaa ku doodaya in aysan awood lahayn oo aysan haysan lacag ay xisaabiyaan.

Inkastoo ay xaaladdani jirto, cilmibaaristu waxa ay ogaatay in keliya dowladaha hoose ee Puntland ay leeyahay habab isla xisaabtan, kuwaasoo weli bilow ah. Dowladaha hoose ee Galmudug iyo degmooyinka gobolka Banaadir ma laha hannaan isla xisaabtan. Masuuliyiinta dowladaha hoose ee Puntland oo daraasadan lagu wareystay ayaa sheegay dhawr hab oo ay dowladahooda hoose leeyihiin waxaana kamid ah Nidaamka Macluumaadka Maamulka Maaliyadda, miisaaniyad sanadeedka, xisaab xirka sanadlaha ah ee, iyo baaritaannada maaliyadeed ee gudaha.

72 Wareysi lala yeeshay guddoome degmo, Muqdisho, Sebtembar 10, 2022.

73 Ibid.

Nidaamka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda waxaa sanadkii 2019 lagusoo bandhigay dowladaha hoose ee Puntland, gaar ahaan afarta degmo ee ugu waaweyn ee kala ah Garoowe, Boosaaso, Galkacyo, iyo Qardho. Hase yeeshee dowladda hoose ee Garoowe ayaa ahayd dowladii ugu horreysay ee nidaamkan qaadata una adeegsata dakhli uruurinta iyo bixinta kharashaadka halka saddexda dowlad hoose ee kale ay nidaamkan qaateen 2021. Maamullada hoose ayaa isku raacay in qaadashada nidaamkani uu kor u qaaday dakhliga dowladaha hoose islamarkaana uu xaddiday musuqmaasuqii markii hore lagu sameyn jiray dakhliga.[74]

Sidoo kale, dowladaha hoose ee Puntland waxay leeyihiin hanti-dhowrayaal gudaha ah oo katirsan dowlad goboleedka. Hanti-dhowrka gudaha waxa uu saddexdii biloodba mar kormeeraa dakhliga iyo kharashaadka dowladda hoose. Sidoo kale, waxa uu hubiyaa saxnaanta dakhliga ay waaxyaha soo uruuriyaan. Kooxda hanti-dhowrka ayaa taga xarumaha ganacsiga ee ay waaxyaha dakhligu cashuuraha kasoo uruuriyaan si ay u hubiyaan in cashuurta la qaaday iyo rasiidyada ay is leeyihiin.[75] Dhammaadka sanadka, Xafiiska Hanti-dhowrka Guud ee Dowlad-goboleedka ayaa u yimaada dowladaha hoose waxa uuna eegaa in hanti-dhowrkooda gudaha uu howsha qabtay; Xafiiska Hanti-dhowrka Guud ayaa ku tiirsan xogtooda.[76] Waxa kale oo ay dowladaha hoose ku dhejiyaan darbiyada xafiisyada dowladaha hoose miisaaniyadda ay ansixiyeen si ay dadku u arki karaan. Miisaaniyadda dhinaceeda, waxa ay sidoo kale ku dhejiyaan ilaha dakhliga. Cilmibaarayaashu waxay qoraalladan ku arkeen Galkacyo, Garoowe, iyo Qardho.

Xaaladda daadejinta maaliyadda ee kor ku xusan ee goobaha daraasadda laga sameeyay waxa ay ka turjumaysaa xaaladaha guud ee federaaleynta maaliyadeed ee dalka. Hannaanka maaliyadeed ee hadda jira ayaa u muuqda mid ku uruursan heer federaal iyo heer dowlad-goboleed iyadoo heer kasta oo dowladeed uu dakhliga ka uruuriyo dhulka uu maamulo hal dollar-na aanu la wadaagin heerarka kale ee dowladda. Dowladda federaalku waxa ay dhammaan dowlad-goboleedyada ku wareejisaa lacagaha ka yimaada deeq-bixiyayaasha iyo dakhliga kaluumaysiga. Ma jiro heshiis rasmi ah oo u dhexeeya labada heer ee dowladeed ee qeexa awoodaha maaliyadeed ee heer kasta. Sikastaba ha ahaatee, waxaa socda doodo lagu doonayo in lagu yareynayo kala duwanaashahaan, laganasoo saaro heshiis laga gaaray federaaleynta maaliyadda, waxaana dowladaha hoose lagu casuumay in ay ka qeyb galaan doodahaas muhiimka ah. Sikastaba ha ahaatee, dowladaha hoose ayaa ah dhibanayaasha ugu horreeya ee daadejin la'aanta maamulka maaliyadda ee hadda jirta taasina waxa ay faa'iido u tahay dowlad-goboleedyada oo sii joogteynaya awoodahooda maaliyadda iyo adeeg bixinta la xiriirta.

74 Wareysi lala yeeshay sarkaal ka tirsan waaxda dakhliga dowladda hoose ee Garoowe, Garoowe, Oktoobar 19, 2022.

75 Wareysi lala yeeshay sarkaal ka tirsan waaxda dakhliga dowladda hoose ee Galkacyo, Galkacyo, Oktoobar 16, 2022.

76 Wareysi lala yeeshay sarkaal ka tirsan waaxda dakhliga dowladda hoose ee Garoowe, Garoowe, Oktoobar 19, 2022.

## 4.0 Caqabadaha hortaagan daadejinta maaliyadda & adeeg-bixinta ee dowladaha hoose

Qeybaha hore waxa aan ku faahfaahinnay xaaladda maamul-daadejinta ee saddexda maamul ee daraasadda laga sameeyey. Warbixintu hadda waxa ay gorfeyneysaa caqabadaha ay la kulmaan dowladaha hoose. Dowladaha hoose waxay la kulmaan caqabado aad u adag oo xaddidaya awoodooda ay ku uruurin karaan dakhliga kuna bixin karaan adeegyada muhiimka ah sida ku xusan sharciyada dowladaha hoose. Caqabadahaas waxaa kamid ah jiritaan la'aanta go'aan siyaasadeed oo ku wajahan mamul daadejintaa; jiritaan la'aanta dowlad meteleysa heer degmo; awoodda farsamo oo xaddidan; ka tagista shaqaalaha ee shaqada oo sarreeysa; dakhliga ay uruuriyaan oo xaddidnaan; iyo wareejin la'aanta maaliyadda.

1. **La'aanta ka go'naan siyaasadeed ee daadejinta**

Ka go'naan la'aanta wasaaradaha dowlad-goboleedyada iyo hoggaanka siyaasadeed ee dowlad-goboleedyada ayaa ahayd walaac ay si joogto ah looga sheegay goobaha daraasadda laga sameeyay. Wasaaradaha dowlad-goboleedyada ayaa bixiya adeegyo waxa ayna uruuriyaan canshuuraha ay ahayd in ay qaadaan iyo adeegyada ay ahayd in ayn bixiyaan dowladaha hoose. Dadka deegaanka oo daraasadan lagu wareystay ayaa ku dooday in sababta ay wasaaraduhu ugu adkeysanayaan qabashada hawlahan ay tahay in masuuliyadaha la rabo in la baahiyo ay wasaaradaha dowlad-goboleedyada u yihiin ilo dakhli oo muhiim ah. Haddaba, waxay ka cagajiidaan maamul-daadejinta iyagoo ka baqaya in laga wareejiyo ilo dhaqaale oo ay dabadeed noqdaan kuwo aan shaqeyn.

Wasaaradaha dowlad-goboleedyada ayaa lagu eedeeyaa in ay marwalba sheegaan in dowladaha hoose aysan lahayn awood u saamaxaysa in ay maamulaan adeegyadan si ay u sababeeyaan sii heysashada awoodaha maaliyadeed iyo kuwa adeeg bixinta ee dowladaha hoose. Si loo caddeeyo in wasaaradaha dowlad-goboleedyada iyo hoggaanka siyaasadda aysan weli go'aansanin in ay maamulka u daadejiyaan heer deegaan, dowladaha hoose ee Puntland ayaa ku dooday in 13 sano ay kasoo wareegatay markii Puntland ay qaadatay nidaamka maamul daadejinta, mana jirto wax adeeg ah, sida waxbarashada iyo caafimaadka, oo loo baahiyey maamullada dowladaha hoose, adeegyadan waxaa weli maamula wasaaradaha dowlad-goboleedka. Ilaha dhaqaale ee wasaaraduhu ka helaan maamulidda adeegyada iyo awooda ay ku shaqeeyaan ayaa ah sababaha ugu weyn ee dib-u-dhaca ku keenaya adeeg bixinta iyo maaliyadda ay ahayd in loo daadejiyo dowladaha hoose.

2. **Jiritaan la'aanta dad lasoo doortay oo metela dowladaha hoose**

Dadka ka qeyb qaatay daraasaddan ayaa isku raacay in jiritaan la'aanta xubno gole deegaan oo lasoo doortay ay caqabad weyn ku tahay maamul daadejinta. Xubnaha golaha deegaanka waxaa soo xula odayaasha beeshooda ama waxaa soo doorta ergo beeleed oo badanaa ka kooban shan xubnood. Hase yeeshee saddex dowlad hoose oo ka tirsan Puntland – Qardho, Eyle, iyo

Ufeyn – ayaa goleyaal deegaan ku doortay doorasho qof iyo cod ah dabayaaqadii 2021, waana markii ugu horreysay doorasho nuucaan ah ay dhacdo muddo 50 sano ah. Maqnaanshaha doorashada dowladaha hoose ayaa marmarsiyo siineysa dowlad-goboleedyada inay dib u dhigaan maamul-daadejinta. Sababaha fudud ee ay wasaaradaha dowlad-goboleedyadu ku andacoodaan mar kasta oo doodda maamul-daadejinta lasoo hadal qaado ayaa ah in dowladaha hoose aysan lahayn xubno gole deegaan oo lasoo doortay oo sharciyad ka haysta dadka deegaanka. Taa waxaa iyaduna la mid ah in dowlad-goboleedyadu aysan sidoo kale lahayn xildhibaanno si toos ah loosoo doortay balse ay leeyihiin xildhibaanno la magacaabay.

Degmooyin badan – oo u badan Galmudug iyo gobolka Banaadir – in aanayba dhisneyn goleyaal deegaan ayaa kahor imaaneysa maamul daadejinta, sababtoo ah ma jiraan cadaadis wasaaradaha looga dalbanayo arrinkan. Sidoo kale, degmooyinka ay ka jiraan maamullada lasoo magacaabay sida degmooyinka Galmudug iyo gobolka Banaadir, Gudoomiyayaasha kuma dhiirana in ay u ololeeyaan dhismaha dowladaha hoose iyo maamul daadejinta iyagoo ka baqaya inay xilalkooda waayaan, laguna beddelo kuwo cusub.

Sidoo kale, dad xog-ogaal ah ayaa tilmaamay in aysan garanayn sida ay dowladaha hoose iyo maamullada degmooyinka u isticmaalaan dakhliga yar ee ay soo xareeyaan. Dadka deegaanka lama xisaabtamaan dowladaha hoose sababtoo ah goleyaasha waxaa soo xula odayaasha dhaqanka ama waxaa doorta ergo beeleed tiro yar, marka laga reebo Qardho, Eyl iyo Ufeyn oo ay dadka deegaanka si toos ah oo qof iyo cod ugusoo doorteen wakiiladooda bishii Oktoobar 2021.

3. **Awoodda farsamo oo xaddidan**

Awoodda xaddidan ee dowladaha hoose ayaa lagu sheegay in ay caqabad weyn ku tahay maamul daadejinta. Sikastaba ha ahaatee, mas'uuliyiinta dowladda hoose ee degmooyinka ugu waaweyn Puntland ayaa ku dooday in ay cadaalad darro tahay in dhammaan dowladaha hoose hal qaanad la geliyo. Waxay sheegeen in dowladaha hoose ee degmooyinka waaweyn sida Gaalkacyo, Boosaaso, Garoowe, iyo Qardho ay awood u leeyihiin in ay maamulaan howlahooda marka loo barbar dhigo dowladaha hoose kale oo ay awooddoodu xaddidan tahay. Sidoo kale, awoodda dowladaha hoose ee Galmudug ayaa hooseysa halkaasoo tijaabada dhismaha goleyaasha deegaanku ay tahay mid cusub marka loo eego dowlad-goboleedka Puntland. Mas'uuliyiinta degmooyinka ee Puntland ayaa shaki geliyay arrinta la xiriirta awoodda oo ay sheegeen in wasaaradaha dowlad goboleedyada ay marmarsiiyo uga dhiganayaan in ay sii wadaan maamulkooda ku aaddan bixinta adeegyada iyo dakhliga. Sidoo kale, mas'uuliyiinta degmooyinka ayaa tilmaamay in ay leeyihiin shaqaale loo tababaray gudashada waajibaadka shaqo ee dowladaha hoose. Iyagoo dhaleecaynaya sheegashada wasaaradaha dowlad-goboleedka ee soo noqnoqda ee ah in dowladaha hoose aysan lahayn awood, waxa ay waydiinayaan sida dowladaha hoose u heli karaan/ kobcin karaan awooddooda iyagoo loo diiday fursad ay ku gutaan shaqooyinkooda sharciganu oggol yahay.

4. **Ka tagistan badan ee shaqaalaha**

Gudoomiyeyaasha dowladaha hoose ee Puntland ayaa muujiyay niyad-jabkooda ku aaddan ka tagista shaqada ee shaqaalihii lasoo tababaray ee helay tababarro, xirfado iyo khibrad muddadii ay shaqaynayeen. Shaqaale badan ayaa la sheegay in ay shaqada isaga tagaan oo ay shaqooyin mushaar badan ka raadsadaan dowlad-goboleedka, ururrada aan dowliga ahayn ee maxaliga ah (NGO-yada), iyo hay'adaha caalamiga ah ee ka shaqeeya dowlad-goboleedka iyo guud ahaan dalka. Hay'adahani waxay u muuqdaan kuwo bixiya mushaar ka badan kuwa dowladaha hoose. Dowladaha hoose ma siiyaan mana siin karaan mushaar wanaagsan shaqaalahooda aqoonta u leh dhaqaale la'aanta heysa awgeed. Natiijo ahaan, ma sii heysan karaan shaqaalaha hadda jooga manasoo jiidan karaan shaqaale tayo leh oo u shaqeeya dowladaha hoose culeyska dhaqaale ee ka jira dowladaha hoose awgiis. Mas'uuliyiinta heer degmo ayaa arrintan u arka mid caqabad ku ah in si buuxda loo hirgeliyo maamul u daadejinta dowladaha hoose, waxa ayna taasi siisaa wasaaradaha dowlad-goboleedyada marmarsiiyo ay ku sii haysan karaan awoodaha dowladaha hoose.

5. **Dakhli uruurin xaddidan**

Isku koobidda awoodaha maaliyadeed iyo adeeg bixinta ee dowlad-goboleedyada waxay caqabad ku noqotay dowladaha hoose oo ay marar badan xarumahooda ka dhigeen dhismayaal magac-u-yaal ah oo aan waxtar lahayn. Sii jiritaanka xaaladdani waxa ay meesha ka saartay in qaab-dhismeedka dowladda hoose iyo ballan-qaadyadii maamul-daadejinta ficil loo beddelo, taasina weli waa ay socotaa. Maamul daadejinta waxaa laga hirgeliyay Puntland sanadkii 2009, ilaa iyo wakhtigaas dowladaha hoose ma isticmaalaan awoodaha maaliyadeed iyo adeeg bixinta ee sharciga dowladaha hoose uu qorayo. Sidoo kale, Galmudug oo dhawaan laga dhisay maamullada hoose si lamid ah Puntland, dowlad-goboleedka ayaa isku koobay uruurinta dakhliga iyo adeeg bixinta. Dhibaatooyinka iyo daciifnimada dowladaha hoose waa ay sii soconayaan haddii dowlad-goboleedyada aanay maamullada hoose u daadejin awoodaha maaliyadeed iyo bixinta adeegyada.

6. **Wareejin maaliyadeed oo aan jirin**

Dowlad-goboleedyadu kaliya ma haystaan awoodaha maaliyadeed iyo adeeg-bixinta laakiin arrinta la yaabka leh ayaa ah qeyb yar oo kamid ah dakhliga gudaha ugasoo xarooda xitaa aanay siinin dowladaha hoose. Haddaba, maxay tahay sababta ay dowlad-goboleedyada u dhisaan dowladaha hoose haddii aysan u oggoleyn uruurinta dakhliga iyo awoodaha adeeg-bixinta ee loo oggol yahay ee degmooyinkooda islamarkaana aanay uga qoondeyneynin boqolleey dakhliga uu dowlad-goboleedka soo xareeyo si ay ugu yaraan ugu maalgeliyaan adeegyada? Nasiib darro, dowlad-goboleedyada waxa ay si xooggan ugu ololeeyaan wareejinta maaliyadda, qaarna waxay dalbadaan qoondeyn aan isku dheelitirnayn marka la eego dowlad-goboleedyada kale laakiin waxay ka fogaadaan inay dowladaha hoose u wareejiyaan qaar kamid ah lacagaha dakhliga ah oo ay uruuriyaan.

7. **Wacyiga hooseeya ee muhiimadda dowladaha hoose**

Dad xog-ogaal ah, oo ay ku jiraan mas'uuliyiin ka tirsan dowlado hoose, ayaa u arkay in wacyiga iyo fahamka hadda jira ay dadweynaha ka qabaan dowladda hoose oo xaddidan uu dhibaato ku yahay dadaalka loogu jiro maamul-daadejinta. Wacyiga ma aha oo keliya mid hooseeya ee waxa la sheegay in uu qalloocan yahay. Faham la'aanta shacabka ee dowladaha hoose ayaa lagu sheegaa inay tahay natiijo iyo qeyb kamid ah aragtida dadka ee kooban iyo fahamka ay ka heystaan guud ahaan dowladnimada. Mid kamid ah aragtiyada qalloocan ayaa ah in wasaaradaha dowlad-goboleedyadu ay aaminsan yihiin in haddii ay u daadejiyaan adeegyada maamullada maxalliga ah, ay noqon doonaan kuwo aan loo baahneyn. Qaar kamid ah dadka deegaanka ayaa aaminsan in haddii dowladaha hoose awood la siiyo in ay bixin doonaan canshuur badan, taasoo aan sax ahayn. Waxa kale oo jira fikrado khaldan oo dhibaato ah oo meelaha qaar ka jira oo ah in cashuurta oo la bixiyo ay xaaraan tahay. Fikirkaan gurracan waa mid ka dhashay tafsiir khaldan ee diinta Islaamka. Fikirkaan waxaa uu dhibaato ku yahay faa'iidooyinka ay maamul-daadejintu u leedahay dadka u baahan dowlad hoose oo mas'uul ah oo u adeegta danta guud.

8. **Kalsoonida oo yar**

Dagaallada sokeeye ee daba dheeraaday ee Soomaaliya ayaa dhaawac weyn u geystay guud ahaan bulshada Soomaaliyeed, waxaana taasi ay keentay in kalsoonida ay isku qabto Soomaalida ay hoos u dhacdo. Arrintan aan wali xal loo helin ayaa cakirtay dowlad-dhiska Soomaaliya. Saameyntu waxay ku fidday dowladaha hoose oo qaarkood u nisbeeyaan in maamullada degmooyinka ay leeyihiin qabiilada iyo/ama jufooyinka waaweyn ee deggan degmooyinkaas. Xaaladda hadda jirta ee kalsooni-darrada ah awgeed, waxaa jira gaabis u dhexeeya dowladaha hoose iyo muwaadiniinta deggan degmooyinka.

9. **Ku tiirsanaanta deeq-bixiyeyaasha**

Inkastoo Soomaaliya ay si weyn ugu tiirsan tahay taageerada deeq-bixiyeyaasha, haddana qaar kamid ah mas'uuliyiinta dowladaha hoose ayaa deeq bixiyayaasha iyo hay'adaha samafalka ku eedeeyay inay qeyb ka yihiin dib-u-dhaca ku yimid baahinta maamulka ee heer degmo. Dad lagu wareystay daraasaddan ayaa sheegay in ururadani aysan dooneynin inay daadejiyaan adeeg bixinta. Sababta ay uga caga jiidayaan ayaa ah in ay dareemayaan in mashaariicda ugu badan ee ay fuliyaan hay'adaha aan dowliga ahayn/ururrada caalamiga ah aysan ka turjumayn baahiyaha ay qabaan bulshada. Waxa ay doorbidayaan sii socoshada xaaladda hadda jirta oo ay dowlad-goboleedyada u dhexeeyaan deeq-bixiyeyaasha iyo bulshada. Taa beddelkeeda, mas'uuliyiinta degmooyinka ayaa hay'adaha deeq bixiyeyaasha ku eedeeyay in musqulo ay ka dhiseen meelo fogfog oo ay ka jireen baahiyo ka muhiimsan. Maamul daadejinta ayay saraakiishu sheegeen in ay fududeyn doonto in hay'adaha deeqaha bixiya ay ogaadaan, qaabeeyaan ayna fuliyaan mashaariic ku salaysan baahiyaha degmooyinka maadaama dowladaha hoose ay si dhow u fahmsan yihiin baahiyaha deegaanka ka jira.

10. **Amni-darro iyo colaad beeleedyo**

Amni-darada baahsan ee ka jirta Soomaaliya ayaa caqabad iyo khatar ku ah dowlad-dhiska. Amni-xumada baahsan ee jirta awgeed, dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada ayaa inta badan ku kooban caasimadaha uu fadhigoodu yahay, amarradooduna waxa ay si dhif ah uga gudbaan magaalooyinkaas. Saameynta amni-darrada ayaa sidoo kale khatar ku ah maamulka degmooyinka. Mas'uul sare oo ka tirsan dowladda hoose ee Gaalkacyo (waqooyi) ayaa sheegay in dowladda hoose aysan tagi karin dhulka miyiga ah oo aysan canshuur ka uruurin karin amni darro iyo dagaal beeleedyo awgood. Sidoo kale, waxaa si weyn u saameeyay gobolka Banaadir qaraxyada soo noq-noqda. Arrintan ayaa caqabad ku noqotay habsami u socodka shaqo ee maamullada degmooyinka gobolka Banaadir. Sidoo kale, falalka amni-darro ee ka jira gobolka Banaadir ayaa wiiqay awooddii maamulka Gobolka uu dakhliga uga aruurin lahaa degmooyinka iyo suuqyada ganacsiga ee gobolka Banaadir. Sidoo kale, amni-darrada qeyb ahaan waxaa sababay al-Shabaab oo ka talinayay deegaanno iyo degmooyin ka tirsan Galmudug (kahor inta aysan dowladda federaalka qaadin duullaanka ka dhanka ah al-Shabaab ee deegaannada maamulkaas) iyo dagaal beeleedyada iyo dagaallada jufooyinka soo noqnoqda ee ka dhaca deegaannada qaar ayaa sidoo kale caqabad weyn ku ah maamul daadejinta.

# 5.0 **Gunaanad**

Soomaaliya waxay nidaamka federaalka qaadatay sanadkii 2012 kadib sanado badan oo dagaallo sokeeye ah oo burbur dhaliyey iyo maamullo kumeelgaar ah, si la isugu keeno dalkii burburay loonasoo celiyo kalsoonidii ka dhexeysay beelaha iyo jufooyinka. Nidaamkan ayaa horseeday in la sameeyo dowlad-goboleedyo, kuwaasoo aan weli si buuxda u shaqeyn. Federaalayntu awoodsiin la taaban karo uma keenin dowladaha hoose sidaas darteedna waa mid aan dhameystirnayn. Waxa waxaa weli awoodda, go'aan gaarista, iyo qoondeynta kheyraadka gacanta ku haysta siyaasiyiinta heer federaal iyo heer dowlad-goboleed. Sikastaba ha ahaatee, qaadashadiisu waxay ka dhalatay tijaabadii xanuunka badneyd ee xukunkii dowladdii militeriga oo dhammaan awoodaha ay ku uruursanaayeen caasimadda. Taasi waxay keentay in dadku ay safarro dheer usoo galaan caasimadda si ay u helaan adeegyo ay ahayd inay ka helaan maamullada hoose ee deegaannadooda.

Sidaas darteed, ujeeddada loo qaatay nidaamka cusub ee federaalku waxay ahayd in awoodda loo daadejiyo maamullada heer degmo oo ay dadka intiisa badan ku nool yihiin si loogusoo dhaweeyo adeegyada loogana gudbo dhibaatooyinkii hore. Inkastoo ay jirtay ujeeddadaas iyo faa'idooyin degdeg ah oo laga filayay in laga helo federaalku, awoodda waxaa keliya oo loo dejiyey heerka labaad ee dowladnimada, inkastoo ay jiraan arrimo lagu muransan yahay oo ku saabsan awood qeybsiga. Dowlad-goboleedyada la dhisay kadib qaadashada nidaamka federaalka ayaa dhammaan awoodaha ku koobay caasimadaha dowlad-goboleedyada. Dowlad-goboleed-kii ugu horreeyay ee sameeya dowlad hoose wuxuu ahaa Puntland sanadkii 2009. Dowlad-goboleedyada kale sida Galmudug waxay billaabeen dhismaha dowlado hoose horaantii sanadkii 2020.

Maamul daadejinta waxaa loogu tala galay in adeegyada loo dhaweeyo dadka deegaanka laguna hagaajiyo hab nololeedkooda, taasoo cagsi ku ah nidaamka dowlad dhexe oo ay adeegyadeeda isugu uruursan yihiin caasimadda dalka ama caasimadaha dowlad goboleedyada. Haddana marka loo eego xaaladda Soomaaliya, arrintani waa hiigsi fog in la xaqiijiyo. Inkastoo maamul-daadejinta aan weli laga hirgelin guud ahaan dalka, haddana ma muuqato guulo laga gaaray qeybaha dalka ee uu in muddo ah ka jiray. Dowlad-goboleedyada Soomaaliya waxay dhiseen iyo/ama ay ku guda jiraan dhisidda dowladaha hoose, iyo in adeegyo kala duwan ay u qoondeeyaan dowladaha hoose sida ku qoran sharciyada dowladaha hoose. Sikastaba ha ahaatee, run ahaantii, dowladaha hoose waa qaab-dhismeed magac-u-yaal ah oo aan gudan mas'uuliyadooda ku cad sharciyada dowladaha hoose.

Dowladaha hoose waxay la kulmaan caqabado iyo duruufo ka hortaagan qaabka baahinta maaliyadda iyo adeeg bixinta. Sii socoshada xaalada taagan, oo ah in maamullada degmooyinka loo diiday inay canshuur ka qaadaan deegaannada ay maamulaan, ayaa dadka deegaanka ka horjoogsaneysa inay mudnaanta siiyan horumarkooda. Sidaas awgeed, dadka deegaanku waxay ka niyad jabeen oo ay ka walaacsan yihiin in aanay helin dowlado hoose oo xil iska saara ka jawaabista baahiyahooda degdegga ah iyo kuwa horumarineed.

Sidaas darteed, ilaa awoodahaas; dakhli-uruurinta, iyo bixinta adeegyada aasaasiga ah, aan loo daadejin dowladaha hoose, maamul-daadejinta ayaa weli ah magac-u-yaal oo loogu talagalay in lagu qanciyo hay’adaha deeqaha bixiya loogana helo dhaqaalaha mashruuca laga fuliyo dowlad-goboleedyada.

# 6.0 Talooyin tixgelin mudan

Si bixinta adeegyada dowladda iyo uruurinta dakhliga gudaha loo daadejiyo, warbixintan waxa ay dhowr tallooyin usoo jeedinaysaa hay'adaha ay khusayso ee saddexda heer ee dowladda iyo sidoo kale hay'adaha madaniga ah iyo beesha caalamka.

1. **Dhisidda iyo hagaajinta awoodda dowladaha hoose:** dowlad-goboleedyada iyo ururrada taageera maamul-daadejinta waa inay ku dadaalaan in ay fuliyaan barnaamijyo tayo-dhis iyo horumarin macno leh oo si gaar ah loogu talagalay dowladaha hoose. Barnaamijyadan karti-dhisidda waa in aysan ku salaysanaan mashruuc, balse lagu saleeyaa qiimeynta baahiyaha ka jira deegaannada kala duwan. Waa in xubnaha golaha deegaanka iyo shaqaalaha dowladaha hoose ay helaan barnaamijyo waxbarasho oo joogto ah. Barnaamijyo dhameystiran oo lagu tayaynaayo laguna horumarinaayo ayaa fududeyn doona meeshaana ka saari doona marmarsiyada wasaaradaha dowlad-goboleedyadu ay inta badan sheegaan marka arrinta maamul daadejinta laga hadlaayo. Kobcinta tayada xildhibaanada goleyaasha deegaanka iyo shaqaalaha waxa kale oo ay gacan ka geysan doontaa wax-ka-qabashada arrimaha hufnaanta iyo isla xisaabtanka.
2. **Doorashada iyo/ama xulista xubno gole deegaan oo tayo leh:** dhibaatooyinka ugu badan ee saameynta ku leh dowladaha hoose ayaa ah in dadka deegaanku ay u arkaan in magacaabista golaha deegaanka ay tahay hab sahlan oo ay mushaar iyo xuquuq kale ku heli karaan. Aragtidaas awgeed, goleyaasha deegaanka ee hadda jira waxaa ka buuxa dad aan aqoon u lahayn oo aan si fiican u fahansanayn shaqada ay goleyaasha deegaanka u taagan yihiin. Goleyaasha deegaanka ayaa sidaas darteed ah kuwo aan waxtar lahayn. Haddaba, waa in wasaaradaha arrimaha gudaha ee dowlad goboleedyada ay il gaar ah ku eegaan cidda loosoo xulayo iyo kuwa loo dooranayo goleyaasha deegaanka. Waa in ay dejiyaan shuruudo adag oo ay ku kala xulaan dadka hanka u leh in ay xubno ka noqdaan goleyaasha deegaanka. Iyadoo loo marayo shuruudo cad oo aan leexleexad lahayn, waxay hubin karaan in goleyaasha deegaanku ay kamid noqdaan dadka mudan sida ganacsatada iyo xirfadlayaasha daneeya horumarinta dadka deegaanka. Kooxahani waa canshuur bixiyayaasha, sidaas darteed waxay xaqiijin karaan ku habboonaanta iyo mudnaanta halka lagu bixiyo canshuuraha.
3. **Waqti mudeysan iyo qorshe hawleed in loo dejiyo daadejinta maaliyadda iyo adeeg bixinta:** Dowlad-goboleedyada sida Puntland oo kale, oo maamul-daadejintu ay muddo toban sano ka badan ku qorneyd warqad oo kaliya, ma sii haysan karaan awoodaha maaliyadeed iyo adeeg-bixineed ee dowladaha hoose iyadoo lagu gambanayo awoodda xaddidan ee dowladaha hoose ee qabashada mas'uuliyadahaas. Taas beddelkeeda, waa in dowlad-goboleedyada ay cayimaan oo ay ku dhawaaqaan wakhtiga ugu dambeeya ee ay dowladaha hoose ku wareejinayaan dakhli-uruurinta iyo adeeg-bixinta. Sidoo kale, dowlad goboleedyada waa in si barbar socda ay uga shaqeeyaan suurta-gelinta xaaladaha awoodda loogu daadejinayo dowladaha hoose sida aqoonta loo baahan yahay.

Maamul-daadejinta aan lahayn muddo cayiman iyo ballanqaadyada aftahanimada ah waxay niyad jebin doonaan rajada dadka deegaanka ee faa'iidooyinka uu maamul-daadejinta u leedahay. Waxaa suuragal ah, in deeq-bixiyeyaasha caalamiga ah ee taageeraya dowlad-dhisidda ay taageeradooda mustaqbalka ee Soomaaliya shardi uga dhigaan rabitaanka dowlad-goboleedyada ee in qeyb kamid ah dakhliga loo wareejiyo heer degmo.

4. **In dowladaha hoose loo qoondeeyo wareejin maaliyadeed:** waa in dowlad-goboleedyadu ay bixiyaan boqolleey qoodeyn wareejin maaliyadeed oo kamid ah lacagta ay ka helaan dakhliga gudaha kasoo xarooda iyo lacagaha ay ka helaan dowladda dhexe ee loo diro dowladaha hoose, kuwaasoo aan ilaa hadda qeyb kamid ah lacagahaas aan la siin. Haddii aan dowladaha hoose loo oggolaan inay uruuriyaan dakhli si waafaqsan shuruucda dowladaha hoose ama aan la siin wareejin maaliyadeed, qaab-dhismeedka dowladaha hoose wax qiimo ah uma yeelan doono dadka deegaanka ee weydiisanaya in si degdeg ah looga jawaabo baahidooda.
5. **Olole wacyigelineed oo degdeg ah:** Faham yarida iyo wacyi-gelin la'aanta hadda jirta ee ku aaddan dowladaha hoose ayaa ah mid wiiqaysa oo dhibaateyneysa horumarkooda. Haddaba, waa in dowlad-goboleedyada, madaxda dowladaha hoose, ururrada bulshada rayidka ah iyo hay'adaha taageera maamul-daadejinta ay ku dadaalaan sidii loo sameyn lahaa olole wacyi-gelineed oo xooggan oo dadka deegaanka looga wacyi-gelinayo sidii ay dowladaha hoose u shaqeeyaan, si looga hortago fikradaha khaldan ee laga aaminay doorkooda. Sare-u-qaadista fahamka dadweynaha ayaa muhiimad weyn u leh la falgalka dowladaha hoose ee dadka deegaanka; kordhinta dakhliga; kordhinta isla xisaabtanka iyo hufnaanta adeegyada dowladaha hoose; u doorashada dad ku habboon goleyaasha deegaanka; iyo tabarucaad mutadawacnimo ah ee mashaariicda dowladaha hoose. Siyaabaha loo sameyn karo wacyi-gelintan waxa kamid noqon kara masaajidyada oo ay culimada diinta si toos ah jameecada ugu sharrixi karaan muhiimadda ay dowladaha hoose u leeyihiin dadka deegaanka; warbaahinta bulshada ku kulanto iyadoo loo marayo saameyeyaal ku habboon; xarumaha waxbarashada iyo machadyada; idaacadaha; iyo farshaxanno.
6. **Ololeynta iyo cadaadiska dowladaha hoose si ay u helaan maamul daadejin macno leh:** Dowladaha hoose ee jira waa in aysan sugin ilaa wakhtiga ay dowlad goboleedyada ka go'aansanayaan in awoodaha maaliyadeed iyo kuwa adeeg bixinta ay u daadejinayaan dowladaha hoose. Waxa loo baahan yahay in dowlad-goboleed walba laga sameeyo kooxaha cadaadiska dowladaha hoose oo dowlad-goboleedka cadaadiska ku kordhiya si ay u daadejiyaan mas'uuliyadda maaliyadeed iyo adeeg bixin ee dowladaha hoose. Si loo gaaro natiijooyinka la doonayo, kooxaha cadaadiska dowladaha hoose oo ay kamid noqon karaan ururrada bulshada rayidka ah, culumaa'udiinka, ganacsatada, haweenka, iyo dhalinyarada waa in ay isugusoo baxaan taageerada dadkooda si ay u muujiyaan in arrintan ay tahay baahi dadweyne oo aysan ahayn mid shaqsiyaad dano gaar ah ku wato. Sidoo kale, waa in ay ka fogaadaan iska hor imaadka danaha oo aysan u hoggaansamin caga-jugleyn siyaasadeed, xeelado kala qeybin ah, iyo wada-shaqeyn la doonayo in lagu leexiyo laguna wiiqo hannaanka.

7. **In la xoojiyo xafiisyada hormuudka ka ah maamul-daadejinta:** Xafiisyada madaxweyne ku xigeennada Puntland iyo Galmudug waa xafiisyo ku howlan wadahadalka la xiriira daadejinta ee u dhexeeya wasaaradaha soo uruuriya dakhliga iyo kuwa bixiya adeegga bulshada oo dhinac ah iyo dowladaha hoose oo dhinaca kale ah. Sikastaba ha ahaatee, mas'uuliyiinta degmooyinka waxay xafiisyadan u arkaan inay qeyb ka yihiin xaaladda siyaasadeed ee taagan waxa ayna aaminsan yihiin inaysan lahayn awood ku filan oo ay ku qaataan go'aamo u hiilinaya maamul-daadejinta maaliyadda iyo adeegyada ee dowladaha hoose. Waxaa jiray doodo badan ee uu qabanqaabiyay xafiiska madaxweyne kuxigeenka Puntland, balse dadka dhaliila ayaa sheegay in aysan wali jirin horumar la taaban karo oo laga gaaray maamul daadejinta. Si qaabkan wax looga beddelo, dowlad-goboleedyada, gaar ahaan madaxweynayaasha, waa in ay ku dhawaaqaan go'aankooda cad ee maamul-daadejinta, kadibna ay awood buuxda siiyaan madaxweyne ku-xigeennada si ay u dardar-geliyaan geeddi-socodka.
8. **Dib-u-heshiisiin dhab ah oo heer deegaan ah:** Dib-u-heshiisiin dhab ah waa mudnaan degdeg ah ee heer kasta oo bulshada Soomaaliyeed ah la siiyaa si loo xalliyo tabashooyinka iyo cuqdadda ay beelaha kala duwani kala qabaan. Baahidaas ayaa si weyn looga dareemay heer deegaan halkaasoo ay ka dhismeen dowlado hoose ama laga dhisayo. Dadka deegaanka ayaa u baahan dib-u-heshiisiin dhab ah si looga gudbo tabashooyinkii hore ee aan weli la xalin. Tani waxay dib usoo celinaysaa wadajirka bulshada iyo dhisidda dowlado hoose oo ay dadku leeyihiin. Dareenka iyo tuhunka jira ee u dhexeeya ama ka dhex jira qabiilada/jufooyinka wada dega degmooyinka waxay wiiqeysaa dhisidda maamullo hoose oo shaqeeya, waxa ayna u horseedeysaa fashil joogto ah. Waa in dowlad-goboleedyada ay hannaankaas ka shaqeyntiisa billaabaan, ayna hawshaas si fiican u qabtaan kahor inta aan la dhisin dowladaha hoose ama ay barbar socdaan howlaha maamul daadejinta ee ka socda Puntland oo ay dowladaha hoose in muddo ah dhisan yihiin.
9. **Ururrada taageera maamul daadejinta waa in ay ku xiraan shuruudo ka shaqeyntooda heer degmo:** Ururrada taageera maamul daadejinta waa jileyaal dhinac saddexaad ah oo muhiim u ah maamul daadejinta. Mashaariicda laga fuliyo dowlado hoose oo kala duwan, una badan Puntland, waxaa ugu horreyn maalgelintooda leh barnaamijka JPLG ee maamul daadejinta heer deegaan. Hay'adahan waa inay si dhab ah u riixaan in maamul daadejin macno leh loo sameeyo dowladaha hoose ay taageereen iyagoo ku xiraya shuruudo si ay mashaariic dheeraad ah uga fuliyaan dowladaha hoose iyagoo tillaabooyin muuqda u qaadaya baahinta awoodaha maaliyadeed iyo bixinta adeegyada ee dowladaha hoose. Sidaas darteed, hay'adahan waxay awood u leeyihiin inay saameeyaan dowlad goboleedyada maadaama ay hayaan lacagaha mashaariicda laga fuliyo dowladaha hoose.

# 7.0 Tixraac


Academy for Peace and Development and Interpeace, 2006. *Local Solutions: Creating an Enabling Environment for Decentralization in Somaliland,* s.l.: s.n.

Bradbury, H. Y. a. M., 2011. Public Perception of Local Councils in Somaliland. Hargiesa, SORADI, p. 6.

Bradbury, M., Menkhaus, K. & Marchal, R., 2011. Human Development Report for Somalia, 2011, s.l.: s.n.

Constitution of the Somali Republic, 1960. *Art.1 (1).* s.l.:s.n.

ConstitutionNet, 2018. A Brief Background Constitutional History. [Online] Available at: https://constitutionnet.org/country/somalia [Accessed February 2023].

ConstitutionNet, 2018. *Constitutional history of Somalia.* [Online] Available at: https://constitutionnet.org/country/somalia [Accessed 29 March 2022].

Elmi, A., 2015. Decentralized Unitary System: A possible Middle Ground Model for Somalia. Arab Center for Research & Policy Studies, May, p. 2.

Haas, A. R., 2017. *An overview of municipal finance in Hargeisa, Somaliland,* s.l.: International Growth Center.

Interpeace, 2021. Historic Puntland local elections pave the way for Somalia's democratization. [Online] Available at: https://www.interpeace.org/2021/12/local-government-elections-in-puntland-pave-the-way-for-somalias-democratization/ [Accessed February 2023].

Ioan M. Lewis, J. M., 1995. *Study of Decentralized Political Structures for Somalia: A menu of Options,* s.l.: European Union.

Ismail, I. A., 2010. *Governance: The Scourge and Hope of Somalia.* Victoria, BC: Trafford.

Ismail, I. A., 2010. Governance: The Souurge and Hope of Somalia. s.l.:Trafford.

Laitin, D. D., 1976. The Political Economy of Military Rule in Somalia. *Modern African Studies,* September, 14(03), p. 452.

Local Administration & Local Council Elections Law, 1963. *Art.3.* s.l.:s.n.

Local Administration & Local Elections Law, 1963. *Art.9.* s.l.:s.n.

Local Government Reform Act, 1972. *Local Government Reform,* s.l.: s.n.

Max Planck Foundation for International Peace and Rule of Law, 2016. *Comparative Manual on Federalism in Somalia.* Heidelberg: s.n.

Metz, H. C., 1992. *Somalia: A Country.* Washington: Library of Congress.

Ministry of Interior, Federal Affairs and Reconciliation, n.d. *Local Governance.* [Online] Available at: https://moifar.gov.so/local-governance/ [Accessed March 2022].

PDRC & Interpeace, 2015. *Peace in Puntland: Mapping the Progress Democratization, Decentralization, and Security and Rule of Law,* s.l.: s.n.

Samatar, A. I., 1989. *The State and Rural Transformation in Northern Somalia 1884-1986.* Madison: The University of Wisconsin Press.

Smoke, P., 2003. DECENTRALIZATION IN AFRICA: GOALS, DIMENSIONS, MYTHS, AND CHALLENGES. *Public Administration and Development,* 23 December, 23(1), p. 7.

Somaliland law, n.d. *Local Government Law.* [Online] Available at: http://www.somalilandlaw.com/body_local_government_law.htm [Accessed April 2022].

The Global Economy, 2021. Government effectiveness-Country rankings. [Online] Available at: https://www.theglobaleconomy.com/rankings/wb_government_effectiveness/ [Accessed February 2023].

UN Habitat, 2016. Building Local Governanace in Somalia, s.l.: s.n.

UN JPLG, 2017. *PROGRAMME ANNUAL PROGRESS REPORT Period: 2017,* s.l.: s.n.

UN-HABITAT, 2016. *BUILDING LOCAL GOVERNANCE in SOMALIA,* s.l.: s.n.

UN-Habitat, 2016. *Building Local Governance in Somalia,* s.l.: s.n.

Wasuge, M. & Yusuf, F. I., 2021. Galmudug Reconciliation: Processes, Challenges, and Opportunities Ahead, s.l.: s.n.

World Bank Group, 2015. *Somalia Economic Update: Transition amid Risks with a Special Focus on Intergovernmental Fiscal Relations,* s.l.: s.n.

Yusuf, F. I. & Wasuge, M., 2021. Fiscal Federalism in Somalia: Constitutional Ambiguity, Political Economy and Options for A workable Arrangement, s.l.: s.n.

Yusuf, F. I., 2022. Decentralized but contested: Examining the federal government's decentralization of educational services in Mogadishu to Benadir Regional Administration, s.l.: s.n.

## Ku saabsan Somali Public Agenda

Somali Public Agenda (SPA) waa hay'ad aan macaash doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan.

Somali Public Agenda waxa ay aaminsan tahay in dhammaan dadka Soomaaliyeed ay mudan yihiin adeegyo bulsho oo wanaagsan oo ay kamid yihiin helitaan waxbarasho la awoodi karo, daryeel caafimaad, guri, amni iyo caddaalad ee uu bixiyo maamul hufan oo lala xisaabtamo.

## Howlaha Aan Qabanno

**Cilmibaaris**: Somali Public Agenda waxa ay ka qeyb qaadataa sare-u-qaadista fahamka iyo hagaajinta maamulka dowliga ah ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cilmibaaris iyo falanqeyn lagu sameeyo arrimo kala duwan oo saameeya siyaasadda dowladda iyo bixinta adeegyada bulshada. SPA waxay si joogto ah u daabacdaa daraasado iyo faallooyin (oo intooda badan ku qoran afafka Soomaaliga iyo Ingiriiska) falanqeeya maamul-daadejinta iyo dowladaha hoose; dimuqraadiyeynta iyo doorashooyinka; maamulka maaliyadda; amniga, cadaaladda, iyo ku dhaqanka sharciga; qorsheynta magaalooyinka iyo maamulka dhulka; shaqada; iyo, nidaamka waxbarashada iyo adeegyada caafimaadka. Qoraalladani waxay inta badan macluumaad iyo falanqeyn ka siiyaan muwaadiniinta, siyaasad-dejiyeyaasha, aqoonyahannada iyo beesha caalamka arrimaha dowlad-dhisidda iyo adeegyada bulshada ee Soomaaliya.

**Wadahadal**: Public Agenda Forum waa madal iyo goob lagu falanqeeyo arrimaha dowlad-shisidda iyo adeegyada bulshada ee Soomaaliya. Madashu (oo ay ku jiraan kulamo bille ah oo loo yaqaanno Gaxwo & Gorfeyn) waxaa loogu talagalay in lagu gorfeeyo arrimaha muhiimka ah ee mudnaanta u leh bulshada. Qeybaha kala duwan ee bulshada oo ay ku jiraan cilmibaarayaal, siyaasad-dejiyayaal, iyo xirfadlayaal ayaa lagu martiqaadaa inay si siman u lafaguraan arrimaha laga doodayo. Public Agenda Forum waxay qabanqaabisaa wadahadallo lala yeesho siyaasiyiinta iyo dadweynaha waxayna abaabushaa aqoon-is-weydaarsiyo, siminaaro, iyo bandhigyo buugaag iyo daraasado. Inta badan qodobbada kasoo baxa doodaha Madasha waxay macluumaad ku biiriyaan faallooyinka Somali Public Agenda.

**Naqshadeynta Adeegyada Bulshada**: Iyadoo lagu saleynayo natiijooyinka iyo talooyinka daraasadaheena, waxaan innagoo kaashaneyna hay'adaha ay khuseyso naqshadeynaa siyaasadaha, barnaamijyada, iyo mashaariicda innagoo adeegsaneyna SPA Policy Lab. Innaga oo kaashaneyna siyaasad-dejiyeyaasha, shaqaalaha rayidka, iyo bulshada, waxaan u naqshadeynaa adeegyada dadweynaha si aqoon ku dhisan. Kahor inta aanay dowladdu maalgelin siyaasadaha, barnaamijyada, iyo mashaariicda la qorsheeyay, waxaan ka caawinnaa in lagu tijaabiyo adeegga la naqshadeeyay heer yar si loo fahmo waxtarka adeegyada la naqshadeeyay.

**Tababar**: Iyadoo lagu saleynayo natiijooyinka cilmibaaristeena iyo naqshadeynta aan sameyno, Xarunta Waxbarashada iyo Horumarinta ee Somali Public Agenda waxay bixisaa koorsooyin tababar gaaban si gacan looga geysto dhisidda kaadir maamul oo fulin kara siyaasadaha iyo barnaamijyada. Xarunta Waxbarashada iyo Horumarinta ujeeddadeedu waa in lagu xiro shaqaalaha rayidka ah, siyaasiyiinta, iyo shaqaalaha hay'adaha aan macaash doonka ahayn bulshada iyo in la siiyo maamullada xirfadaha farsamo ee lagama maarmaanka u ah diyaarinta iyo hirgelinta xalalka caqabadaha adeegga dadweynaha ka jira. Intaa waxaa dheer, xaruntu waxay siisaa tababaro xirfadlayaal Soomaali ah gaar ahaan kuwa xiiseynaya inay ku biiraan dowladda iyo sidoo kale xirfadlayaasha ku howlan adeegyada bulshada iyo hay'adaha aan macaash doonka ahayn.

Somali Public Agenda
Mogadishu
Somalia
Tel: +252(0)85 8358
Email: info@somalipublicagenda.org
Website: <https://www.somalipublicagenda.org>